

Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan

Bilawgii 24–50

Michael Eaton

Hawlaha buugan waxaa lagala xidhiidhaya

Sovereign World

PO Box 777

Tonbridge

Kent, TN11 0ZS

England

Waxaa xaq kasta u leh [C] 1999 Michael Eaton

Xaq kasta waa la dhawray. Ma jirto qayb buugan katirsan ee dib loo daabici karo, ama lagu geedsan karo hab kale ama lagu baafin karo habkaleeto ey ahaataba sida qalabka isgaarsinta, koobi, rekoor ama hab kaleba, iyadoo aan rusqa laga helin xaqdhawrka daabacadda. Qayba yar yar waa laga istecmaali kara sida xigasho oo laakiin la aqoonsanayo halka qoraalkaas laga soo xigtay.

Isla qoraaga buugan wuxuu haddana qoray buugag kale sida:

Wacdiyaha (Faahfaahinta Baybalka ee Tyndale) – IVP

Kunoolanshaha Nolol Alla ka cabsasho leh – Paternoster

Ku raynraynta Kiniisadda Ilaah ee adduunka oo dhan ka jirta – Paternoster

Kunoolanshaha Nimcada (Rooma 6–7) – Paternoster

Baridda ku saabsan Dhiirigelinta – Paternoster

Saamu'eelka 1aad (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World

Saamu'eelka 2aad (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World

Yooxanaha 1aad, 2aad, 3aad (Shiishka ku taagan Baybalka) – Christian Focus

Hosheca (Shiiska ku taagan Baybalka) – Christian Focus

Tesaloniiikaha 1aad iyo 2aad (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World

Bilawgii 1–11 (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World

Markos (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World

Calaamadda buugan adduunka looga aqoosan yahay - ISBN: 1-85240-269 5

Hab dhismeydka buugan waxaa laga soo xigtay CRB Associates, Reepham, Norfolk

Waxaa turjumtay oo qoraalka isku dabaridday idaacadda Codka Wadada Nabadda (CWN).

Waxyaalaha buugan ku jira

Horudhaca guud	4
Horudhaca Qoraaga	5
Hogaaminta Ilaah	6
Doondoinka hogaanka Ilaah	9
Raacista doonista Ilaah	12
Waxyaalaha barakada kaa soo gaadhi karaan	14
Dabiicad bedelan ayuu Ilaah xushay	17
Kaga guulaysashada Imaanka	20
Waddooyinka khiyaanada; natijooyin xanuun badan	23
Qaladaadka dadka, Nimcada Ilaah	26
Yacquubka aan jaclahay	29
Khiyaanalawga waa la khiyanaya	32
Waxaad iisu diyarisaa nolol qiima leh	34
Adkaysashada xataa markii welwel badan lagu jiro	37
U guda gelidda safarka Imaanka	40
Sida aan iisu fahanno	43
Nabad raadinta	46
Ilaah ayaa weeraray	49
Guul farxad leh	51
Dib u fahmidda Ilaah	54
Annaga, Ilaaheena iyo addeegga aan Ilaah u addeegeeyno	57
Mustaqbalka Iisaw	60
Wiil dhallin yar ah iyo Mustaqbalkiisa	63
Sheekada Yahuudah	65
Iisu diyaarinta Hawsha Ilaah	68
Barbaarista Hadiyadda	71
Ka maqlidda Ilaah	74
Xukun Buuxa	76
Dadka kale ku soo dhawey tobadkeenidda	79
Hoos joogidda amarka Ilaah	81
Jacaylka waa inuu saldhig adag lahaado	84
Yuusuf Wadaadkii sancoolaha ahaa	87
Cafiska daafaca leh	90
Yacquub oo tijaaba cusub bilaabaya	93
Hogaamiye sancoola ah	95
Sadaalintii ambabbixinta uu Yacquub dhiibay	100
Waxyaalaha horaanba ku jireen kotalagalka Ilaah	103

Horudhaca guud

Waxaa jirta baahi ah in fahfaahinta Baybalka lagu fasiraa habka ugu sahlan ee maanta inta badan lagu dhaqmo si ay kuwa ingiriiska ku hadla ugu sahlanaato [si ay kuwa afka Soomaaliga ku hadlo si sahlan ugu fahmaan farriinta Baybalka]. Fahfaahinta noocaas ah waxay saldhig u yeleysa wax ka barashada Baybalka si ay kuwa akhristaan uga faa'idaan qoraaladan (haddii ay wacdiyayaal yihiin) si ay markay wax sharaxayaan hab wanaagsan wax u fahansiyaan. Waxay u baahan yihiin inay ka leexdaan erayada culus ama aan la fahmaynin iyo weliba hab dhismeydka jumladda qoraalka. Waa inay ka leexdaan tusalooyinka aan laga garanaynin dhaqanka aad wax baraysid. *Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan* waxyaalahaas ayey xoogga saraysa. Meela badan oo adduunka ka tirsan ayaa laga istecmaali kara qoraaladan.

Fasiraadan waxay ku salaysanyihiin qoraalada Cibraaniga iyo kuwa Griigga. Inta badan Baybalka keliya ee halkan lagaga istecmaalay turjumaanka iyo fasiraadda waa Baybalka afka Soomaaliga.

Qoraalkan ma ahan mid loogutalagalay in doodo looga jawaabo ama waxyaalaha yar yar ee dooda ay ka taagan tahay. Saa ay tahayna qofka qoraalkan istecmaali doono waa inuu xor u ahaado inuu fasiraaddiisa oo aan Baybalka iyo dhaqanka ka baxsanayn uu ku fasiraa wax bariddiisa. Laakiin isla sida ay hooyada guriga u jacayshahay inay cuntada tan ugu macaan reerkeeda u bixiso oo ay laakiin tuseynin welka ay ku karisay, isla sidaas annaga waxaan u dan leenahay 'cuntada wanaagsan' ee qoraalka Eebbe, ee laakiin ma ahan erayada culculus ee khamuuska ku jira iyo waxyaalaha ay doodaha ka taagan yihiin iyo wiixi la midka ah. Marar dhif ah ayaa waxyaalaha noocaas ah looga hadla qoraaladan. Isla sidaana erayada horudhaca inta badan ma ahan inay dooda wada hadal u baahan laga soo saaro laakiin qaar yar oo u wanaagsan uun in lagu fahmo mawduuca guud. Maraha qaarkood waxaa dhici karta in horudhac yar oo fahfaahin leh lagu daro qoraalka guud laakiin haddii si guud loo eego cutubka ugu horeya ee buugan wuxuu toos u bilabaya mawduuca laga hadlaya. Markii kor laga eego waxaa caddanaysa in waxyaalaha halkan looga hadlaya ay yihiin kuwa cilmi sare looga fikirayse mawduuca si sahlan oo qof kasta uu sahal ku fahmi karo

ayaa looga shaqeyey. Saa ay tahayna, sahlanaanta hab dhismeydka qoraalka ma ahan isla sidaa markii loo kaco qoraalka iyo micnihiisa guud. Erayga Ilaah waa in si taxadir leh loo dhiga loona fasira laakiin laakiin luuqadda waa inaynan ka duwanaanin ujeedada mawduuca ee uu qof kasta si sahlan ku fahmi karo. Waxyaalahan oo dhan waa lagaga shaqeyey qoraalka buugan.

Michael A. Eaton

Horudhaca Qoraaga

Buugan saddexaad ee Bilawgi isla sida labada kale ee ka horeyeen, waxaa aasaas u ah wacdin aa ka wacdiyey qaybtan Baybalka. Sanada la soo dhaafay waxbariddan buugga bilawgii ayaan ka bixiyey raadiyaha la yidhaahdo Trans-World Radio. Ka bacdina sanadka 1994 waxaan magaalada Nayroobi kaga wacdiyey wax ku saabsan nololsha Yuusuf. Maalmahan ugu dambeyey waxaan ka wacdinayey buugga Bilawgii cutubka 24-50 isla sida aan ka sameeyey meela badan oo koofur Afrika ka tirsan. Cutubadan waa natiijooyinka ka soo baxeen wacdinta aan ka bixiyey Bilawgii. Aad ayaan ugu mahadinaya Kiniisadaha iyo iyo saaxibada Magaalooyinka ka tirsan Koofur Africa sida, Johannesburg, Pietmaritzburg, Mtubatuba iyo Durban kuwaa oo aad u soo dhaweyey boqolkiiba inta badan ee waxbaridan sanadka 1996.

Aad baan ugu faraxsannahay mar kastaba ninka la yidhaahdo Chris Mungeam farxaddiisa iyo weliba jacaylka uu u qabo inuu faafiyo Erayga Ilaah. Waxaan weliba si dharaad ah ugu hambalalyeynaya Jenny, Tina Gysling, gabadheyda oo qoraaladeyda aad uga shaqaysay, wiilkeyga Calvin oo markay kombyutarada shaqayn wayeen iga badbaadiyey inaysan hawsheyda lumin ama qasmin kaa oo weliba fikiradahiisa hawsheyda dhiseen ee aan jacayl inaa baalalka buugan ka reebo.

Michael A. Eaton

Cutubka 1aad

Hogaaminta Ilaah

(Bilawgii 24:1-12)

Buugga Bilawgii wuxuu saldhig u yahay buugagta Baybalka ood dhan. Wuxuu na siinaya waxyaalaha muhimka ah ee aan uga baahannahay inaan ka ogaano Ilaah iyo badbaadada, kuwa oo qayb kastoo waxbaridda Masixiinta ay u baahan yihiin wada taabanayso. Haddii ay ahaan lahayd inaan lahaano oo keliya hal buug ee Baybalka, waxaan u malaynaya kan aan haysan lahayn inuu ahaan lahaa Bilawgii! Waxaa ku jiraan wax alla waxaan doonayno inaan ka barano uumista iyo dembiga iyo xukunka. Waxaa kaloo ku jirta ballanta Badbaadiyaha. Wuxuu leeyahay nolol kaga deyrasho leh iimaanka, Ibraahim. Adiga haddii aan soo koobno wuxuu ka wada hadlaya wax alla wixii ay Masixiinta iimaanka uga baahan yihiin.

Bilawgii 1:1-11:26 waxay na siinaysa horudhaca iyo hab dhismeydka ee qorsheynta badbaadada. Waxay noo shegeysa sababta looga baahan yahay badbaadiye.

Bilawgii 11:27-25:18 waxay noo shegeysa sheekada Teerax, Ibraahim iyo Ismaciil. Xagga Ibraahim waxay naga siinaysa nolol ku deyrasho leh – in kastoo uu ahaa rumayste aan naftiisa weligiis daahir ahayn. Masixiinta waa carruurta Ibraahim. Ibraahim waa tusaalaha Ilaah ee lagu garanayo waxa ay tahay rumaysashada ballanta Ilaah.

Halka aan dhacdadan ka bilabeyno waa ugu dambaysta nolosha Ibraahim oo waxaa la jooga marka uu hogaanimada qoyska iimaanka ku midawbeen ku wareejinayo wiilkiisa Isxaaq. Dhacdada waxay haddana noo bandhigeysa sida geesiyaalka Israa'iil in kastoo ay dembiya lahaayeen ay u ahaadeen kuwa xagga iimaanka ka dhisan ee dhaxleen ballanta Ilaah. Laakiin horta aan eegno sida uu Ibraahim wiilkiisa waddada ugu hagaajiyey.

Isxaaq naag buu u baahnaa, laakiin dumarka Kanciinta waxaa loo oгаа inaysan naaga wanaagsan noqonaynin! Waxay ahayd wakhti uu Ibraahim si daran ugu baahnaa hogaaminta iyo macaawinada Ilaah.

Dad badan ayaa ku dhib qaba xagga hogaaminta. ‘Haddii aan ogaan lahaa waxay tahay doonista Eebbe,’ ayey leeyihiin qaarkood.

Hogaaminta waa hawsha Ilaah ee ma ahan wax aan annaga ku shuqul leenahay. Ilaah wuu na hogaaminaya haddii aan doonistiisa ku socono. Inta badan uma baahnin hogaamin qaas ah. Taasi waxay ka caddaha taariqaha dadka geesiyaaalka iimaanka loogu yeedhay ee Baybalka ku jira ee rag iyo dumarba leh. Taasi waxay noo caddeynaysa inaysan si joogta ah ugu soconin hogaaminta qaaska ah.

Yaanan umalaynin markaan ka hadlayno hogaamin inay tahay maab ama qorsheynta sida dadka guryaha dhiso ay racaan. Haddii uu qofka qorshahaasi hal tallaabo ka boodo dhismada oo dhani way burbureysa. Laakiin hogaaminta Ilaah waa sida maabka oo aad adigoo gaari ku jirtid aad raacaysid markaad ku socotid meel aad boqolkiiba konton aad garanaysid. Inta badan waa la luma laakiin isla markiiba maabka ayaa la eegaya oo dariiqa ayaa lagu soo noqonaya. Waa wax aad samaynsid inta aad safreysid. Bilawgii cutubka 24aad ma ahan hogaaminta ugu wanaagsan ee naag lagu helo! Waxaase ku jiraan waxyaala qaas ah markii dhaqan ahaan laga eego oo maalmihii Ibraahim suurtagal ahaa in nolosha looga deydo. Afar waxyaalahaas ka mid ah ayaa sheegaya.

1. Ma ahan inaad ogolaatid naag aadan arkin sida uu yeelay Isxaaq.
2. Ma ahan inuu aabbahaa go’aan ka gaaro naagta aad guursan lahayd. Tani waa arin haddaba laga sameeyo dhaqamada qaarkood [weliba dadkeena Soomaaliyeed] qaas ahaan waddanka Indiya laakiin ma ahan sharci u go’an bulsha kasta ama loogu talagalay in lagu dhaqdo wakhti kasta.
3. Ma ahan inaad addoonkaaga u adeejisid inuu wiilkaaga u doono naag.
4. Ma ahan qasab inaad naag qabiilkaaga ah guursatid ama ay naagta guursato nin qabiilkeeda ah isla sida uu Ibraahim u helay wiilkiisa mid ka mid ah dadkiisa – Isxaaq.

Addeecista Kitaabka way ka duwan tahay kudeyashada dhaqanka jiri jiray waagii uu Baybalka aasaasmayey. Sheekooyinka qaarkood waa kuwa ku dhisan dhaqanka Mesobotamiya la’anna waa la addeeci karaya Kitaabksa qoduska ah.

1. Marxaladda waxay ahayd mar ay baahi daran jirtay sababtaas awgeed Ibraahim wuxuu u baahnaa macaawinada Ilaah. Isagu duq buu ahaa (24:1). Waxaa jirtay khatar ah inuu Isxaaq Kacaaniinta gabdhahooda middood guursado. Ibraahim sababtaas ayuu addoonkiisa ugu qasbay inuu ku dhaarto inaysan taasi dhici doonin (24:2, 3). Ma ahan inuu midab takoor sameeyey. Ma ahan inuu nacas ahaa markuu ku fikirayo inuu Isxaaq guursado gabadh qabiilkiisa ah. Marxaladda halkan ka jirtay ayaa ah mid ruuxiyani ahayd ee ma ahan habka aan dhaqsaba marxaladda ku saabsan. Ibraahim wuxuu rabay inuu Isxaaq guursado qof ay isku iimaan yihiin wuuna hubayh inuu qabiilkiisa ka helayo qof noocaas ah ee hareerahaas degan.

Waa muhim inuu qofka ka guursado kuwa Ilaah yaqaano. Muhim ma ahan inay isku waddan ahadaan ama kala wadan ahadaan. Waxa muhimka ah ayaa waxay tahay inuu iimaankooda isqaadanayo. Ibraahim marnaba kuma fikirayo inuu Isxaaq guursado oo qaynuunkiisa ayuu ku taagan yahay oo ah inuusan Isxaaq guursanin qof aanay isku

iimaan ahayn ama mid ka mid ah Kancaaniinta oo aan iimaankeeda bedelin. Waa tan arinta uu Ibraahim aad xoogga u saarayo.

2. Waxaa kale uu aad uga digaya inaysan faraca dambe iimaanka uga leexanin laakiinse ay horay uga socdaan iyagoo iimaankooda xoojinaya. Addoonkii Ibraahim dhib buu kiciyey. Waxaa dhici karta inaysan jiri doonin naag ogolaan doonto inay isaga soo raacdo. Miyey suurtagal tahay inuu Isxaaq mooraha aabbihiisa dib ugu laabto oo uu soo kaxaysto gabahd uu guursado (24:5)? Jawaabta Ibraahim ayaa waxay tahay ‘maya’. Ma dhici karto inuu Isxaaq Xaram dib ugu laabto. Waxay noqonaysa mid ka hor imanaysa wax alla wuxuu Ilaah ku amray Ibraahim. Ilaah wuxuu ku dhaartay inuu mustaqbalka goyska Ibraahim uu ahaan doono Kancaan (24:6-7). Tan waa ka hadli karna hadda madaama ay dhacdada Bilawgii 22:16:-17 ay durbaba dhacday. Haddii ay sheekadan dhici lahayd ka hore dhacdada Bilawgii 22:16-17, Ibraahim kuma dhawaaqi lahayn wuxuu ku dhawaaqay. Wuxuu xaqiiq u lahaa inuu addoonkiisa soo heli doono gabadh ku habboon. Laakiin hadduusan Ilaah ogolaanin inay marxaladdan saa u dhacdo xal kale ayuu keenaya. Dhabtii Isxaaq waa inuusan dib uga noqonin heshiiskan la bixiyey.

Waxaa halkan ka jiraan qaynuuna Ilaahiyan ah. Midda ugu horeysa ayaa waxay tahay inuu qofka Ilaah rumaysan uusan inta badan hubin waxa doonista Ilaah ay tahay. Yaanan waxba dembiile iisu arkin haddii aan ogaano inay jiraan waxyaala aan sida doonista Ilaah tahay aan ku dhaqmin.

Qaynuunka kale wuxuu yahay, iimaanka inta badan wuxuu qaata midabka waxyaalaha aan la macnayni karin ee la dareemayo. Maraha qaarkood qofka wuxuu dareemaya inay sax tahay inuu shey ku dhaqaaqo laakiin boqokiiba boqol ma hubo in sheygaasi uu ku dhaqaaqayo uu saxsan yahay.

Qaynuunka kalena waa kan ah in waxa aad hubtid aadan weliga dib uga leexanin. Ibraahim wuu huba inaysan wanaagsanayn inuu Isxaaq qof aanay isku iimaan ahayn guursado. Wuxuuna huba inaysan Isxaaq u habboonayn inuu dib ugu laabto waddadii uu Ilaah reerkooda soo mariyey oo soo gaadhsiiyey meesha ay maanta joogaan (24:8). ‘*Wiilkeyga yaanan halkaas dib loogu celinin*’ ayuu si xoog leh ugu dhawaaqay Ibraahim.

Haddaba addoonkii wuu qaatay dhaarta (24:9), diyaar buuna u yahay (24:10), inuu aado Naxoor. Ugu dambeystii wuu gaadhay Aramiin magaaladii Naxoor. Wuu istaagay oo geelisa ayuu waraabiyey (24:11).

Heerkan la gaadhay **wuxuu goostay inuu arintan ka dhigo mid duca lagu tallaaba qaado.** Wuu gaadhay hareeraha meesha uu Isxaaq gabadh uga dooni lahaa, mana garanayo meesha uu ka bilaabi lahaa. Haddaba wuxuu yidhi, ‘*waan ku baryayaaye, maanta I liibaani*’ (24:12). Tani waa duca ay dhiiranaan aad u weyni ay ku jirto. Wuxuu ku duceysanaya inuu jawaabta ‘Maanta helo!’ Laakiin Ilaah kuma ballan qaado inuu mar kastaba kuu xaqiijiyo inuu sida ugu degdegta badan kaaga soo jawaabay! Addoonka mudda badan ma uusan haysanin. Ma uusan awoodin inuu Naxoor mudda dheer joogo. Wuxuu si degdeg ah ku rabbay jawaabta Ilaah wuxuuna dareensana inuu Ruuxa Ilaah ku hogaaminayey isaga inuu sidaa u duceysto. Ma awooddid inaad mar kasta ducada noocan ah ku duceysatid, ‘Maanta I liibaani!’ Qaynuunka ayaa wuxuu yahay inaad ku duceysatid sida aad dareensantahay inuu Ruuxa Ilaah kuugu hogaaminayo inaad ku duceysatid. Si kastoo ay ahaataba waa inaad duceysatid.

Cutubka 2aad

Doondoona hogaanka Ilaah

(Bilawgii 24:13-67)

Waa rukhsa inuu qofka weydisto calaamad ah doonista Ilaah markuu la kulmaya marxaladaha dhacaya. Addoonkii Ibraahim wuxuu Ilaah ka weydistay calaamad (24:13-14). Waxaa jiraan marar uu Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah nagu hogaaminaya inaan weydisano wax calaamad noo ahaado oo aan ku ogaanayno inaan ku socono doonista Ilaah oo iyo weliba inuu Ilaah na barakadeynayo. Waxay na siinaysa masuuliyad markuu Ilaah na siinayo nooc ‘calaamad’ oo uu noogu jawaabaya ducooyinkeena.

Calaamadda waa mid maskaxgal ah. Addoonka ma haysto wakhti badan. Wuxuu raadinaya qof quruxsan oo macaan oo gacma furan oo martida u roon. Wuxuu aaday meesha ay gabdhaha aan la guursanin salaadda hore aadaan oo ay ka soo dhaansadaan biyaha. Wuxuu Ilaah ka baryaya inay midda ugu horeysa uu biyo weydisan doono ay waraabiso isaga, oo haanteed ka soo dejin doonto meesha ay ku haysay oo madaxeeda ku qaadi doonto (taa oo ahayd heer dadkaasi u yaala, isla sida ay maanta ka tahay meela badan oo adduunka ka tirsan) oo biyey waraabin doonta isaga iyo tobankiisa neef ee geela. Tani waa duca dhiirigal leh. Naagta isku deyeysa inay ficil noocaas ah ku dhaqaaqdo waa mid halis isgelisay, aadna u xoog badan. Waxayna ahaan doonta mid gacma furan kuna habboon inuu guursado Isxaaq.

Markaan doonista Ilaah ogaano wax kasta way isku toosayaan. Baryadii addoonka si ciyar ciyar ah ayaa lagu jawaabay, xataa intuusan baryada dhamaystirin. Isla markiiba gabadh ayaa timid. Wax alla wuxuu doonayey oo dhan wuu ka helay gabadha. Way quruxsanayd (24:16); Isxaaq wuu ku farxi doonaa quruxdaasi. Waxay ahayd mid aanan weli la guursanin diyaarna u ahayd guur. Addoonkii oo aan waxba

weydisanin iyada ayey wax kastoo uu Ilaah ka baryey inuu inanta uu rabbo ka helo way sameysay isla sida uu Ilaah uga baryey inuu calaamadda saxda ah helo si uu ku ogaado meesha ay doonista Ilaah ku jirto (24:17-19). Culaabta oo dhan ayey xilka iska saartay oo way waraabisay tobbankii neef ee geel ilaa ay ka oon baxeen (24:20). Tani waxay ahayd hawl aad wakhti dheer qaadatay. Addoonkana meesha unbuu taagna isagoo eegaya sida ay hawsha ku wadday (24:21) haddana wuxuu fahmay inay ka timid isla qoloda horaan ka timid Uur sidaa daraaddeed shaki kuma jiro wax bay ka ogtahay dhaqanka Ibraahim iyo Isxaaq iyo weliba wax ku saabsan iimaankooda (24:22-24). Runtii tani waa naag Isxaaq ku habboon. Mar alla markuu Ilaah horseed noo yahay wax kasta way isku toosayaan. Dhinac kastoo marxaladaha laga eegaba Ilaah wuu shaqaynaya. Wuxuu ka shaqaynayey meelaha Naxoor; wuxuu ka shaqaynayey Kancaan. Haddana laba ruux ayuu si la yaab leh isugu keenaya. Meel dheer ilaa iyo meelaha ay degan yihiin kuwa afka Caraamidu ku hadla ayuu Rebeka ka saafiriyey oo uu ku daray nin jooga Kancaan. Ilaa maantadanna Ilaah isla sidaa buu hawsha ugu jira. Isla sida uu qoraal derbi ku dhigan leeyahayba:

Laba ayaa dhallan doonaan, waxayna kala joogi doonaan meel laba adduun lagu kala tilmaami karo, waxayna ku hadli doonaan luuqada kala duwan, mana ismaqli doonaan. Oo kuwan labada bad ee aa la garanaynin kor mari doonaan iyo weliba dhul aanan la garanaynin, way gudbi doonaan, iyagoo baaba' ka cararaya oo dhimasho af gembinyaan, oo iyagoon ogayn ayey ficil kasta tixgelin doonaan, oo laab kasta oo baaba'san ayey waddadan ku soo leexin doonaan. Maalintaas ay mugdiga ka soo bixi doonaan way wada kulmi doonaan oo nolosha micnaheeda ayey midba midka kale indhahiisa ka akhrin doona.

Qoyska waa mid gacma furan oo Rebekah intaanay xataa aabbahayd kala xaajoonin ayey si gacma furan ugu adeegtay addoonkii Ibraahim (24:25). Isla markiiba addoonkii wuu fahmay in baryadiisa la aqbalay. Ilaah ayuu ugu mahadiyey sida degdegta badan uu baryadiisa uga jawaabay (24:26-27).

Intaan doonista Ilaah doonayno waa inaan qumaati u dhageysano waanada xagga Ilaah nooga imanaysa. Addoonka aad buu uga fiirsanayey wax alla wuxuu samaynayey. Intay Rebekah biyaha dhaamineysay addoonka wuxuu isweydinayey in runtii tani ay ahayd jawaab xagga Ilaah ka timid. Ma ahan inaan su'aaladan is weydino anagoo deganaansho lahayn ama dulqaad lahayn. Dhabtii addoonka waa khasab wuxuu u degdegsanaa sida ugu durba u laaban lahaa si uu jawaab u celiyo saa ay tahayna aad buu u tixgeliyey inuu qumaati u dhagaysto codka Ilaah. Hadda xaqiiq buu u leeyahay inay jawaabta uu helay ay tahay mid xagga Ilaah uga timid.

Markii doonista Ilaah lala kulmo wax kasta hubniin ayaa loo qabaya. Ilaa hadda waxaa cad inuu addoonka helay wuxuu doonayey oo ah in qofka Isxaaq loo rabay uu Ilaah muujiyey taasi waxay muujinaysa inuu Ilaah hogaaminayey addoonka.

Ilaah wuxuu istecmaalaya fikiradaha qaldan ee dadka kale inay doonistiisa khayr noogu noqdaan. Rebekah waxay leedahay walaal (24:28-29). Walaalkeed waa mid khiyanalaw ah oo hunguri weyn, sida ay uga caddahay qaybaha kale ee Buugga

Bilawgii. Isagu aad buu u weji leeyahay isla sida walaashiis Rebekah, laakiin wuxuu arkaya calaamada kale oo ah inuu reerka Ibraahim yahay reer maal leh. Markuu arko bangiliyaasha dahabka iyo luulka ee ay gashan tahay walaashiis wuxuu addoonkii ku leeyahay, ‘soo gal guriga kan uu Rabbiga barakadeyow!’ oo si degdeg ah ayuu ku soo dhaweyey isaga (24:30-32).

Durbaba ninkii sheekada oo dhan ayuu dareeriyaya (24:33-47) isagoo aaminsan inuu yahay Ilaah kan waddadan quman ku soo toosiyey (24:48). Codsigiisa ayuu u gudbiyey Liibaan kan ahaa madaxa cidda (24:49). Way caddayd inay taasi ahayd doonista Ilaah oo habbeenka oo dhan ayey xafladaynayeen (24:54). Isla markiiba addoonkii wuxuu doonaya inuu dib ugu safro Kancan (24:55). Saa ay tahayna Liibaan ma doonayo inuu ninkan durbaba tago. Wuxuu aad uga dan leeyahay dahabka! Wakhti dambe waxaan arkayna isagoo daahiyey mustaqbalka Yacquub kaa oo ahaa mustaqbalka Rebekah, sababahaas oo ay ka mid ahaayeen damac iyo hunguri weyni. Saa ay tahayna, damaca iyo hungururi weynidaasi Liibaan Ilaah si kheyir leh ayuu u isticmaalay.

Isla markiiba addoonkii iyo Rebekah way tageen (24:56-62). Isla markay Kancan soo galeen isla markiiba waxay isarkeen Isxaaq oo waxay u egtahay xaalad jacayl inay bilaabatay isla markay ishooda isku dhacdayba (24:63-67).

Hogaaminta waa hawsha Ilaah laakiin masuuliyad ayaa na saaran. Addoonka wuu qumanaa inuu fahmay inay dhacdooyinkan oo dhan uu jacaylka Ilaah ku jiray iyo weliba daacadnimada Ilaah ee ku jirtay hawshan (24:27). Annaguna isla sidaa ayey noo tahay. Ilaah waa aamin. Wuu na hogaaminaya. Maraha qaarkoodna wuu na hogaaminaya annagoon xataa ogayn inuu Isaga yahay kan hogaanka noo haya. Isagu waa inoo aamin noona daacad. Hadduu Ciise Ilaah nagu xidhiidhinayo, Ilaah aamin buu noo ahaanaya oo nolosheena ayaa dib u eego doonaa oo waxaan ku dhawaaqi doonaa ‘Rabbiga ayaa I hogaamiyey.’

Saa ay tahayna yaanan ilawbin waxaa jirta masuuliyad noogala baahan yahay inaan oofino. Ibraahim iyo addoonkiisa waxay muujiyeen inay tixgeliyeen inay toonista Ilaah muuqato. Dhabta waxay ku fikireen wax suurtagal ah, tukasho u baahna oo weliba waa arin in qumaati looga fiirsado ay tahay. Addoonka wuxuu muujiyey addeecis, dulqaad iyo Ilaah aaminid joogta ah. Haddii aan saa ku noolaano Ilaah wuu na hogaaminaya annaguna.

Cutubka 3aad

Raacista doonista Ilaah

(Bilawgii 24:33-67)

Sheekada ku saabsan addoonka Ibraahim oo naag u doonaya Isxaaq ma ahan oo keliya sheeka dhaqameyd oo na baraysa hogaamin qaas ah oo aan la heleynin laakiin waxaa kaloo ay noo tahay masaal wax looga baranaya waxa aan heleyno markaas doonista Eebbe raacno. Maxaa yeelay, marxaladaha addoonka ku hogaamiyeen Rebekah su'aala badan ayey ku booriyeen Rebekah. Iyadu nafteeda hogaaminta Ilaah ayey ku socotay. Waxaa la gaaray mar uu aabbahayd iyada weydiyey, '*ninkan miyaad raacaysa?*' iyaduna waxay ku jawaabtay, '*haah! Waan raacaya*' (24:58). Tani ma ahan oo keliya arin guur kasta ka caadi ah laakiin waa wax looga baahan yahay guurka Masixiinta. Noloshu masixiinta waxay ku salaysan tahay annagoo nolosheena oo dhan u xilsaarna Ciise. Ruuxa Qoduuska ah wuu noo imanaya oo wuxuu nagu leeyahay, 'miyaad raacaysa Ciisahan? Miyaad u tagaysa Isaga? Miyaad noloshaada oo dhan ku istecmaalaysa jaalnima aad la yeelan doontid Isaga? Waanna u jawaabayna oo waxaan leenahay, 'Haah.'

Haddaba tixgeli soo dhaweynta sharafta leh

1. Waxaa lagu soo dhaweynaya inay aaminto Isxaaq inuu yahay nin qaas ah.

Weligeed ma aanay arag Isxaaq laakiin waa inay aaminto inuu yahay nin dhab ah oo doondoonya caruusad. Waa isla sidan markuu Ilaah nagu casuumayo inaan raacno Ciise Masiix. Ciisahan ayaa naloo sharaxaaya siba si, Ruuxa Qoduuska ahna wuxuu nagu soo dhaweynaya inaan rumaysano inuu Ciisahan yahay dhab jirta.

2. Waxaa lagu soo dhaweynaya inay rumaysato in balamada Ilaah oo dhan ay ku xiran yihiin ninkan Issxaaq la leeyahay. Haddii ay taarikhda horay wax uga maqashay wax ku saabsan Isxaaq waxyaalahaas waxaa ka tirsanaan karaan

waxyaalaha sida inuu Ilaah Ibraahim ku yidhi, *‘Midh Isxaaq ka soo baxaysa ayaa laguugu yeedhi doonaa.’* Balanta adduunka laga ballanqaaday waxay ku xidhan tahay wiilkan uu dhalay Ibraahim.

Isla sidaa ayey u tahay kuwa Masiixa rumaystay oo dhan. Qofka Masiixa rumaysan waa mid lagu casuumay inuu rumaysto in balamada Ilaah oo dhan ay ku fulayaan oo keliya Inankiisa madiga ah , kaa oo ah Rabbigeena Ciise Masiix. Kaamilnaantiisa ayaan ku heleyna baraka kastoo uu Ilaah noogu talagalay. Isaga waxaa ku jiraan xigmad iyo garasho kastoo ugu qaalisan. Danta uu Ilaah naga leeyahay waxay ku jirta inankiisa Madiga ah ee Rabbi Ciise Masiix. Ma jirto badbaado meel kale wax kale lagu helaya, ma jirto fahan aan Ilaah fahmi karno, ma jirto janna, ma jiro dembi dhaaf ama dhaxalka samooyinka ee aan ka ahayn kuwa lagu helaya Ciise Masiix.

Waa inay ka jawaab celisa. Waa inaan annaguna ka jawaab celina. Ma jirto waayaaragnimo aan Ilaah u lahaanayno annagoo aan rumaysanin inuu Ciise Masiix yahay wax kastoo aan nolosha ka rajaynayno. Isagaa ah dhaxalka Ilaah. Isagaa xukumaya boqortooyada Ilaah. Waa inuu hogaanka haya ilaa uu cadawyadiisa oo dhan cagahiisa hoostooda ka dhigo. Annaga waxaan nahay kuwa isaga la shaqaynayaan. Markaan Isaga qumaati u raacsannahay, wax kastoo uu leeyahay isagaan la dhaxlayna. Wiilnimada uu Ilaah la leeyahay ayaan wada wadaagayna oo waxaan ahanayna carruurta Ilaah. Xaqnimadiisa ayaan wada wadaagayna oo waxaa nagula huwinaya xaqnima aan annaga isa siinin laakiin ah mid uu nagu huwiyey Ciise Masiix. Ma ahan oo keliya inay rumaysato balamada; waa inay rumaysato in balamada Ilaah ay u yihiin kuwa iyada qaas u ah.

3. Waa inay dhabta ogolata oo ah in raacista doonista Ilaah ay ku qasbayso inay ka tagto nolosheedi hore. Waxay ku soo barbaartay Haram laakiin haddii ay ogolaato hogaaminta Ilaah nolosheedi hore way u dhamaatay.

Qofka Masiixa rumaysan waa qof ka soo jeestay noloshii hore ee dembiga lahayd. Nabadgelyo ayuu ku yidhi noloshaasi hore oo weligiis dib uguma laaban doono wuxuuna xilka iska saaray inuu dhaxlo balanta Ilaah.

4. Waxaa lagu casuumaya inay aasaas u yeesho noloshan cusub ee ku salaysan erayada iyaga ugu yimid addoonka Ibraahim. Waxay ahayd inay rumaysato ‘erayga’. Erayadan kuma jirin balama waweyn. Laakiin waxay ahayd iimaan ku jira erayada iyaga u yimid. ‘waxaa jira ninkan la yidhaahdo Isxaaq,’ ayuu yidhi addoonka. ‘Balamada Ilaah oo dhan ninkan ayey ku fulayaan. Miyaad raacaysa ninkan?’ ma ahayn wax isha lagu arki kari; waxay ahayd wax ay waajib ku ahayd inay rumaysato. Haddii ay aaminaynin erayadan weligeed ma aanay arki lahayn Isxaaq amaba ma aanay dareemi waayaaragnima uma aanay yeelateen danta uu Ilaah nolosheeda ka lahaa.

Tixgeli tegtegniinta casumaadda

1. Yeedhistan waa arin deg deg ah. Addoonka Ibraahim waa degdegsan yahay. *‘Waxba ma cuni dooni ilaa aan farriitan ka soo bandhigayo,’* ayuu yidhi (24:33). Sheekadiisa ayuu bandhigay (24:34-48) wuxuuna rajaynaya jawaab. *‘Haddii aad si maskax gal ah oo dhab ah ula macaamilootid Rabbigayga, ii sheeg’* (24:49)

1. Yeedhistan waa mid dhaqso ah. Qoyska way diidan yihiin inay ogoladaan axdigan. *‘Sheygan waa mid ka yimid xagga Rabbiga,’* ayuu yidhi Liibaan (24:50). Wax kasta way u toosan yihiin ayey u egtahay addoonka. Wuxuu soo saaray hadiyadihii uu siday iyagoo ah qayb ka tirsan axdiga (24:53) waxayna ku ogoladeen farxad iyo rayrayn. Hase ahaatee, kuwa badan ayaa erayga ku qaata farxad iyo

rayrayn aanan dhab ahayn oo mudda dheer ayey ku qaadanaysa intaanay ficil gelinin wax alla waxay maqleen. *'Daaya inanka mudda maalma ah ha nala joogte ee'* (24:55). Laakiin waan ognahay sirta ku jirta daahistan uu Liibaan daahinayo adeegan. Waa isaga kan Yacquub daahiyey ilaa iyo toddoba sanadood markuu gabadh uu guursado doonayey, wuxuuna haddana damcay hab kale uu toddobada sanno toddoba kale ugu darro (isla sida aan shekooyin dambe uga arkayno).

Laakiin addoonka ma ogolteen wax daahis ah. 'Inaan durba dib u laabto ayaan raba' ayuu ku yidhi. Su'aasha waxaa toos isla markiiba loo weydiyey Rebekah. Ilaah Ruuxa goduuska ayuu si toos ah wax nagula hadla, wuxuuna naga doonaya jawaab degdeg ah. *'Maanta haddaad maqashid codkiisa qalbiyadiina ha adkaynina.'* Ruuxa Ilaah ma daaho. Isla markiiba wuu laabanaya hadduu wax jawaab ah waayo.

Cutubka 4aad

Waxyaalaha barakada kaa soo gaadhi karaan

(Bilawgii 25:1-18)

Bilawgii 25aad waa cutub ay ka buuxaan waxyaalaha kaa soo gaadhi karo nimcada iyo naxariista Ilaah. Markuu Ilaah barakadeynayo mar kastaba waxaa jiraa barakooyin 'buux dhaaf ah' waxaana imanayaan barakooyin dheraad ah oo ka baxsan kuwa la rajaynayey.

1. Ibraahim waxaa la siiyey awood iyo dhiiranaan isagoo da' weyn leh. Bilawgii 25:1-18 waxay soo gonaadeysa sheekada Ibraahim. Ibraahim wuxuu qaatay naag kale. Magaceedu waa Keturah (25:1). Tan waxay ahaan karta kaddib markay Sahara dhimatay shakina kuma jiro waa kaddib markuu Isxaaq dhashay. Si kastoo loo eegaba erayga 'qudbasirta' ee aan ka arkayno 25:6 iyo Taariikhda 1aad 1:32 ayaa caddaynaysa inaysan ahayn naagtiisa ugu horeysay sida ay uga muuqato sheekada balamada ee Ibraahim la siiyey. Ibraahim wuxuu iyada ka dhalay lix wiil (25:2). Bilawgii 25:3 ayaa midkood u tixraacinaysa ilaa iyo farcanka saddexaad, oo 25:4 waxay midkood kale sheekadiisa sii gelinaysa isagoo ku xidhiidhsan Keturah.

Haddii si kale loo eegana waxaa lagu fasiri kara inuusan Ibraahim wiil kale dhali karin madaama uu aad u gaboobay (17:17). Laakiin markay muucjisada dhacaysay oo uu Ilaah Ibraahim iyo Sahara la hadlayey, dhamaantood waxaa la siiyey awood ay ku dhali karaan (eeg Cibraaniyada 11:11). Ibraahim ma lahayn oo keliya hal wiill laakiin lix wiil oo dheraad ah ayuu ka dhalay Keturah! Muucjisada Bilawgii 21 waxay tixgelinaysa awood dhinac kastaba leh.

2. Ibraahim farriin ayuu uga tegay kuwa isaga ka dambeyeen. Waddada ay balamada Axdiyada ku fulayaan waa kan Isxaaq, sidaa daraaddeed wuxuu dhaxlay wax alla wuxuu Ibraahim lahaa oo dhan isla markuu Ibraahim geeriyooday (25:5). Saa ay tahayna wuxuu qaaday masuuliyadda ah inuu xananayn doono carruurtiisa kale in alla intuu adduunka ku noolyahay si aanay u jirin wax haba yaraate ee is af garasho waa ah maalinta geeridiisa (25:6).

Dabadeedna wuxuu geeriyooday isagoo aad u gaboobay oo '*sanada badan noolaa*', macnaheedu, '*qumaati nolosha uga dhergay*' (25:7-8). Dadka Ilaah ayuu kula noolaaday xataa nolosha xabaasha ka dambayso. (Tani waxay u egtahay in tafsiirkeeda uu yahay in Sahara oo keliya lagu xabaalay Makbelah. Sida uu u habeyey habka loo dhaxli lahaa iyo habka loo duugi lahaa way caddahay sida uu iimaankiisa in axdiga balamada uu yahay mid joogta ahaan doono.

3. Baraka ayaa u jirta kuwa uu Ilaah xushay iyo kuwa uusan xulaninba. Isxaaq iyo Ismaaciil dib bay u heshiyeen (25:9-10) laakiin barakada sbeeshelka ah waxay ka soconaysa xagga farcanka Isxaaq (25:11).

Dhex bartanka qaybaha buugga Bilawgii ee ka hadlayaan Ibraahim (11:27-25:11), Yacquub (25:19-25:29) iyo Yuusuf (37:2-50:20), waxaa kaloo jiraan qayba kaloo gagaaban oo ka hadlayaan Ismaciil (25:12-18) iyo weliba Iisaw (36:1-37:1). Bilawgii 25:12-18 waxay si gaaban wax uga shegeysa Ismaciil intaanan sheekada horay u sii wedin.

Ismaciil waxaa lagu tirinaya mid aanan loogu talagelin inuu axdiga iyo balamada ay ka farcamaan. Waa Isxaaq kan loogu talagalay inuu 'leenka qoduska ah ee farcanka uu ka sii farcamo' kaa oo ah wadada ku socota Ciise. '*Isxaaq ayaa midhtaada loogu yeedhi doonaa,*' ayuu yidhi Ilaah. '*Axdigeysa waxaa ku fulin doonaa Isxaaq.*' Heerka ay hadda arinta joogto waxyaalaha uu Ilaah ka hadlaya ma inaba ma qusayso badbaado, laakiin waxay xoogga saraysa muhimadda ku jirta axdiga Ilaah.

Waxaa jiraan laba qalad oo halkan ka suurtagal ah in la sameeyo. Kuwa aad u aaminsan waxyaalaha uu Kitaabka horey uga sii hadlaya inay bar tilmaan u yihiin badbaadada ku saabsan Bilawga Isxaaq iyo Ismaciil, Yacquub iyo Iisaw. Laakiin waxyaalaha horay looga hadlaya Isxaaq iyo Yacquub inaba ma qusayso badbaado laakiin waxay ka hadlaysa muhimadda ku jirta axdiga Ilaah.

Dhinaca kale markii laga eegana kuwa aan aaminsanayn axdiyada waxyaalaha uu Ilaah horay u qondeyey (isla sida aan uga arkayno Rooma cutubka 9aad iyo meela kale) wax kaloo ay arkayaan oo aan ka ahayn muhimadda axdiga Ilaah ee ku jirta Rooma cutubka 9aad ku jirta mooyaane. Runtii waa ka sii hadalka muhimadda ku jirta Axdiga Ilaah ee aan ka arkayno buugga Bilawgii; waana horay u sii sheegid waxyaalaha ku saabsan badbaadada ee aan ka heleyno Rooma cutubka 9aad! Bawlos sheekadan wuxuu uga hadlaya oo keliya isagoo xoogga saaraya inay tixgelineyso muhimadda ku jirta axdiga Ilaah ee aan ka arkhayno buugga Bilawgii wuxuuna taabanaya habka badbaadada iyo waxyaalaha badbaadada qusayaan. Mawduuca Rooma 9-11 way caddahay inay ka hadlayso badbaadada ama badbaada la'aanta reer binu Israa'iil. Bawlos wuxuu qaatay sheekooyinka Bilawgii oo dib buu u istecmaalaya. Tafsiirka sheekooyinka Bilawgii markii lagu eego sida ay horay wax u ahayeen, inaba waxba kama sheegeysa waxyaalaha uu rasuul Bawlos kaga hadlaya Rooma cutubka 9aad maxaa yeelay, Bawlos dib ayuu u istecmaalaya sheekooyinkaas.

Tan waa arin aad muhim u ah markii hab kale loo eego. Madaama ay Ismaciil iyo Iisaw aanay inaba waxba ka qusaynaynin muhimadda axdigaasi Ilaah, macnaheedu ma

ahan inay shaqsi ahaan ahayn kuwa uu Ilaah dannahiisa u doortay. Madaama uu Bawlos iyaga masaal ahaan u isticmaalay inaysan ahayn kuwa uu Ilaah adeegsanayey, ma ahan inay taasi sabab u ahaato oo aan u malayno inuu Ilaah iyaga necbanaa aniga saa ilama ahan. Hagar nafteeda waxay ahayd in halkan lagu soo magac qaado isla sida aan sheekada uga akhrinayno Bilawgii cutubka 16aad daraaddeed oo si layaab leh ayuu Ilaah u barakadeyey iyada, laakiin markaan ka eegno Galatiya cutubka 4aad Hagar waxaa loo isticmaalay sida masaal ‘damaca jidhka jaclayd’. Runtii waa la yaab waxyaalaha aan ka fahmi karno dadka uu Ilaah Eraygiisa nooga wax baraya markaan erayada toos u raacno. Erayada waxaa laga yabaa inay na siyaan sawir ka duwan waxa dhabtii uu qofka yahay. Ismaciil waxuu muqaal u noqday kuwa uu Ilaah barakadiisa dhaafin karo laakiin macnaha ma ahan in Ismaciil nafsad ahaantiisa uu ahaa mid uu Ilaah barakadiisa dhaafiyey. Iisau waxaa nala tusay inuu yahay mid uu Ilaah barakadiisa dhaafiyey laakiin markaan ka eegno Cibraaniyada wuxuu masaal u yahay Masixiinta dhibaata badan kaddib badbaadayaan amaba ‘dab lagu badbaadiyey’.

Baraka ayey leeyihiin xataa kuwa uu Ilaah u dooranin inay ka qayb qataan hawsha badbaadada ee uu Ilaah ugu talagalay baniaadmiga. Fikiraddeydu ma ahan micnaha inuu qofna badbaadada heli karo isagoo aan aaminin badbaadadaasi, laakiin ma ahan qasab inuu qof kasta ahaado kuwa hawl qaas ah loogu yeedhay sida Ibraahimka, Bawloska, John Calvinka, amaba ma ahan inuu qof aad caan uga ahaado hawlaha Ilaah ee Kiniisadaha ka dhacaya – laakiin qofkaasi weli badbaadada Ilaah way u dhigantahay.

Mid horta waa dhab. Xataa Hagar, Ismaciil iyo Iisaw aad bay uga faa’ideen barakooyinka Ibraahim, Isxaaq iyo Yacquub ka soo butaceen. Ishacyaah 60:6 waxay ka hadlaysa Midaan, Efah iyo Sheebah (Qabiila Ibraahim kaga soo farcameen Keturah!) oo waxay Israa’iil ku leedahay, *‘Wiilashaada waxay ka imaan doonaan meela fog’* (Ishacyaah 60:4). Wuxuu iyaga iyo weliba Israa’iil ku leeyahay, *‘Sara kaca oo ifa waayo, iftiinkiina wuu yimid, oo sharafta Ilaah ayaa idin dul joogta.’* Maalin maalmaha ka mid ah kuwa banaanka ka ah midhta Ibraahimna way dareemi doonaan dib u cusboonaysinta uu Ilaah adduunka oo dhan badbaadada ka simi doono oo sidaas ayey adduunyada oo dhan ku ahaan doonta kuwa ka tirsan midhta Ibraahim!

Tixgeli tan

1. Ibraahim wuxuu ahaa 100 jir markuu Isxaaq dhalanayey (21:5). Saharana tobban sanno ayey isaga ka yarayd (17:17). Sahara waxay dhimatay iyadoo 127 jir ah (23:1); Ibraahim wuxuu ahaa 137 jir markaasi. Ibraahim wuxuu dhintay isagoo 175 jir ah (25:7). Ibraahim wuxuu dhimashada Sahara ka dambeyey 38 sanno. Hadduu Isxaaq Rebekah guursaday 3 sanno dhimashada hooyadiis kaddib (Ibraahim – 140) oo uu dhintay 35 sanno kaddib markuu Isxaaq guursaday (eeg 25:20).

Cutubka 5aad

Dabiicad bedelan ayuu Ilaah xushay

(Bilawgii 25:19-34)

Tan waa qayb cusub oo ka tirsan buugga Bilawgii, ka bilaabata Bilawgii 25:19, waxayna xooga saraysa qofka kale uu Ilaah u istecmaalaya inuu badbaadadan ku ficilgeliyo, qofkaasna waa Yacquub. In kastoo ay tahay taariikh ku saabsan Isxaaq (25:19), taariikhda waxay ka waramaysa 'farcanka' qof ka soo farcamay ama shey ka soo farcamay, sidaa daraaddeed waxay aad uga hadlaysa Yacquub iyo Iisaw ka badan inta ay ka hadlayso Isxaaq naftiisa.

1. **Yacquub wuxuu ahaa nin la yaab leh oo aan dabiicaddiisa la fahmaynin.**

Magaciisa dhabta ah waa 'qof cidhibta ku dhega ama dafa' amaba (haddii la sahalsiyo) 'Dafe'. Taasi waxay noqotay nebinimo ama sii sheegid. Isxaaq wuxuu guursaday Rebekah. Isla sida ay Sahara u ahayd sanada badan wakhtigaas ka hore, horey kama aanay uuraysanin (25:19-20). Isxaaq wuxuu u duceyey Rebekah wayna uuraysatay (25:21). Mid ka mid ah masuuliyadda aabbaha waa inuu ahaado mid duceeya (u duceeya reerkiisa ama dadka kale). Rebekah waxay dareentay inay wax aanan caadi ahayn uurkeeda ka dhex dhaqaaqayaan, Ilaah ayey weydisay waxay ahayeen (25:22). Way heshay jawaab. Labada carruur waxay ahaan doonaan awowayaasha laba quruun (25:23); quruumahaasi waxay ahaan doonaan Israa'iil iyo Idoon. Markay wiilasha dallanayeen, Yacquub wuxuu ku dheganaa cidhibta Iisaw (25:24-26). Weligiisba sidaa buu ku noolaa. Wuxuu ahaa dafe magac ahaan iyo damiicad ahaanba.

Yacquub wuxuu ahaa mid aad cidda u jacayl. Wuxuu ahaa mid sahlan oo jeclaa inuu ku noolaado noolol hoose. Aad buu u jeclaa uguna faanayey noloshu uu xaafadda ku noolaa. Iisaw aad buu u jeclaa ugaarsiga ee laakiin Yacquub saa uma ahayn. Sheekada Bilawgii waxay durbaba na tusinaysa maalmaha ay labadan nin noloshu dhalinyaronimada kunolayeen. Mid aad buu ugaarsiga u jeclaa aabbihiisna aad buu

uga jeclaa wiilasha kale; kan kalena cid joog buu ahaa oo hooyada ayaa aad u jaclayd isaga (25:27-28).

Yacquub xagga dabiicaddiisa waa mid khiyanalaw ah. Maalin maalmaha ka mid ah Iisaw oo aad u gaajaysan ayaa u yimid markuu imaanayeyna Yacquub fuud buu hagaajinayey (25:29-30). Iisaw ayaa weydistay Yacquub inuu fuudka wax uga shubo, oo Yacquub taas ayuu ka faa'ideystay oo wuxuu u arkay fursad uu Iisaw kaga iibsado curudnimadiisa. '*Curudnimadaada iga iibi,*' ayuu yidhi Yacquub, aad buuna uga fiirsaday oo wuxuu xaqiijiyey inuu ku ogolaanshada ay noqoto mid axdi lagu gelaya (25:31-34).

Yacquubkan waa mid qaas ah. Curudnimada waa fursad u qaalisan uu qofka curudka ah u leeyahay inuu ahaado madaxa reerka markuu aabbaha cidda geeriyoodo. Sida ay xaaladdan Ibraahim, Isxaaq iyo Yacquub ka ahayd, curudnimada laysu dhaafinaya halkan waxaa dheraad ah oo ku jiraan axdiyada adduunka oo dhan qusaysa ee ku imaanaysa farcanka Ibraahim. Yasidda uu Iisaw yasay curudnimada waxaa kaloo uu yasay fursadda uu u lahaa inuu ahaado kan uu Ilaah u istecmaalayo inuu ku fuliyo danahiisa uu adduunka u lahaa. Yacquub in kastoo uu ahaa mid khiyaanalaw ah, aad buu u jeclaa hawlaha Ilaah wuxuuna u riyaagsanaa inuu ahaado wiilka uu Ilaah doonayo inuu balamadiisa ku fulinayo. Markuu helay fursad uu taasi ku guto isla markii sida ugu daqsada badan ayuu kaga dafay Iisaw. Kani waa Yacquub qaas ah. Si durba ah ayuu wax isku siiyey.

Yacquub wuu aqli badna laakiin ma suusan ficiltamaynin. Sida uu Iisaw maskaxda uga xaday ayaa muujinaysa sida ay maskaxdiisa durba u fikiraysay. Isla marka uu Iisaw cidda yimid isagoo gaajaysan, isla markiiba Yacquub wuxuu ku fikiray sida uu marxaladaas uga faa'idaysan lahaa.

Dareenka aan leenahay waa wax aan ku dhalano. Si kastoo la yeelana boqolkiiba boqol lagama bedelmi karo wixii lagu dhashay. Qof kastaba wuxuu leeyahay waxyaalaha uu ku fiican yahay iyo meelaha looga roonyahayba. Dadka qaarkiis way hunguri weyn yihiin, gaar kalena aad bay u jacayl yihiin inay wax sameyaan caadi ahaantoodaba oo kuwa kale way ka badiyaan. Qaarna waxay u dhasheen macaaradnimada. Qaarna waxay ku dhasheen dareenkooda oo jooga xaaladda ugu sareysa. Qaarna waxay ku dhasheen maskaxdooda oo durbaba wax qabanaysa. Qof kastana wuxuu leeyahay dareenkiisa u qaaska ah. Ma jiro qof si joogta ah wax ku sameeya.

2. Yacquub hal shey ayaa u gurmuday, sheygaas oo ahaa, Ilaah inuu horay go'aan uga gaadhay inuu isaga istecmaali doono. Miyaad leedahay dabiicad aad leedahay taasi waa tabar darrodaada? Miyaad gudahaada iska leedahay, 'Ilaah qof aniga oo kale ah ma istecmaalayo? Yacquub ma ahayn nooca qofka aad umalaynaysid inuu Ilaah istecmaali lahaa. Saa ay tahayna Ilaah wuxuu go'aansaday inuu Yacquub yahay kan uu ku gudan doono danahiisa. Leenka socda ee lagu helaya Ciise waxaa ummadda ku hogaaminaya Yacquub. Yacquubkii khiyaanada badnaa waxaa doortay Ilaah!

Waxaa isaga la doortay ka hore intuu xataa dhalanin. Mustaqbalkiisa waxaa habeyey Ilaah. Doorashada uu Ilaah isaga doortay ma ahayn mid haba yaraate ee uu isaga sababay. Looma dooranin hawl wanaagsan ee uu sameyey daraaddeed. Ma ahayn mid ka wanaagsanaa Iisaw. Haddii aan wiilasha qumaati u aqooni lahayn waxaa laga yaaba inaan Iisaw dooran lahayn bedelkii aan dooran lahay Yacquub. Yacquub ma ahaanin mid uu Ilaah adeegsado nolol ka wanaagsan tan uu Iisaw uu ku

noolaa daraaddeed. Iisawna loogama reebin inuu ahaado mid uu Ilaah addeegsado xumaan uu falay daraaddeed. Ilaahna fikiradda uu lahaa kaga ma leexanin waayo, in kastoo uu Yacquub ahaa nin khiyaanalaw ah oo wadda qaloocan ku socda. Ilaah si kastoo ay ahaydba wuxuu u doortay isaga inuu adeegsado isaga, wax kastoo tabar darro ah uu lahaaba.

Haddii ay dhacdo uu Ilaah dan kuugu oofsado weligaa ha u malaynin inaad adiga samaysay wax aad uga wanaagsan waxa ay dadka kale sameyaan waadna istaahisha inuu Ilaah ku adeegsado. Haddii ay dhacdo inuu Ilaah ku adeegsado, taasi waxay ahaanaysa uu naxariista iyo nimcada Ilaah. Markay Rebekah uurasatay nin in kastoo uusan weli dhalanin oo usan wax xumaan ah ama wanaag ah toona samaynin, Ilaah durbaba go'aan buu ka gaaray inuu istecmaali doono Yacquub. Tani xor bay ka ahayd xaaladda lagu miisaami lahaa xumaanta ama wanaagga uu qofka sameeyo ee uu ku galabsaday inuu Ilaah Isaga adeegsado ama la adeegsan waayo. Ilaah wuu ku istecmaali karaya isla sida uu Yacquub u istecmaalay Isagoo aanan inaba eegin dabeecadaha qaldan ee uu Yacquub lahaa. Ilaah wuxuu waxyaalahan oo dhan u samaynaya Ciise daraaddiis. Ciise ayaa annaga noo ah kan Ilaah nagu xidhiidhinaya. Ilaah qof kasta oo si kasta xagga nolosha uga qaloocan ayuu istecmaali kara maxaa yeelay, Ciise wuu noo wada dhintay. Ilaah nama istecmaalo oo keliya markaan wanaagsan nahay waayo, kuwa aanan wanaagsanayn ayuu u dhintay Ciise inuu soo wada badbaadiyo.

Hadduu Ilaah kuu istecmaalo isla sida uu Yacquub u istecmaalay, taasi waxay ahaanaysa oo keliya wax aad nimcada Ilaah ku heshay. Ilaah hortiisa kuma tegi karno oo keliya wanaagga aan samayno! Hawlaha wanaagsan ee aad samaysid ma ahan wax aad ku bedelan kartid nimcada Ilaah. Dembiyadaada iyo nugeylkaaga ma ahan wax aad ku waynaysid nimcada Ilaah maxaa yeelay, Ilaah nimca ayaad uga heleysa wax alla waxaad ka heleysid oo dhan.

Shaki kuma jiroot oo Ilaah wuu ku bedelaya! Ilaah wuxuu doortay Yacquub in kastoo uu xagga dabiicadda ka xumaa, laakiin Ilaah Yacquub sidaas kuma daynin. Ilaah wuxuu bilawbay inuu ka shaqayo nolosha Yacquub. Waa sidaa sida aad addoonka Ilaah. Waxay ku bilaabanaysa nimcada Ilaah. Ilaaheena waa Ilaahii Yacquub, Ilaaha kuwa noloshooda qaloocantahay u yeedha una istecmaala hawlahiisa noloshoodana bedela.

Cutubka 6aad

Kaga guulaysashada limaanka

(Bilawgii 26:1-35)

Sheekada buugga Bilawgii waa sheeka ku saabsan balan. Marka ugu horeysa waxaan aragnay **baahida** loo qabo balantam, sida ku dhigan Bilawgii 1-11. Haddana waxaan eegeyna sida ay balantaas ku hawl galayso. Ibraahim waxaa lagu yidhi isaga iyo weliba midhtiisa ayey adduunyada oo dhan ku barakoobi doonta. Ugu dambaysta Ilaah balanta axdi dhaar lagu xidhay ayuu ka dhigay haddana waa xaqiiq in balantaasi ay noqon doonto mid la oofiya. Saa ay tahayna, in kastoo ay balanta sida lagu balanqaaday ku her geli doonto, ma ahan micnaha inay ka hor istaagayso in shaqsiyaal ay baraka kaga waynayaan Ilaah. Ilaah weli balantaas uu ku dhaartay wuu daahin kara kuwa qarni kale imaan doonaan ayuu ku oofin kara. Quruun kasta, Isxaaq, Yacquub, Yuusuf, dhamaantood waxay ahayd inay ku baaba' aan iimaan. Isxaaq ayaa ah qofka lagu oofin doono balanta Ilaah. *'Isxaaq ayey midhaata ku farcami doonta,'* ayuu yidhi Ilaah. Saa ay tahayna isaga naftiisa waxay u ahaanaysa uu markuu dhibatooyinka iyo jarrabaadyada uu ka guulaysto dhibatooyinka iyo jarrabaadyada u yimaadaan ninka ama naagta rumaysan balanta.

Bal horta aan tixgelino dhibaataada iimaanka.

1. Waxaa jira **dhadhaqaaq**. Abaar ayaa dhulka ka jirta. Tani hadda ka hore ayey dhacday wakhtigii Ibraahim taasi oo sababtay inuu Ibraahim ku cararo Masar (Bilawgii 12:10-20). Laakiin xaaladdaas uma wanaagsanayn Ibraahim. Isxaaq wuxuu la xarbinaya xagga caafimaadka jidhkiisa. Ilaah ayaa isaga u muuqday oo ka waaniyey inuu halkaas aado (26:1-5).
2. Waxaa jirta **cabsi nafta loo baqayo**. Isla sida ay Ibraahim u ahayd Isxaaqna wuxuu u baqaya inay dad kale oo awood leh ay ka xoogaan xaaskiisa Rebekah.
3. Waxaa jirta **khatar ah in la dembaabo**. Sida ay marar badan ahaatoba, damaca ayaa dembi keenay. Ibraahim laba goor ayuu been nuskeeda ku hadlay oo ku been sheegay inay xaaskiisa Sahara ahayd walaashiis. Waa run oo isaga iyo Sahara isku aabba ayey ahayeen (eeg Bilawgii 20:12). Labada dhacdaba wax wanaag ah oo ay

Ibraahim u tartay ma jirin. Saa ay tahayna waxaan arkayna Isxaaq oo damacsan inuu isla sidii sameeyo. Ma lahaan doono isla marmarsiinyadii uu Aabbihiis Ibraahim lahaa waayo, inaba suurtagal ma ahan in Rebekah loo malayo inay walaashiis tahay. Wuxuu aaday isla meeshi uu Ibraahim mar aaday oo la yidhaahdo Gerar oo isla beentii ayuu sheegay (26:6-7). Isxaaq waa la qabtay isla sida Ibraahim laba goor lagu qabtay halkaas hadda ka hore. Hadda waxaa dhacday inuu qof daaqadda ka eegayey (26:8)! Isla sida Ibraahim loo canaantay ayey isaguna odayaashi Ilaah aan garanaynin u canaanteen isaga khiyaanadiisa awgeed (26:9-10). Laakiin Abbemeleek ayaa amar bixiyey si aanan wax dhib ah loogu geysanin Isxaaq.

4. Waxaa jira **Xarbi**. Isxaaq taajir buu ahaa taajirnimadiisana way sii kordheysa (26:12-14a) laakiin taajirnimada waxay keeneysa dhibatooyin badan, Isxaaq wuxuu noqday mid Falistiinta waddada nacaybta u furay (26:14) taasna waxay sii kordhisay cadaadin iyo af legaado. Ceelashiisa uu hadda ka hore abbihiis Ibraahim qoday ayey ku hiran jireen (26:15). Meela kale ayuu u guuray kaddib markuu raacay la talinta Abimeleek (26:16-17) laakiin wax wanaag ah oo ay guuristiisa keentay ma jirin. In kastoo uu ceelashii jiray dib u qoday oo biyo nadiif ah laga warabayey (26:18-19), nimankii xawladhaqatada ahaa weli waxay ku jireen gunuunac iyo weji xumo ay isaga xumaan kaga doonayeen (26:20). Xarbiga aad buu u weyna ilaa xataa meesha magaceeda looga bixiyey ‘Cesek’ (‘Xarbi’). Waxaa laysku deyey in degaan kale la raadiyo laakiin waa lagu guulaysan wayey (26:21) waa uun markay meesha ka sii guureen markay ka nasteen xarbiga (26:22).

5. Waxaa jirta dhibaataada **daahista**. Ilaah wuxuu Isxaaq ka ballanqaaday dhulka isla sida uu uga ballanqaaday Ibraahim. Dhabti balanta waxay ahayd mid laysku halayn karo maxaa yeelay, waxaa loogu dhaartay Ibraahim. In kastoo ay Isxaaq iyo dadkiisa rajaynayeen inay ‘*ku midho dhalaan dhulka*’ (26:22), dhaxlidda ay dhul dhaxli lahayeen waxay ahayd mid aad tartiib u socotay.

6. **Dhib baa ka jiray reerka dhexdiisa**. Barakadii uu Ilaah iyaga u muuqday kaddib (26:24-25), iyo markuu xarbiga dhamaaday markuu Abimeleek axdi sheegay kaddib (26:26-31), iyo fahmidda meelaha ay ka jireen ceelasha biyaha macaan (26:32-33), taasi ma ahayn ugu dambaysta dhibatooyinkooda. Iisaw wuxuu go’aansaday inuu guursado laba naagood oo ah reer Yahuudi ah (26:34-35). Wuxuu damacsanaa inuu dib ugu laabto Xaram. Wuxuu rabay inuu si degdeg ah ku guursado wuxuuna rabay inuu guursado laba naagood! Taasi aad ayey maskaxda uga cuntay Isxaaq iyo Rebekah.

Saa ay tahayna in kastoo ay jireen xarbiga iimaanka **waxaa kaloo jira xalka iimaanka**.

1. Kan ugu wada weyn waxaa weye **hogaaminta iyo jiritaanka Ilaah uu qofka la jiro**. Markuu Isxaaq doonayey inuu aado Masar, safar isaga ka fogayn lahaa dhulka laga ballanqaaday iyo weliba kaa oo ay kala kulmi lahayeen masiibooyin fara badan, Ilaah ayaa isaga u muuqday oo ku yidhi, ‘*Ha’ aadin Masar*’ (26:1-2). Ilaah mar kasta nama siiyo hogaamin toos ah laakiin waxaa jiraan marar aan u baahannahay hogaamin qaas ah ama markay boqortooyada Ilaah xaalad daran oo qaas ah ku jirto oo aan arkayno inay masuuliyad naga saaran tahay inaan wax ka qabano anagoo horsee ka dhiganayno gacanta Ilaah.

2. Waxaa jirta **Cuboonaysinta balamada Ilaah**. Ilaah wuxuu dib ugu dhawaaqaya balamada uu horey ugu dhawaaqay: ‘*Waan kula jiraya waanna ku barakadayn doonaa...dhulkan oo dhan waan ku siinaya...dhaartana waa oofin*

doonaa...farcankaaguna waa badin doonaa....midhtaada ayey quruumaha oo dhan ku barakoobi doonaan’ (26:3-4). Waxaa jirta qayb halkan ku kordhisantay oo aan horay u jirin: ‘*sababtoo ah Ibraahim ayaa I addeecay aniga.*’ Dhaarta waxay ahaan karta hadiyad loo bixinayey addeecista taa oo saa u ahayd Ibraahim. Maalin ayaa timid oo Ibraahim lagula hadlay heerka ugu sareya ee addeecista (17:1) waxaana jirtay maalin uu Ilaah Ibraahim ku yidhi cabsi aad Ilaah ka cabsatay daraaddeed wuxuu helay dhaarta (22:12, 16). Ibraahim daraaddiis ayuu Ilaah Axdiigiisa u cusboonaysinaya midhta Ibraahim

3. Waxaa jirta **nimcada cafinta Ilaah**. In kastoo uu Isxaaq wax nacasnima ah sameeyey (26:7-9), Ilaah nimcaala ayuu u ahaa isaga. Ilaah wuu u naxariistay isaga si uu ku ogaado kan uu yahay Ilaaha uu u adeegayo (26:10)! Maraha qaarkood Ilaah wuu noo naxariisanaya oo wuxuu doonaya in la ogaado qofka aan nahay dhab ahaantii. Dabadeedna Ilaah wuxuu Ibraahim nimcadiisa ku gaadhsiiyey Abimeleek (26:11) waana laga badbaadiyey nacasnimada waddooyinkiisa qaloocan.

4. **Ilaah barakooyinkiisa ayuu ku kordhiyey gacma furnaanta Isxaaq**. Isxaaq wuxuu ahaa mid u gacma furan xoola dhaqatada. Marar badan ayuu guuritaan ku jiray. Way caddahay inuu ka cararayey xarbi haddii ay suurtagal u ahayd. Ilaah si weyn ayuu u barakadeyey isaga ilaa ay xataa cadawyadiisa isaga nabad siiyeen. Dulqaadkiisa wuxuu ahaa mid uu istaahilay waayo, ugu dambaystii wuxuu ku guulaystay inuu axdi la galo Abimeleek.

Nolosha iimaanka waxaan kala kulmayna xarbi fara badan, laakiin Ilaah waa Ilaah jira oo mar kasta wuu naga guuleysinaya.

Cutubka 7aad

Waddooyinka khiyaanada; natijooyin xanuun badan

(Bilawgii 27:1-29)

Ilaah wuxuu istecmaalay hal qoys kaa uu ku yimid Badbaadiyaha, Rabbigeena Ciise Masiix, si ay adduunyada u badbaaddo. Saa ay tahayna hadda xaaladda reerka Ibraahim ma fiicno.

Isxaaq wuu lumiyey xaqnimada uu ku noolaa. Waxaa jirtay mar aan waxyaalaha Ilaah oo keliya ka fekeri jirnay oo waxaan doonoonaynay wejigiisa iyo doonistiisa. Bilawgii 24:63 waxaan arkayna inuu banaanka u baxay si uu Ilaah ula kulmo waxay ahayd markuu Ilaah ducadiisa ka jawaabay oo uu u xulay Rebekah. Laakiin hadda Isxaaq wuxuu u egyahay mid aan waxyaalaha Ilaah tixgelinaynin. Mar ayaa la gaaray oo ay u ekeyd inuu Isxaaq mudda dheer noolaan doonin wuxuuna damacsanaa inuu dardaaran galo si uu iskiiga wareejiyo hogaanka oo uu maamulka reerkana ku wareejiyo Iisaw (27:1-4). Isxaaq wuxuu gaaray heer uu aragga ishiisa daciifay, sanadahiisana way sii badanayeen. Wuxuu rabbay inuu intuusan dhimanin si sharciyeysan ku 'caleema saaro' Iisaw.

Haddaba 'caleema saarkan' wuxuu ahaa mid aad u muhimsan. Waxay ahayd hab layskiiga wareejinayey hogaanimada reerka taa oo ahayd heerka ugu sareysay. Tani macnaheedu waxaa weeye inuu Isxaaq iska wareejinayey xilkii isaga saarnaa oo ahaa inuu maamulo maalka reerka kaa uu hadda ku wareejinayo Iisaw. Tani waxaa kale oo ay na tusinaysa sawir ah inuu Isxaaq rabbay kuna duceysanayey inay barakada adduunka oo dhan loogu talagalay ahaato mid ku hergeleyso Iisaw. Waxay u ektahay Isxaaq inuusan ka fiirsanin waxyaalaha ama nebinimada laga sheegay Bilawgii 25:23 oo leh, '*kan ugu weyn ayaa u adeegi doona kan ugu yar.*' Wiilkiisa uu ugu jeclaa waa Iisaw. Wuxuuna rabbay inuu kan ugu yar u adeego kan weyn! Wuxuuna iisu diyaarinayey inuu sida dhaxalka lagu bixin lahaa uu sharciyeyo, kaasi oo ahaa axdiga ugu dambeyey uu ku wareejinayey madaxtinimadiisa taa uu ku wareejinayey Iisaw oo reerka la wareegi lahaa.

Isxaaq wuxuu iisu diyaarinaya inuu marxaladdan uga dhigi lahaa mid qaas ah. Wuxuu u yeedhay oo keliya Iisaw. Wuuna kutalagalay inuusan kala hadlin Yacquub. Haddii uu ka reebi lahayn Yacquub inuu ka qayb qaato wada hadalkaas, Yacquub ma uusan geli lahayn khiyaanada uu sameyey. Isxaaq wuu inkiray sii sheegidda ay Rebekah heshay, waxaa kale uu inkiray dhaartii sharcieysnayd ee uu Iisaw ku bedeshay curudnimadiisa. Way caddahay inuu Isxaaq daacanima ku dhaqmaynin. Wuu lumiyey jacaylka uu Ilaah u qabay.

Saa ay tahayna **Rebekah nafteeda ma aanay dhaamin Isxaaq**. In kastoo uu jacayl heer sare ah ka dhaxayey Isxaaq iyo Rebekah (24:67), xidhiidhkooda ma ahayn mid aad u wanaagsan. Wax xidhiidh ah oo u dhexeyey ma jirin. Sida keliya ee ay Rebekah ku garan lahayd xaaladda jirtay waxay ahayd inay dhagaysato waxyaalaha uu Isxaaq dadka kala hadlaya (27:5)! Umawada shaqaynaynin hormarka guud ee qoyska. Isxaaq aad buu ugu faraxsanaa inuu dhaxalkiisa qorsheyo iyadoo uusan kala tashanin Rebekah. Rebekahna aad bay ugu faraxsanayd inay ninkeeda khiyaano kula dhaqanto.

Yacquubna **ma ahayn nin aad loo jaclaysan kari**. Waxaan isaga u aragnaa mid ka mid ah geesiyaalka ruuxiga ah ee aan Kitaabka ka akhrinayno laakiin markaan eegno noloshiisi hore, runtii ma ahayn nin ay nagu wanaagsan tahay inaan wax noloshiisa ku saabsan maqalno. Safarkiisa nolosha kuma uusan bilaabin Ilaah ka cabsasho. Ilaah nimcadiisa guud ayuu dadka ku badbaadiya ee ma ahan ‘shaqada wanaagsan’ ee la samayo. Waa qalad inaan u malayno in markuu Ilaah dadka istecmaalo ama uu adeegsado uu doondoono kuwa xaqa ah oo keliya. Taasi waa mid ka fog fikiraddan. Ilaah wuxuu doorta dad aan deganayn, dad aan dhasdhaskooda la fahmaynin, dad aan xidhiidh wanaagsan Isaga la lahayn dabadeedna wuu habeya si uu uga soo dhaliyo sawirka uu uga baahanyahay inay u ekadaan. Yacquub ma ahayn nin wanaagsan ama nin alla ka cabsasho ku dhaqmayey. Ciise wuxuu yidhi, *‘uma aan imaanin inaan kuwa xaqa ah badbaadiyose waxaan u imid inaan dembiilayaasha toobadkeen ugu yeedho.’* Hadduu Ilaah barakadeyey Yacquub, Ilaah wuu I barakadeynaya aniga!

Waa reer la yaab leh. Aabba aan daacad ahayn oo noolol wanaagsan ku doonaya hab aan xaq ahayn. Iisaw oo maskax baniadmig ku shaqaynayo. Yacquub oo khiyaanalaw iyo beenaala ah!

Isxaaq wuxuu Iisaw ka codsaday inuu cunto diyaariyo (27:1-4). Rebekah iyo Yacquub ayaa maqlay wada hadalkaas, waxayna qorsheeyeen inay wax kasta bedelaan (27:5-8). Intuu Iisaw doonayey neef la gawraco si uu cuntada ugu wanaagsan aabbihiis Isxaaq ugu hagaajiyo, Yacquubna cuntuu hagaajinayey. Wuxuuna gashtay dharkii Iisaw wuxuuna isku sii deday neef maqaarkiisa si uu ugu ekaado Iisawgii ay gacmahiisa timaha badnayeen (27:9-17)!

Khiyaanadii waa lagu guulaystay (27:18-29). Waxaa dhacday inuu ceeb la’aan ku been sheeko isagoo weliba eraya ilaahiyah ah istecmaalaya (27:20), laakiin Isxaaq waa la khiyaanay oo sharaftii hogaaminta reerka wuxuu ku wareejiyey Yacquub. *‘Waxaan kuugu duceynaya inay dadka kuu adegaan adiga, oo quruumaha ha kuu jilba joogsadeen adiga. Waxaan kuugu duceynaya inaad ahaatid mid walaalihiisa xukuma!’* ayuu yidhi isagoo si sharciga waafaqsan xilka hogaaminta reerka ku wareejinaya wiilkiisa (27:29)!

Ma jiro qof farxadda ugu weyn ka helay dhacdadani. **Isxaaq ma helin wax ka sareyo wuxuu heli lahaa**. Wuxuu qorsheeyey inuu dabageddiyo qorshaha Ilaah ee ku dhigan Bilawgii 25:23. Waa la yaab oo wuxuu go’aansaday inuu hogaaminta uu Ilaah isaga siiyey iskiiga wareejiyo nin dhawaan guursaday laba naagood oo reer Yahuudi ah.

Yahuudda waxay ahayd dad ay inaba quseynin waxyaalahan wanaagsan ee uu Ilaah ka ballanqaaday Ibraahim inuu adduunka u samayn doono.

Rebekahna ma aanay helin wax aan u qalmin inay hesho. Qorshaheedi khiyaanada ahaa ayaa dhallay aargudashadaas, Yacquubna waxaa dhacday inuu naftiisa la carare noqdo, wayna lumisay wiilkeedi ay ugu jaclayd. Waxay rabtay inay noloshiisa barakooyin ku kordhiso laakiin isagoo dhan ayey lumisay.

Yacquub wuu helay dhaxalka laakiin kaddib markuu maray silec fara badan. Yacquub waxaa u wanaagsanayd inuu noloshiisa gacanta Ilaah ku daayo. Ilaah wuxuu horay u sheegay inuu kan ugu weyn uu u adeegi doono kan ugu yar. Waxay ahayd inuu Yacquub Ilaah ka sugo ilaa uu balankiisa ka oofinayo.

Baybalka wuxuu sheegaya inay jirto xigmad ah tan adduunka haddii ay caadi tahay iyo haddii ay xagga jinka ka imaatayba (Yacquub 3:15). Ilbaxnimada dadka adduunka wax qiima ah ay leedahay ma jiraan waayo, laguma helayo barakada Ilaah. Xataa waxaad isku deyi karta inaad doonista Ilaah hab khiyaano ku raacdid laakiin wax wanaag ah oo aad kaga midho goosanaysid ma jiraan.

Midda la yaabka leh waxay tahay waxyaalahaas aan arkayno oo dhan dhexdooda Ilaah wuu barakadeeyey Yacquub! Khiyaanada Yacquub waxay u keentay silec fara badan. Yacquub waxaa ku qasbanaatay inuu naftiisa la cararo. Wuu lumiyey ka mid ahaanshadii uu reerka ka mid ahaa sanada badan. Rebekahna weligiis dib uma uusan arkin!

Hadduu Ilaah baraka naga ballanqaaday, waa in la aamino balantiisa si uu wakhtiga Isaga la habboon noogu oofiyo. Hababkeena khiyaanada ah inaba nama caawinayaan loomana baahno. Ilaah wuu na siin doonaa wuxuu naga ballanqaaday mar ay ahaataba. Haddii aan xooggeena iyo xigmaddeena adduuneyd ku dafno, waxaan iisu keeneyna oo keliya daahista barakadaas iyo weliba silec fara badan.

Cutubka 8aad

Qaladaadka dadka, Nimcada Ilaah

(Bilawgii 27:30-28:9)

Isxaaq ma jaclayn inuu addeeco waxyaalaha uu Ilaah horay uga sii sheegay nolosha Yacquub. Rebekahna ninkeeda ayey jahawareerinaysay. Iisawna noloshiisa ayuu khatar gelinayey. Yacquub waxaa ka buuxeen habab badanoo khiyaana iyo been ah. Haddaba reerka oo dhan ayaa nacayb dhinac kasta uga yimid, calool xumo, iyo weliba waxay noqdeen kuwa meel kasta shaqsi iyo wada jirba looga hadlaya xumaantooda.

Isxaaq noloshiisa ayuu khatar geliyey maxaa yeelay, wuxuu daahiyey hadiyadaha uu Ilaah ugu talagalay. Isla markii Isxaaq la khiyaanayba, Iisaw wuxuu ka yimid safarkii ugaarsiga (27:30). Wakhti dheer ayey ku qaadatay inuu aabbihiis Isxaaq u hagaajiyo cuntada ugu wanaagsanayd, laakiin wacaa dhacday inuu yimid kaddib markuu Isxaaq dhaxalkii dhaar aan la bedeli karin ku bixiyey oo siiyey Yacquub, marka uu u imaanayo Isxaaq. *‘Fadhiiso oo cuntadan wanaagsan ee aan kuu hagaajiyey cun,’* ayuu yidhi Iisaw (27:31), *‘dabadeedna waxaad awoodi doontaa inaad I siisid barakooyinkaaga’* (27:31). Isxaaq wuu isku dardarsamay (27:32-33)! Haddii uu kani yahay Iisaw, qofka uu hadda dhaw siiyey barakooyinka kumuu ahaa? Waa khiyaanalawgii Yacquub ahaa! Waana axdi dhaar lagu xidhay oo aan dib loo soo celin karin. *‘Dhabtii waa la barakadaynaya Yacquub!’* (27:33)

Iisaw waxba waxyaalaha Ilaah ma dan yeeleynin. Wuxuu u noolaa ugaarsigiisa iyo calooshiisa. Wuxuu ahaa mid nolol caadi ah ku nool oo aan inaba waxyaalaha Ilaah aan danaynaynin.

Hadda wuxuu damacsan yahay barakooyinka laakiin durbaba wuu lumiyey. Marka hore ayey suurtagal ahayd inuu barakooyinka helo laakiin hadda waa mar ay mindi uus ku tagtay. Waxa sheyga la lumiyey ka dhigay mid aan dib loogu soo celineynin waa dhaarta lagu xidhay. Axdiga cusub wuxuu leeyahay, *‘eeg uusan qofna inuusan qofka samaynin sinada galmada ama yuusan qofka noqonin mid aan Ilaah lahayn sida uu ahaa Iisaw, kaa oo hal saxan oo cunta ah ku iibsaday dhaxalkiisa curudnimo ee uu xaqa u laha. Markaasi dabadeedna markuu rabay inuu dhaxalkaas helo loo*

diiday. Wax isbedel ah uu maskaxda ku dhalin karo ma jiraan in kastoo uu barakooyinka illin ku doondoonaay' (Cibraaniyada 12:17).

Xagga Axdiga cusub waxaa jiraan meela badan oo noogala waaninaya inaanan isgefinin barakooyinka Ilaah. Sidee baan annago Masixiin ahaan – kaga fakan karna haddii aan badbaadada nala siiyey ku shaqayn wayno? (eeg Cibraaniyada 2:3). Haddii aan safarkeena iimaanka xaqnima kula socon wayno dhaar ayaa noogala wareejin doonaa barakooyinkeena dibna uma soo ceshan karno mar dambe (eeg Cibraaniyada 6:2-8). Haddii ay dhacdo inuu Ilaah xanaaqa aan ka xanaajinay darraaddiis nooga dhaarto inuusan wax noo samayn doonin dhaxalkeena wuu lumay. Iisaw waa waana Masixiinta wax lagu baraya si aanay si taxadir la'aan ah iisu gefinin hadiyadda uu Ilaah ugu talagalay.

Waxaa dhici karta in qofka Masiixiga ah uu gaaro mar uu rabbi doono barakada uu mar ku wayey taxadir la'aanta uu nolosha kaga noolaa. Iisaw wuxuu yidhi, *'I barakee, aniga iyo isaguba, aabbaw!'* (27:34). Mar buu taxadir la'aan ku noolaa laakiin hadda wuxuu u baahan yahay dhaxal. Laakiin waa mar ay mindi uus ku tagtay.

Haddii dhinac kale laga eego waa Yacquub, kan ka faa'ideystay taxadir la'aanta Iisaw oo khiyaana sameeyey. Saa ay tahayna Iisaw waa inuu noloshiisa masuul ka ahaado (27:35). Dhaar ayaana meesha soo gashay; wax la sameyn karo oo dhacdadaas dib loo bedeli karo ma jiraan (27:36-37).

Iisaw ciil buu la barooranaya (27:38). Maraha qaarkood waxaa la gaaraya heer uu toobadkeenka marxaladda lagu jiro bedeleynin. Iisaw waa nin diyaar u ah inuu toobadkeeno. Dhabta wuxuu rabaa inuu hadda barakooyinka iyo wax alla wixii la xidhiidha oo dhan in la siiyo. Laakiin waa mar ay mindi uus ku tagtay oo dhaarta uu aabbihiis ku galay sariirta dhimashada ma ahan mid la leexin karo. Masiixiga lumiyey barakooyinkiisa wuu ahaan kara mid toobadkeen leh. Toobadkeenka waxay qofka ka dhigeysa mid xidhiidhka uu Ilaah la leeyahay hagaajiya laakiin wixii lumay dib looma heli karo. Israa'iiliinta diideen inay galaan Kancaan way shalayeen markii loo sheegay inay barakadii dhulka ay heli lahayeen laga daahin doono. Si xanuun badan ayey ku baroordeen oo ay toobadkeeneen (Tirintii 14:40). Dhabtii Ilaah wuu u cafiyey iyaga (Tirintii 14:20). Saa ay tahayna waxaa ka lumay wax aanay dib u heli doonin. Markay yidhaahdeen, *'Waxaan aadayna ilaa iyo meesha uu Yaahweh noogu balanqaaday'* (Tirintii 14:40), Muuse ayaa iyaga ugu jawaabay oo u sheegay inay marxaladaasi ahayn wax dib looga fikirayo. *'Waa laydiin ka guulaysan doonaa'* (Tirintii 14:42). Baroorashadooda iyo welwelkooda inaba dib uma soo celinin wixii ka lumay. Cafiska ay heleen ayey ku heleen badbaadada; laakiin dhaarta uu Ilaah dhaartay ayaa iyaga ka hor istaagtay inay helaan hadiyadda ay caasinimada ka hore heli lahayeen.

Isla arintaas ayaa hadda haysata Iisaw. Aabbihiis aad buu u jacaylyahay isaga haddaba. Saa ay tahayna aabbihiis wuu ka helay nebinimo ku saabsan kheyr isaga suganaya. Laakiin ma ahayn mid la mid ah barakada uu gefay. Isaga iyo dadkiisa Yahuudda ah waxay u adeegi doonaa Yacquub. Mudda dheer kaddib ayey dadka Iisaw, Yahuudda ka xuroobi doonaan xukunka Israa'iiliinta (27:39-40).

Yacquub wuxuu khiyaanadiisa ka dheefay xabsi iyo silec. Sababtoo ah sida uu Yacquub laba goor u khiyaanay Iisaw, uma muuqato inuu Iisaw isla sidaas uu u taagan yahay inuu doonayo inuu Yacquub ka aarguto. Wuxuu haddana fahmay Yacquub oo isaga mar kale khiyaanay (27:35) oo leh, *'Miyuusan magaciisa rasmiga ah ahayn Yacquub – Dafe, khiyaanalaw?'* wixii meeshaas ka bilaabatana wuxuu

bilaabay inuu uqdad u qaado Yacquub (27:36). Coladdaas mudda dheer ayey jirtay. *'Iisaw wuxuu necebanaa Yacquub...'* durbaba wuxuu maankiisa ka lahaa, *'Kaw baan kaga siin doonaa walaalkey Yacquub'* (27:41). Rebekah ayaa waxay Yacquub kula talisay inuu naftiisa la cararo (27:42-43). Waxay umalaysay inay taasi mudda qaadanaynin (*'maalma la joog isaga,'* ayey tidhi, 27:44). Waxay ka baqaysay inay labadeeda wiilba ay wayso (27:45). Maskiinay Rebekah! Nolosha ay kala kulmeysa naagaha Yahuudda ahaa oo uu guursaday Iisaw ayaa iyada walbahaar ku haya (27:46). Waxay leedahay sabab kale oo ay u doonayso inay Yacquub u dirto xagga walaalkeed Liibaan; waxay ka baqanaysa inuu Yacquub nolosha kaga deydo Iisaw oo uu guursado naaga Yahuudi ah.

Yacquub wuxuu Liibaan la noolaa mudda ku dhaw labaatan sanadood. Isxaaq wuu ogolaaday qorshahaasi Yacquub la dirayey, darbaar kasha iyo laabta ka soo go'ayna wuu ku sogootiyey (28:1-5). Iisaw la aan la jaclaysanaynin ayuu isku deyey inuu xidhiidhka uu waalidkiisa la leeyahay ku toosiyo wuxuuna saa ku sameeyey guur uu ka guursaday kuwa aan Yahuud ahayn (28:6-9). Ugu dambaystii Iisaw wuu ka gudbay nacaybkii iyo uqdaddii uu u qabay Yacquub wayna isku wanaagsanayeen markay kulmeen labaatan sanadood kaddib.

In kastoo ay qaladaadkan dhaceen Ilaah waa naxariis badan yahay. Markii Yacquub la dirayey wax isaga isaga qabsaday intuu jidka socday. Khiyaanadii Yacquub waxay dhashay natiijooyin ah xabsi iyo silec, laakiin intuu safrayey ayuu Ilaah noloshiisa kala kulmay oo Ilaah ayaa isaga ku deeqay barakada gacma furnaanshaha iyo naxariisnimo. Intuu dhulka mugdi noqonayey ayuu gaadhay meel meeshaas ayuu saaxday isagoo dhagax barkin ka dhigtay. Intuu hurdayey ayuu riyooday. Waxay ahayd Ilaah oo Isaga wax u muujinayey waxaasi oo ku saabsanaa naxariista Ilaah. Malaa'igaha ayaa cirka ka soo degayeen oo isaga la kulmayeen. Ilaah ilaa maantadan sidaa buu ku shaqaynaya. Markaan nacasnimadeena masiibooyin naga maqnaa iskuugu soo dejino, waa suurtagal inuu Ilaah naxariistiisa nagu deeqo.

Cutubka 9aad

Yacquubka aan jaclahay

(Bilawgii 28:10-22)

Sanada badan ayuu Yacquub nolosha ku turunturoonayey isagoo waddooyinkiisa khiyaanada istecmaalaya, laakiin hadda Ilaah wuxuu gaadhay heer uu leeyahay, waa in Yacquub naxariis lagula dhaqmo. Dhamaanteen waxaan wadanahay sida Yacquub. Waxaan wadanahay khiyaanayaalaw. Waxaan doonayna inaan fikiradaheena ku midho dhalno. Waxaan doonayna in wax kasta oo habeyo sida annaga nala quman. Waxaan nahay kuwa maskax baniaadmi oo keliya ku shaqaynayaan. Maraha qaarkoodna jaha wareer ayaan nolosheena gelayna. Laakiin Yacquub markuu ahaa mid aan waxba isku kaalmayn karin, kelinimo ay ka buuxsantahay, oo ay masiibo ku hareersanayd, Ilaah ayaa macaawinadiisa noqday.

Waxaa dhici karta dhibatooyinka aad maanta ku jirtid inay yihiin kuwa aad adiga iisu geysatay. Waxaa dhici karta inaad leedahay, ‘haddii aan saa samayn lahayn...haddii aan saa odhan lahayn...haddii aan in yar uun dulqaad lahaan lahaa...’. Dhibaataada waxay ka imanaysa markaan maskaxdeena ku socono ama aan isla weynahay. Saa ay tahayna masiibooyinkaas noloshaada ku hareerka waxay ku bedelmi karaan wakhtiya barakeysan oo noloshaada wax u tara.

1. Ilaah wuxuu adeegsadaa marxaladaha ugu xun. Yacquub reerkooda hortiiisa wuxuu ku noqday mid aan qiima lahayn waana khasab wuxuu dareemay mid sababay masiibooyinka uu jiro. Laakiin waa markaan marxalado noocaas ah ku jirno markaan Ilaah daacad u noqonayno. Yacquub weligiisba wuxuu ahaa mid tiisa mooyaane tukale dheg iyo dhaaya toona u dhigeynin. Waxay isaga ku qaadatay silec badan inuu gaaro heer uu ka dhageysto hogaaminta Ilaah.

2. Markuu Ilaah arimaheena soo gelayo waa uun naxariis uu noo qabo daraaddeed. Yacquub wuxuu aaday Haram (28:10), intuu safarkiisa ku jirayna wuxuu go'aansaday inuu seexo meel magaalada ka baxsan (28:11). Wuxuu barkin ka dhigtay dhagax oo intuu hurdayeyna wuu riyooday. Riyadiisa wuxuu ku arkay jaraanran samada iyo dhulka xidhiidhisay. Malaa'iga ayaa kor iyo hoos iisu daba

marayeen. Riyada waxay tusaysay inay Malaa'igaha ilaalinayeen Yacquub waxayna u keenayeen wax alla wuxuu safarkiisa uga baahnaa si uu uga badbaado khatarta safarka (28:12). Meesha ugu sareysay jaraanjarada waxaa ka muuqday Ilaah, Rabbiga naftiisa. Riyadaasi waxay muujisay Ilaah oo la hadlaya Yacquub: *'Aniga waxaan ahay Yaahweh, Ilaaha aabbahaa...'* Balantii waa hore laga balaqaaday Ibraahim, ayuu Ilaah hadda siinaya Yacquub. *'Dhulka aad ku jiftid, waan ku siinaya...'* (28:13).

Yacquub wuxuu umalayey inuu lumiyey raja oo dhan oo ku ahaan karo *'midhta Ibraahim'*. Si kasta ayuu iskuugu deyey inuu maskaxdiisa ku helo dhaxalka reerka. Laakiin hadda wuxuu gaaray heer uu naftiisa la carare noqday, Iisawna weli cidduu joogay oo aad buu ugu dhawaa Isxaaq iyo Rebekah. Wuxuu umalayey inuu dhaxalka uu heli lahaa uu noqday mid aan dib loo heli doonin.

Laakiin saa ma ahan, Balantii ugu horeysay ee uu Ilaah ku dhawaaqay oo ahayd inuu Yacquub hawlihiisa ku fushan doono markuu yidhi, *'kan ugu weyn ayaa u adeegi doona kan ugu yar'* weli way jirta. Ilaah uma dooranin Yacquub wanaag uu wanaagsanaa daraaddeed. Xataa intuuusan Yacquub dhalanin ayuu Ilaah ku dhawaaqay balantan ah inuu adeegsan doono Yacquub waxayna ahayd ka hore intuuusan wax wanaagsan ama wax xun samaynin ayey ahayd marka uu Ilaah ku dhawaaqay erayada, *'kan ugu weyn ayaa u adeegi doona kan ugu yar.'* Ilaah wuxuu warbixintan dhiibay ka hore intaanay Yacquub iyo Iisaw midna dhalanin *'si ay danta Ilaah isla sida uu u qorsheyey ugu fusho una ahaato mid weligeed jiraysa, ma ahan wanaagga uu qofka ku dhaqmayo daraaddiis laakiin laakiin sababta kan Isaga u yeedhaya uu yahay daraaddeed...'* (Rooma 9:11-12).

Haddaba Ilaah wuxuu u yeedhayey Yacquub si uu ugala hadlo inuu jaalnimo la yeesho isaga. Waxyaalahan oo dhan waxay u dhacayaan naxariista Ilaah daraaddeed. Naxariistanna waxay imaatay mar ay xaaladda Yacquub meel xun joogto!

Heerkan la joogo waxaa muuqata Yacquub oo bedelmay, waxaana loo xaqiijiyey in wax kastoo xumaan ah uu sameyeyba, uu isaga ahaan doono midka uu Ilaah danahiisa ku oofsan doono. Waa isaga ee ma ahan Iisaw, kan ahaan doono awowga Israa'iil.

'Adiga iyo midhtaada ayey qoysaska adduunka oo dhan ku barakoobi doonaan' (28:14). Midhta la balanqaaday waxay ku imaan doonta Yacquub. *'Waan kula jira...'*, ayuu yidhi Ilaah. *'Meel alla meeshaad aaddidba waan kuugu ilaalin doonaa...kuma deyrin dooni...'* (28:15).

3. Balanta Ilaah waxay ku saabsan tahay laba shey oo ah jaalnimo Ilaah lala yeesho iyo mustaqbalka noloshan kaddib la lahaan doono. Ilaah diyaar buu u ahaa inuu jaraanranta ku soo dego oo uu Yacquub la jiro inta noloshiisa ka hartay oo dhan. (Waxaa kaloo uu tan qof ku soo qaban kara Yooxanaa 1:51. Ciise wuxuu sheegay inuu Isaga yahay jaraanjarta! Waa isaga kan ay malaa'igaha sida jaraanjar ahaan marna kor ku aadi doonaan marna ku soo degan doonaan si ay u xanaanayaan dadka Ilaah.

Laakiin balantan kuma saabsana oo keliya jaalnimada Ilaah lala leeyahay iyo badbaadada mustaqbalka lagu hagaajinaya laakiin wuxuu doonaya Ilaah inuu istecmaalo Yacquub iyo balamada ku saabsan noloshiisa dambe. Ilaah wuxuu caddeyey inuu qorshahiisa ku fuli doono Yacquub. Malaa'igaha Ilaah way la joogi doonaan Yacquub ilaa uu Ilaah danahiisa ku oofin doono Yacquub una oofin doono wax alla wuxuu ka ballanqaaday.

4. Danta uu Ilaah Yacquub ka lahaa waxay muuqata oo keliya markuu Yacquub Ilaah iisu dhiibay. Wuu ogolaaday inuu kan isaga la hadlay uu yahay Ilaah (28:16-

17). Waa shey la yaab leh oo uu doonaynin inuu weligiis ilawbo oo wuxuu qaatay dhagaxii uu barkaday wuxuuna ku dhisay minaarad xusuus ah isla meesha ay dhacdadan Ilaah isaga ku qabsatay (28:18-19). Wuu aaminay inuu Ilaah wax alla wuxuu ku dhawaaqay uu samayn doono, Ilaah ayuuna qumaati isugu dhiibay (28:20-21). Si uu u muujiyo Ilaah ugu mahad celinayo waxyaalahaas oo dhan wuxuu balanqaaday inuu wax alla wuxuu heli doono oo dhan meel tobnaad Ilaah u bixin doono (28:22).

Ilaah weli wuu noo yimada intaan weli dembiyadeena ku jirno, Wuxuuna leeyahay ‘Diyaar baan u ahay inaan kula jiro, kuna istecmaalo, weligeyna kuma deyrin dooni, balamadayda oo dhanna adaan kuugu oofsan doona.’ Waa sababtan tan uu Ciise u yimim. Intaan weli dembiilayaal ahayn ayuu noo dhintay Ciise. Wax tallaaba ah aan qaadnay oo aan dembiyadeena iskiiga cafinaynay ma jiraan. Ilaah ayaa taarikhda baniaadmiga soo galay.

Wax aad samayn kartid oo aad isku badbaadin kartid ma jiraan. Waa inuu Ilaah noloshaada hogaamiyo. Waxba dan kama ahan Ilaah nolosha dembiga leh ee aad ku noolan jirtay ee wuxuu ka dan leeyahay qalbigaaga tobadkeenka leh ee isaga u soo noqday. Ilaah diyaar buu u yahay in waxyaalaha noloshaada bedelo. Ilaah wuxuu kuugu leeyahay, ‘Waad burburisay noloshaada, laakiin madaa aan aad kuu jaclahay waxaan ku siinaya Ciise Masiix. Weligaa kuma deyrin dooni kumana dayni dooni. Waan kaamili doonaa wax kastoo aan noloshaada kaga dan leeyahay.’

‘Ilaaha awoodda leh ayaa nala jira; Ilaaha Yacquub ayaa hoygeena ah’ (Sabuurrada 46:7, 11). Ilaah weli waa Ilaaha Yacquub. Waa Ilaaha dembiilayaasha, kuwa khiyaanada ku dhaqma, kuwa wax qaloociya. Wuxuu noo yimadaa markaan dembaabno, markuu xidhiidhka aan Isaga la leenahay burbursanyahay. Wuxuuna isbedel ku dhaliya nolosheena.

Cutubka 10aad

Khiyaanalawga waa la khiyanaya

(Bilawgii 29:1-20)

Tababar farabadan ayaa jiraan oo uu Ilaah ka qabanaya nolosha Yacquub. Isla sidaa ayey nala tahay annaga oo dhan. Ilaah wuxuu nagu badbaadinaya inankiisa madiga ah, Rabbigeena Ciise Masiix, laakiin taasi waa uun bilawga wax kasta. Isbelka Yacquub ma ahayn mid hal maalin oo keliya wax kastoo dembi ahaa oo noloshiisa ku jiray ka bedeshay hababkiisa xumaa. **Hadda ayuu yahay nin hoos jooga wax baridda Ilaah.**

Markaan ka eegno Bilawgii 29 waxaan arkayna waxyaala ugu darnaa qaarkood ee ka mid ahaa tababarka uu Ilaah siiyey Yacquub.

In mudda yar ah ayey wax kasta janna u ahaayeen Yacquub. Wuxuu u safray xagga Xaramka wuxuuna ka kor dhacay ceel afka Xaramka kuyaalay (29:1); waxaan xusuusannahay inuu addoonkii Ibraahim Rebekah kula kulmay ceel Xaramka agtiisa ah. Taariikhda ayaa dib iskuugu noqonaysa. Waa meel uu dhagax weyn yaalo kaa oo ahaa mid lagu daboolayey ceelka ay idaha ka cabi jireen (29:2-3. Waxay u egtahay inay xooladhaqatadaas ahaayeen kuwa Xaramka ka yimid oo aqoon u lahaa Liibaan, kaa oo ahaa Yacquub abtigiis (29:4-5). Yacquub eeddadiis oo la odhan jiray Raxeelna way imaanaysay (29:6). Xawladhaqatadii dhagaxii ayey ceelka ka qaadi wayeen (29:7-8).

Raxeel ayaa u soo baxday (29:9) isla sida ay eeddadeed Rebekah ceelka ku timid sanado la soo dhaafay. Raxeel waa gabadh aad qudhux badan oo isha soo jiidanaysa (29:17) Yacquubna isla markiiba wuu la dhacay inanta. Wuu iska indha tidhay oo wuxuu iska dhigay qof aanan iyada arkin oo aan weliba garanaynin tan ay tahay (in kastoo loo sheegay inay ceelka imaanaysa oo uusan garanaynin inay iyada la sheegay tahay!). *‘Yacquub markuu arkay Raxeel...isla markiiba wuu tegay oo dhagaxii ayuu ka dhaqaajiyey ceelka afkiisa’* (29:10). Wuxuu rabbay inay iyaga aragto ninka la yaabka ah uu yahay Yacquubka! Tani waxay ahayd dhallin yarays la yaab leh, wuxuu ahaa nin xoog badan oo qalbi macaawina leh – waxaan oo dhan waxay dhacayeen

Raxeel oo eegeysa! Dhagaxii ayuu ceelka ka garaangeriyey intuusan xataa salaamin Raxeel, in kastoo ay caadada ahayd inaad horta qofka salaantid intaanad wax u qabanin. Isla markaana iyaduu u tegay, salaamay una sheegay kan uu ahaa (29:11-12). Wuu iska indha tidhayey markuu ceelka daboolka ka geraangerinayey intaanay ceelka imaanin! Weli Yacquub waa uun khiyaanalawgii, wuxuuna isku deyaya inuu iyaga is jacaylsiyo!

Raxeelna isla markiiba qalbigeeda oo dhan ayey ka jeclaatay Yacquub, isla markiiba way orodday oo waxay u wargeysay aabbahayd oo waxay u sheegtay wax ku saabsan ninka cusub ee yimid (29:13). Liibaanna si gacma furan ayuu ku soo dhaweyey isaga (29:14) Yacquubna ciddan reer seedigiis ayuu mudda la joogay. Intuu meesha joogay mudda bil ah ayaa dhamaatay. Maalmahaas oo dhan si joogta ah ayuu Raaxeel u arkayey. Addeerkiisa Liibaan ayuu dhaqaalaynta idaha ka caawinayey isaguna.

Liibaan waa khiyanalaw oo weliba mid hunguri weyn. Waxaan aragnay inuu durbaba u hunguri weynaaday dahabkii keenay addoonkii Ibraahim. (*‘Markuu arkay farantiga iyo gashaanka... wuxuu yidhi “Soo gal kan uu Rabbiga barakadeyow...”’*, Bilawgii 24:30-31). Wuu ka khiyaano badnaa xataa Yacquub! Yacquub kama warqabo laakiin durbaba wuxuu la kulmi donaa qof isaga ka khiyaano badan!

Ilaah badanaa wuxuu nagu edbiya waxyaalaha aan aad noolosheena uga baahannahay. Maraha qaarkood waxay nagu dhacdaa markaan jacayl la dhacsannahay! Waxaan arkayna annagoo ku jirna marxalad iyo qof aan aad uga jacaylnahay wax kastoo aan adduunka ka jacaylnahay. Marxaladda noocaas ahna waxay nagu dhallinaysa jacayl aan aad u jacalaanayno inaan helno macaawinada Ilaah. Waxaan u duceysanayna si aanan weligeen u duceysanin. Waxaa dhici karta inaysan ahayn inaan jacayl la dhacnay ama uu canshaq na galay; waxay ahaan karta wax kale. Waxaa dhici karta inaan ku noolnahay wadan ay wax barashada aad gaali uga tahay oo weliba meelaha aad looga baahan yahay in skoolada la aado (Dadka bariga arinta noocan ah way adagtahay si ay u fahmaan!)

Waxaa dhici karta inay maskiinimadeena aad u weyntahay oo aan aad u doonayno inaan noolol maalmaydkeena wax ka bedelno. Waxaa dhici karta inaan arkayno dad aad u taajirsan annaguna aan ku dadaalayno inaan heerkooda gaadhno. Markaan xaaladda noocaas ah ku jirno waxaan isku deyeyna inaan si kastaba Ilaah kaga dhaadhicino inaan macaaninadiisa u baahannahay.

Ilaah wuxuu Yacquub u tababaraya sida uu dembiyadiisa qof kale uga dhex arki lahaa. Haddaan ka shaqaynin waxyaalaha aan dadka kale ku silcinayno, waxaa suurtagal ah inuu Ilaah noo soo adeejiyo qof kale oo nagula dhaqmo isla sida aan dadka kale ula macaamiloonayno. Yacquub Iisaw ayuu ka khiyaanay dhaxalka uu heli lahaa. Waa lagu yaqaan sida uu xaqa dadka u booboo. Hadda tan ka sii daran ayaa waxay tahay wuxuu canshaqay Raxeel – Liibaanna wuxuu doonaya inuu ka guulaysto! Yacquub, ‘kan wax xoog ku qaata’, ayaa hadda naftiisa xoog lagu qaadanaya. Kan khiyanalawga ah ayaa la khiyaanaya. Yacquub wuu ciyaaray ciyaartiisa laakiin hadda wuxuu la kulmay qof isaguba ka khiyaana badan!

Liibaan wuu yaqaan si fursadaha looga faa’ideysto markuu mid arko, wuxuuna bilaabay inuu Yacquub jaho wareeriyo. ‘Waxay ahayd inaan kuu gudo,’ ayuu ku yidhi. ‘Ii sheeg mushaarka aad rabi lahayd inaan ku siiyo’ (eeg 29:15). Maskiin Yacquu! Khiyaanalawgi ayaa la khiyaanaya. Liibaan laba gabdhood ayuu leeyahay laakiin tan uu Yacquub jacaylyahay ayaa aad u quruxsan, Raaxeel (29:16-18). ‘Hah ahaayee’, Yacquub wuxuu leeyahay, ‘waxaan jeclahay gabadhaada Raaxeel waxaanna

jeclahay inaan guursado iyaga. Waxaad I siisa qontulyoonkayga aan ku noolaan lahaa, iina ogolaw inaan gabadhaada guursado adigoo aan weydisanaynin wax yarad ah ee dharaad ah, waxaanna ogolaanaya inaad ila gashid heshiis ah inaan toddoba sanno kuu shaqayo dabadeedna aad inanta I siisid' (29:19). Liibaan qorshooyin wanaagsan ayuu leeyahay oo weliba wuxuu diyaar u yahay inuu qorshooyinkaas sii wanaajiyo. Saa ay tahayna go'aan dhab ah ma uusan gaadhin. Mana doonayo inuu Yacquub ogaado wuxuu ku fikirayo. 'Waxaa wanaagsan inay adiga ku guursato bedelkii ay qof kale guursan lahayd,' ayuu leeyahay isagoo aan dhabta ka hadlaynin (29:20).

Dhabta jirra ayaa waxay tahay inuu Yacquub ficilada dembiyadiisa kala kulmayo qof kale! Durbaba wuu fahmay wuxuu Iisaw dareemay markuu ka xayubay wuxuu xaq u lahaa. Waxay la mid tahay il il u rid, ama ilig ilig u rid. Yacquub waxaa la tusinaya sida daran ee ay ficiladiisa khiyaanada leh u xumayeen. Waxyaalahan isaga ku dhacayaan oo dhan waa qayb ka tirsan tababarka uu Ilaah nolosha ka siinayo Yacquub.

Cutubka 11aad

Waxaad iisu diyarisaa nolol qiima leh

(Bilawgii 29:21-35)

Yacquub wuxuu hadda yahay xer, ama arday. Ilaah ayaa macalinkiisa ah. Wuxuu hoos imanaya cashara ay ku jiraan jarrabaadyo edbin ah (29:1-30:43) dabadeedna wuxuu ku waajibanyahay inuu xanuunka dhabta dhacdooyinka uu sameeyey dareemo wax kasta ka hore (31:1-55). Dhacdada ugu xanuunka badnayd ayuu noloshiisa kala kulmaya mar uu shey uu aad u rabbay diyaar u ahaa inuu helo. Wuxuu doonaya inuu guursado Raaxeel. Bacdina waxaan arkayna Ilaah oo Yacquub ku taba baraya inuu dembiyadiisa kala kulmo qof kale.

Sheekadii ku saabsanayd heshiiskii toddobada sano waa la gaadhay. Yacquub wuu kaamilay toddobadii sano ee heshiiska ahayd wuxuuna weydisanaya wuxuu u soo shaqaysanayey (29:21). Liibaan wuu ogolaaday oo wuxuu diyaariyey xafladda guurka (29:22). Heerka ay sheekada joogto waxaad u malayn karta in uu xidhiidh wanaagsan ka dhexaynin Liibaan iyo Yacquub. Codsika xaaskiisa waxay ka timid Yacquub. Waxay ahayd inuu Liibaan 'xusuusiyo' heshiiskii jiray. Erayada ku dhigan Bilawgii 29:21, ee ah '*Xaaskayga I sii,*' waa erayo gaaban laakiin aad u xoog badan. Sida caadada ah xafladda noocan ah waxay qaadanaysa toddobaad dhan (haddii ay Xakiinada 14:12-18 tahay sawir dhabta sida ay wax ahaan jireen na tusinaya). Saa ay tahayna caruusadda waxay ahayd in ninka guursanaya loo geeyo habbeenka ugu horeya ee ay xafladda bilaabanayso. Waxaa kale oo caada ahayd in caruusadda wejiga laga dedo ilaa habbeenka ugu horeysa xafladda arooska ninkeeda lagu hor feedi doono (xusuuso wixii dhacay marka ugu horeysa ee ay Isxaaq iyo Rebekah kulmayeen sida ku dhigan 24:65). Xafladda arooska waxaa lagu dhex dhigayey teendho mugdi ah dhexdeeda. Waxaa suurtagal ahayd inuu Yacquub ku dhaco nooc kastoo khiyaana ah uu Liibaan u dhigi lahaa. Saqa dhexe markii la joogo, Liibaan wuxuu Raaxeel ugu bedelay Lee'ah (29:23). Hadiyadda arooska ee uu aabbeheed iyada u diyaariyey waxay ahay inantii shaqaalada ahayd ee la yidhaahdo Silfah (29:24). Oo inta mugdiga teendada lagu jiray Lee'ahna waxay sii khiyaanaysay

Yacquub. Markuu subixii soo kacay wuxuu fahmay inuu habbeenkaas oo dhan qofta uu ka naagaysanayey ahayd Lee'ah ee ma ahayn Raaxeel sida ay doonistiisa ahayd!

Yacquub wuxuu ka midho goostay xanuun la mid ah kii uu xanuunjiyey Iisaw markuu dhaxalkiisa khiyaano kagala wareegay. Toddoba sano ayuu Yacquub xanuunkii dhaxalkiisa lagaga khiyaanay la walbahaarayey oo weliba wuxuu *'ku dhawaaqay dhawaaq aad iyo aad u weyn oo daran'* (27:34). Yacquub wuxuu hadda ku jira xaalad la mid ah tan uu hadda ka hore Iisaw soo mariyey. Toddoba sanno hadda ka hore ayuu Yacquub khiyaanay Isxaaq markay aragtidiisa sii libmeysay sida qoran, *'Markii Isxaaq gaboobay, oo ay indhihiisii u arag darnaayeen si uusan waxba arki karin'* (27:1). Haddana Liibaan ayaa Yacquub ku khiyaanay mugdiga habbeenimo iyo weliba indha shareerkii deday wejiga Lee'ah. Habab badan ayey indhihiisa u aragti yaradeen waxaana lagula ficiltamay isla sida uu walaalkiis kula ficiltamay. Toddoba sanno ka hore intuu Isxaaq Rebekah guursanin; haddana Liibaan wuxuu Lee'ah kula tashtay inay wada khiyanayaan Yacquub. Toddoba sanno wakhtigaas ka hore suurtagal ma ahayn in wixii dhaar lagu galo dib loo bedelo. Hadda, Yacquub wuxuu heshiiska guurka la galay Lee'ah. Marxaladdiisa lama bedeli karo Lee'ahna waxay weligeed ahaan doontaa naagtiisa! **Ilaah wuxuu Yacquub ku tababaray inuu dembiyadiisa kala kulmo qof kale.**

Kaddib markuu mudda mudaharaaday Yacquub (29:25) iyo cudurdaar aan sal lahayn oo ka yimid Liibaan (29:26), Yacquub wuxuu ogolaaday inuu haddana toddoba sanoo kale u shaqeeyo Liibaan. Wax kale uu samayn lahaa ma jirin. Meel aad u fog ayuu cidda ka joogay. Inta badan markay qofka xaqdarro noocaas ah qabsato wuxuu u yeedhan jiray tolkiisa si ay gacan uga siyaan dhibaataada, laakiin Yacquub xaaladda uu ku sugna meelna kama uusan awoodin inuu macaawino weydisto Isxaaq iyo Iisaw! Waxay ahayd inuu guurka uu Lee'ah la galay ku faraxsanaado mudda toddoba sano ah (29:27) dabadeedna waxaa la siiyey Raaxeel inay naagtiisa labaad ahaato toddoba sanno markuu Lee'ah guursaday kaddib (29:28). Iyaduna aabbahayd wuxuu siiyey hadiyadda guurkeeda oo ahayd shaqaalaha guriga oo ahayd gabadh loogu yeedhay Bilhah (29:29).

Casharka waxaa la heli karaya markii nagula qasbo inaan ku tacaalno xaliska marxaladaha daran iyo is afgarasho la'aanta. Yacquub wuxuu ku faraxsan yahay inuu helay gacalisadiisa ahayd Raaxeel (29:30) laakiin wuxuu dusha ku qaatay dhibatooyin fara badan. Wuxuu haddana xilka iska saaray inuu Liibaan u shaqayo toddoba sano oo dheraad ah. Wuxuu leeyahay laba naagood laakiin mid ka mid ah labadoodu jacayl kuma qabo. Durbaba waxaa labada gabdhood ee walaalaha ah ka dhex kici doona nacayb iyo colaad. Yacquub walaalkiis ayuu si daran ula dhaqmay markuu nacayb dhexdooda ka dhacay; hadda waa inuu iska xajiya sida uu u maamuli lahaa colaad ka dhex taagan laba gabdhood oo walaala ah oo ay colaad ka dhex taagan tahay! Wuxuu xaday heerkii uu Iisaw dhallashadiisa ku haystan lahaa; hadda Liibaan ayaa qorsheyey inay Lee'ah jagada ay Raaxeel heli lahayd ka xaddo.

Saa ay tahayna waxaa jiraan saddex uu Ilaah kaga xadgubaya waxyaalahan oo dhan.

1. Waxay Yacquub siinaysa fahan qaldan ku saabsan hab dhaqameydkiisa. Wuxuu dembiyadiisa ku fahmaya nolosha dadka kale uu la xidhiidhayo.
2. In kastoo uu dhibatooyin xun ku jiro, ballamada Ilaah ayaa la sii oofinaya. Ilaah wuxuu ballanqaaday inuu badin doono qoyska Ibraahim oo weliba wuxuu ballanqaaday inuu badintaas ku samayn doono Isxaaq iyo Yacquub. Saddeedda qabiil ee ka soo farcameen Yaquub waxay saddeedduba ka yimideen Lee'ah iyo inanta shaqaalaheeda ah ee la yidhaahdo Zilfah.
3. In kastoo uu dhibatooyinkaas oo dhan maray ugu

dambaysta Ilaah wuxuu isaga ugu abaal guday inuu helo gacalisadiisa ahayd Raaxeel, sidaa daraaddeed dhibatooyinkiisa way u nugaldeen. Lee'ah uusan jaclaynna ugu ugu dulqaatay madaama uu Ilaah isaga ku siiyey afar carruur (29:31-35). Ilaaha ay heshay waxay iyada ku deqeysa inay reerka sharaf kaga hesho. Ilaah wuu yaqaan sida loo dibciyo dhibatooyinka xanuunka badan iyo marxaladaha farxadda leh, si ay farxadaheena nooga caawiyaan inaan dulqaadano xataa markaan ku jirno dhibatooyin.

Markaan dhamaanteen khiyaanayaal ahaanayno sida Yacquub – oo waaba nahay kuwa Yacquub sida aan ku nahayba – Ilaah waa inuu nolosheena ka shaqayo. Dhibatooyinka ama xarbiga aan mareyno Ilaah ayey nagu sii dhaweynayaan. Waxyaalaha daran ee aan nolosheena kala kulmeyno maraha qaarkood waa in banaanka loo soo saaro si aan muraayad ahaan isugu aragno oo aan ku ogaano heerka aan nolsha ka taagannahay.

Ilaah weli wuu na istecmaalaya. Yacquub waa la doortay, waan xusuusanaa, intuusan dhallanin. Doorashada Yacquub la doortay inaba kuma xidhneyn wax wanaagsan uu Ilaah u samayey. Ma ahayn mid ka wanaagsanaa Iisaw.

Waxaa nala badbaadiya annagoo aan wax wanaag ahy samaynin amaba xumaati aan falnay kuma waynayno nimcada ah inuu Ilaah na adeegsado. Saa ay tahayna Ilaah wuxuu u baahan yahay inaan dabiicaddeena bedelno. Barakooyinka ugu weynana waxay inta badan yimadaan markaan ahaano *'weel sharaf leh, la daahiriyeey, oo qiima u leh Sayidka'* (2 Tomoteyos 2:21).

Cutubka 12aad

Adkaysashada xataa markii welwel badan lagu jiro

(Bilawgii 30:1-24)

Raxeel waxay leedahay doonista qalbigeeda – kaa oo ah Yacquub. Laakiin hadda waxaa jirta arin kale oo iyada ka welwelineysa. Sida ay Rebekah iyo Saara horteedaba ahayeen iyaduna waxay aragtaa inaysan carruur dhali doonin.

Qayb ka tirsan hababka uu Ilaah nagu tababaro ayaa waxaa ka mid ah ku adkaysashada xataa markay muran iyo is afgarasho waa jirto. Heerkan uu Yacquub noloshiisa ka joogo waxaan aragnaa inay dhibatooyin muhim ah ku furan yihiin. Ma ahan dhibatooyin noloshiisa halis ku ah in kastoo ay dhibatooyinkaas dhawaan noloshiisa hali ku ahaan doonaan. Marka ugu horeysa waa mid aad u fool markaan nolosha kala kulmayno muranno iyo is afgarasho waa.

Marka ugu horeysa waxaa jirta xidhiidhka uu Raxeel la leeyahay oo burbur ku dhaw madaama aanay ilma dhalin. Waxay u egtahay inay taasi ku eedeynayso Yacquub. *‘Carruur I sii haddii kale waan dhimanaya,’* ayey leedahay (30:1). Waa hab aan caadi ahayn habka ay dhibkeeda ku sheeganayso.

Waxaa jira hal shey oo ka daran cadawga aan lahaan karno, taasina waa markuu qofka leeyahay cadaw aanan lala tashan karin. Haddaba waa maxay sababta wada tashi loola lahaanayo naag madhalays ah oo leh *‘Carruur I sii haddii kale waan dhimanaya,’*? wada tashi waa laga yeelan karaya dood maskax gal ah, laakiin ma ahan sida tan ay Raxeel habkan ku soo jeedinayso. Yacquub inaba kuma faraxsanayn arintan – annaguba kuma farxayno arin noocan ah. Aad buu u xanaaqsan yahay (30:2); markay eedo aan maskaxgal ahayn ku saaran yihiin waa wax aad looga xumaado. Waxay taasi Yacquub ka dhigtay tu lagu tijaabiyo askaysashadiisa iyo iscelintiisa waxayna noqotay inuusan imtixaankaasi ku baasin.

Saa ay tahayna **inaan eedeyn aan maskax gal ahayn la kulanno** waa waxyaalaha ka tirsan hababka uu Ilaah nagu tababarayo. Ilaah wuxuu raba inaan gaadhno heer aan ogolaanayno eedeynta aan maskaxgalka ahayn oo aan weliba adkaysasho lahaano. Dadkeena qaarkood mudda ayey ku qaadanaysa inaan gaadhno heerkaas sare ee

deganaanta. Ciise ayaa ah kana an ku deyanayno. In kastoo eedeyn xanaajin kicin lahayeen lagu eedeyey, deganaansho ayuu lahaa oo waxyaalahaas oo dhan wuu ku aamusay sida ku dhigan Markos 14:61. Markii been lagu eedeyey wax eray ah oo aargudasho ah kuma uu jawaabin. Ma uusan ku dhaqaaqin inuu '*shar shar kaga jawaabo, ama uu cay cay kaga jawaabo*' (1 Butros 3:9). Ilaah wuxuu naga doonaya inaan ahaano kuwa nolosha kaga deyda Ciise Masiix markay marxaladaha heerkan joogaan, mana jirto si kale oo aan ku ahaanayno sida Ciise annagoo aan nagula eedeyn eed been ah oo weliba maraha qaarkood eedeyntaas waxay naga soo geli kartaa kuwa aad noogu dhaw ama aan aad u jacaylnahay.

In kastoo ay dhibatooyinkaas ku furnayeen, Yacquub waxay ahayd inuu jarrabaadyo la kulmo kulana dhaqmo hab degan. Sanada la soo dhaafay Ibraahim marxalada noocas ah ayuu ku jiray waxaana dhacday inuu Xagar u ka naagaysto si uu wiil uga dhalo. Tani waxay ahayd dhibic gacan maroojin ah ee xagga dunida ka timid, wax wanaag ah ee ay Ibraahim u samaysayna ma jirin. Dhabta ficilkaas ma soo dedejinin dhalashada Isxaaq. Durbaba waxaan arkayna Raxeel oo isla xalkaas sanada badan ka hore lagu ficiltamay u jeesatay, oo waxay ku talisay in gabadha u shaqaynaysay ay ahaato tan xalin lahayd madhalaysnimadeeda si ay u dhasho ilma ay korsato ((30:3-4).

Dadka aan Yahuudda ahayn maalmahaas caadi ayey u ahayd in ninka naag madhalays qaba uu gabadha shaqaalaheeda ah ka ilma dhalo. Markay saa noqoto waxay ahayd inay naagta madhalaysta ah ay korsato cunugaasi ay addoonteeda dhashay addoontana inaba cunugaas wax xaq ah kuma lahaan jirin. Ficilkaas wax barako ah uma keenin Ibraahim, Saara, Xagar, Ismaciil ama Isxaaq, laakiin badanaa waxay umalayna inaan dembiga ka dhalin karno wax wanaag ah, in kastoo aanay jirin qof saa yeeli karo! Bilxah waxay dhashay Daan (30:5) kaa oo ay Raxeel u qaadatay sida wiilkeeda (30:6). Dabadeedna wiil labaad ayaa dhashay, Naftali (30:7-8). Lee'ahna waxay u egtahay inay isla dhibkaas qabtay. Waxay xoogga saartay inuu Yacquub ilma badan ka dhalo Silfah; laba cunug oo dheraad ah ayaa dhasheen (30:9-13).

Durbaba Yacquub wuxuu ogaan doonaa inuusan habkaasi ahayn sida doonista Ilaah lagu helo. Inaba nabad iyo farxad naguma hogaaminayso si kastoo uu Ilaah go'aan uga gaadhaba.

Raxeel aad bay weli u jacayshahay inay hesho ilma uurkeeda ka soo baxay. Geed *Mandrake* la yidhaahdo ayaa jiray oo la aaminsanaa inuu madhalaysnimada tidho. Sidaa daraaddeed Raxeel waxay Lee'ah ka codsatay inay u keento *mandrake*; Lee'ah waxay ka faa'ideysatay habbeenkaas oo Yacquub bay la seexatay (30:14-16)! Natiijaduna waxay ahayd inay Lee'ah hesho wiil shanaad (30:17-18) dabadeedna mid lixaad (30:19-20) dabadeedna gabadh (30:21).

Natiijada waxyaalahan oo dhan waxay ahayd inuu Yacquub ku noolaado marxalad aad u xun ee ay ka buxaan, nacayb, masayr, is afgarasho waa iyo muran. Xataa laamanka geedka *mandrake* ee ay Lee'ah gacanta ku haysay ayaa ku filnayd inay Raxeel masayr iyo nacayb bilawdo. Yacquub wuxuu leeyahay afar nagood oo ay mid waliba heerka ugu sareya ku dadaalayso inay iyadu ahaato mid mar kastaba isaga la jooqta. Laba iyaga ka mid ah waxay hore ahayeen gabdha loo kireystay inay guriga ka shaqayaan oo isku deyayaan inay haba yaraate ee wax xushmad ah ka helaan reerka. Mid iyaga ka mid ah waa tu' aan hore la jaclayn. Mid kale waa tu' aan waxba xushmad lahayn maxaa yeelay, waa madhalays. Waxyaalahan oo dhanna waxaa dhex bartanka uga jira Yacquub, wuxuuna ku suganyahay naagahan mid waliba ku dadaalayso yaa ah tan habbeenkii soo galaba isaga haysan doonta.

Yacquub wuxuu fahmay in baryada jawaabteedu daahday aanay ahayn baryaa uu Ilaah diiday. Ugu dambeystii Raxeel waxay dhashay Yuusuf (30:22-24).

Natiijada waxay ahayd shey ay Raxeel iyo Yacquub sanada badan jajaynayaan. Raxeel kol hore ayey rajo beeshay oo ay isku deyday inay xal ku hesho hab kastoo ay taqaanay. Waxay u malaynaysay inaysan jiri doonin mar baryadeeda laga jawaabi doono. Saa ay tahayna waa laga jawaabay baryadeeda. Waa inaan barano inaan ka niyad jabin ducada aan u duceysanayno wax sax ah oo aan aad u jacaylnahay. Hadduusan Ilaah maya cad nagu odhanin waa inaan baryadeena marnaba daynin. Waxaa dhici karta inuu naga jawaab siiyo mar aanan filanaynin. Amaba waxaa dhici karta inuu ku jawaabo hab kale oo aan ka filanaynin.

Laakiin **casharka ugu weyn ee waajibka** ku ah inuu Yacquub barto ayaa waxay tahay inuu **u adkaysto dhibaata kasta oo haysata**. Afar nagood oo niyad jabsan ayaa isaga welwel iyo dhibato ku hayaan. Sayidka aan u naxariisanaynin shaqaalahiisa oo aan weliba aaminka ahayn wuxuu kharibaya shaqadiisa ee xagga idaha iyo ari cadka. Carruu hooyooyink kala duwan ka dhasheen dhamaantood waxaa u dhaxayn doonta is afgarasho waa iyo muran fara badan. Saa ay tahayna waxay ahayd inuu Yacquub deganaansho lahaado. Nooloshiisa oo dhan ma ahan inay ku egtahay uun naago, iyo muran joogta ah iyo weliba Sayid aan aamin ahayn oo aan la ogayn markuu mushaarka si xaq ah ku bixin doono. Nollosha Yacquub waxay ku xiran tahay balamada Ilaah. Miyaan balamada Kancaan ka dhex arkayna dhacdooyinkan oo dhan? Aaway balanta dhulka la dhaxlayo? Aaway dhulalka la dhaxlaya iyo barakooyinka ay quruumaha oo dhan heli doonaan? Waxay tahay inuu Yacquub ka niyad jebin rajooyinkiisa iyo waxyaalaha uu tabanayo oo dhan. Mar baa jirtay uu ogolaaday inuu Ilaah isaga toos ula hadlay (28:16-17). Ilaah ayuu si buuxda isugu dhiibay (28:22). Haddaba isagoo ku dhex jira dhibatooyin badan iyo is afgarasho waa iyo masuuliyado fara badan, su'aasha waxay tahay: Miyuu *'ku ceejismi doonaa welwelada'* (Luukos 8:14), ama miyuu ku adkaysan doonaa inuu dhaxlo balamada Ilaah?

Cutubka 13aad

U guda gelidda safarka limaanka

(Bilawgii 30:25-31:16)

Yacquub wuxuu hadda u baahan yahay in laga xoreyo Liibaan (30:25-26). Marka hore wuxuu ku tala jiray inuu mudda gaaban ku booqdo Xaran, laakiin hadda wuxuu meesha jogaa mudda labaan sano ka badan. Hadda wuxuu haysta afar naag, kow iyo toban wiil iyo gabadh. Ilaah ayaa sanado badan ka hore Yacquub kula hadlay inuu Yacquub dib ugu soo celin doono Kancaan. Madaama uu hadda Yacquub wiil ka dhalay naagta uu ugu jaclaa, wuxuu doonaya inuu cidda ku noqdo si uu u dego. Wuxuu rajaynaya inay dhibatooyinkii isaga iyo Iisaw u dhexeeyey ay mar dambe ahayn wax la xusuusto. Isaga iyo Iisaw ismay arkin mudda dhan labaan sano wuxuuna rajaynaya cadaawtinimada uu Iisaw qabay rabayna inuu kur gooyo Yacquub inay mar dambe jirin. Saa ay tahayna waxaa jiraan waxyaala uu doonaya inuu xaliyo intuuusan Ilaah u ogolaanin inuu ku laabto cidda. Waxaan aragna inuu Yacquub baranayo waxyaala cusub oo iimaanka ku saabsan. Isagu ma ahan nin xagga iimaanka ka dhisan; ilaa hadda wuxuu u egyahay inuu yahay mid gacan maroojin wax ku hela ee ma ahan mid rumaysad wax ku hela. Laakiin Ilaah wuxuu doonaya inuu ahaado mid xagga iimaanka ka dhisan intuuusan cidda ku laabanin.

Mushaarka oo loo kordhinaya ayaa imtaxaan kale ku ah Yacquub waayo, waa inuu ka fiirsado inuu tegi doono ama inuu joogi doono. Liibaan aad buu uga faa'iday Yacquub oo wax uu ka shalay doono ma jiraan hadduu waayo shaqaalihiiisa durbaba la gacan maroojin karo. Wuxuu kula talinaya Yacquub inuu mudda dheraad ah joogo (30:27-30). Laakiin Yacquub diyaar buu yahay inuu waxyaala dheraad ah uu weligiis la kulmin barto.

1. Yacquub wuxuu raacay dareenka iimaankiisa. Yacquub diyaar buu u yahay inuu Liibaan la sii joogo haddii la sii doono xawlaha midabyada leh oo dhan. Liibaan wuxuu haysanaya xawlaha aan midabka lahayn oo dhan Yacquubna wuxuu lahaanaya qaybta ugu yar taas oo ah xawlaha midabyada leh oo dhan (30:31-33). Kani waa go'aan aad u adag oo aan la diidi karin. Idaha badankood way cadyihiin. Eray cadda badankiis waa gaduud ama madaw. Liibaan wuu ogolaaday, laakiin durbaba wuxuu bilaabay inuu khiyaanadiisa sameeyo wuxuuna sameeyey inuu idaha uu Yacquub

lahaan doono sooco. Weli wuxuu isku deyaya inuu Yacquub gacan maroojiyo in alla intuu awoodo (30:34-36).

Waxa aan halkan ku arkayo waxaa wax aan ugu yeedhi karo 'iimaan maskaxda lagaga shaqaysiyey'. Maraha qaarkood iimaanka waa inuu addeeco dareenka nagu jira noocyadooda. Baybalka wuxuu leeyahay tusalooyin fara badan. Wuxuu Ibraahim dareensanaa oo ahayd inuu Isxaaq gabadh uu guursado uga doono Xaram ayaa tusaala wanaagsan ah. 1 Samu'eel 14:6-14 waa tusaala kale. Yonadanna wuxuu yidhi '*Aan tagno waayo waxaa suurtagal ah Ilaah inuu ficiltamo ee...*' (1 Samu'eel 14:6). Isagu 100% xaqiiq uma lahayn laakiin wuxuu umalayey inuu habkaasi ahaa mid uu Ilaah ku hogaaminayey Isaga. Yacquub wuxuu dareemay inuu Ilaah aamino si uu xaqiiq u helo in uu marxaladaha uu la kulmaya ay yihiin kuwa uu Ilaah raali ka yahay.

Tani tallaabo hormar ah ayey u ahayd Yacquub. Marxaladdan waxay ahayd mid marar dhif ah ka dhacday noloshu Yacquub inuu Ilaah noloshiisa u dhiibo bedelkii uu gacan maroojin wax ku raadin lahaa. Yacquub tallaaba ayuu horay u baxay inuu noloshiisa Ilaah ku aamino. Wax buu qorsheynaya taa oo ay natiijadeedu ahaan doonto inuu Ilaah badin doono tidhada xawlaha midabyada leh iyo in kale.

2. Yacquub Ilaah ayuu ku daayey inuu gacan maroojinta xilka iska saaro.

Wuxuu qorsheynaya inuu marxaladda oo dhan Ilaah u gacan geliyo. Xawlaha midabyada leh oo dhan isagaa iska leh oo waxay ahaan doonaan mushaarkiisa. '*Daacadnimadayda ayaa mustaqbalka ii maragfuri doonta,*' ayuu yidhi (30:33). Tani waa tallaabada ugu weyn uu Yacquub noloshiisa ka qaaday. Weligiis hadda ka hore ma uusan odhan, 'Daacadnimadayda ayaa ii maragfuri doonta,! Inta badan wuxuu ahaa mid aad uga soo horjeedo wax alla wixii daacanimada ah, noloshiisa oo dhanba wuxuu ku noolaa khiyaano. Liibaan wuxuu bilaabay inuu sooco xawlaha midabyada leh oo dhan oo haddaba sidee buu Yacquub tan uga faa'idi doonaa? Yacquub wuxuu bilaabay inuu iimaankiisa kaga shaqaysiyo dareenkiisa. Wuxuu sameeyey ficil ah inuu xawlaha midabyada leh oo dhan ay isku boodaan meel aragti ula geedo leh (30:37-43). Ma jirin tacliin la garanayey oo hawlaha oo dhan hal markay laysugu keeni lahaa hal meel si ay iskuboodaan. Waxaa dhici karta inay ahayd waxa uu qalbigiisa ka jeclaa inay ahaato. Laakiin madaama uu Yacquub Ilaah aaminsan yahay, Ilaah wuxuu ogolaaday sida ay fikiraddiisa ahayd inay u ahaato! Yacquub wuxuu haddana sameeyey inuu kala sooco xawlaha kuwa ugu xoogga badan iyo kuwa liitaan dabadeedna wuxuu go'aansaday inay kuwa xoogga leh oo keliya ay arkaan ulihii geedaha ee midabyada lahaa; kuwa xoogga lahaa waxay arkeen midabyada badnaa kuwa liitana waxay arkeen kuwa halka midab ahayeen (30: 42).

Wax kasta oo tacliintaas loogu yeedhaba, natiijada looga baahnaa waa la helay! Durbaba Yacquub wuxuu noqday mid taajir ku ah xawlaha midabyada leh. Casharka uu halkan ka baranayey ayaa wuxuu yahay inay in Ilaah la aamino ay ka wanaagsan tahay gacan maroojinta. Gacan maroorinta qofna uma ogolaanayso inuu yidhaahdo, '*Daacadnimadayda ayaa mustaqbalka ii maragfuri doonta.*'

3. Khiyaanadii Liibaan way shaqayn waysay. Xawlihii Liibaan ayaa hadda ka tira yar kuwa Yacquub, oo weliba kuwa Yacquub ayaa ka xoog badan kuwa Liibaan. Wiilasha Liibaan waxay bilabeen inay colaad ku qadaan Yacquub oo ay ku edeyaan inuu aabbahood khiyaanay Liibaan (31:1) Liibaan naftiisa ayaa hadda noqday mid aan saaxibtanimo la lahayn Yacquub (31:2).

Dhamaan Yacquub iyo Liibaan ayey tani cashar u tahay si ay ku ogadaan in khiyaanadu ama gacan maroojintu aanay marnaba wax faa'ida ah lahayn oo waa uun

iimaan iyo daacadnimo hababka wax lagu taro. Khiyaanadu waa dabiicad uu Yacquub ka soo qalin jebiyey waana mid uu Ilaah aad uga soo horjeedo.

Yacquub hadda diyaar buu u yahay inuu galbado. Ilaahna raali buu ka yahay inuu Yacquub galbado. Dembiga ugu weyna ee uu Yacquub Kancaan kaga cararay durbaba qayb ka tirsan waa laga guulaystay. Yacquub weligiis qumaati ugama xuroobi doono dembigaas, taasina waxay ka muuqata xataa isagoo da' ah waxayna taasi dhacday markuu Liibaan ka tegayey. Saa ay tahayna haba yaraate e tallaabuu qaaday. Wuxuu cashar ku helay in si kastoo loo eegaba ay daacadnimadu tahay habka ugu wanaagsan ee uu qof ku noolaan karo. Ilaah hadda diyaar buu u yahay inuu Yacquub hawshii loogu yeedhay uu hergeliyo, waana inuu xoogga saaro meesha ay hawsha ku fuli lahayd inay tahay Kancaan ee ma ahan Xaram.

Durbaba Ilaah ayaa u muuqday Yacquub oo wuxuu ku amray inuu laabto (31:3). Yacquub marxaladda ayuu u sharaxay naagihisa (31:4-13) wuxuuna u sheegay sheekada ku saabsan sida uu Ilaah isaga ugu muuqday. Naagaha way aamini la'yihiin inaysan wax xag ah ay mar dambe ku lahayn guriga Liibaan iyo jacaylkiisa; diyaar bay u yihiin inay ninkooda Yacquub la guuraan (31:14-16). Yacquub wuxuu wax barashadan ku jiray uu casharkan baranayey mudda dhan labaatan sano. Tani waa habka uu Ilaah ku shaqayo. Badideen aad baan u gabawna intaan hawsha ugu weyn nolosheena ka kaamilin amaba aan arkin. Waxaan u baahannahay mudda dheer, laga yaaba ku dhawaan toban sano, intaan gaadhin heerka ku dhaqashada iimaanka iyo xaqnimada iyo daacadnimada. Markaan heerkaas gaadhno, hawsha uu Ilaah noogu yeedhay ayaa noo bilaabanaysa inay si degdeg ah horay uga socoto.

Cutubka 14aad

Sida aan iisu fahanno

(Bilawgii 31:17-32:8)

Yacquub weli wuxuu ku jira heerka uu isku fahmi lahaa. Mudda dheer ayuu khiyaano iyo sir ku dhaqmayey laakiin hadda si tartiib ah ayuu iskiiga dhex fahmaya khiyaanada ku jirta noloshiisa. Yacquub waa xer, arday. Ilaah ayaa macalinkiiisa ah. Wuxuu hoos yimid edbino jarabaadya kala duwan ku timid (29:1-30:43) oo hadda waxaa cashar lagu baraya inuu runta xanuunka leh ee ku saabsan noloshiisa (31:1-55).

1. Haddana wuxuu baranaya in inkiraadda aan waxba lagu faa'ideynin. Yacquub wuu ka tegaya Liibaan. Weli inkiraad fara badan ayaa noloshiisa ku jiraan. Inaba iskuma deyin inuu Liibaan la qaybsado waxyaalaha uu noloshiisa kala kulmayo; wuu uun iska tegay (31:17-18). Isla markaana Raxeel waxay xadday sanamkii uu Liibaan guriga ku haystay; waxay u egtahay inay qiima ugu fadhiday dhaxalka uu reerka helay (31:19). Hababka uu Yacquub ku ficiltamayo wax daacanimo ah oo ka muuqata ma jirto. *'Yacquub wuxuu khiyaanay Liibaan'* sida ku dhigan Bilawgii 31:20. Liibaan markuu arinta fahmay durbaba wuu xanaaqay wuxuuna bilaabay inuu ka daba galo reerka Yacquub. Yacquub wuxuu joogay Kancaan markuu Liibaan isku deyayo inuu ka daba tago Gilecaad (31:21-23). Liibaan wuxuu diyaar u ahaa inuu dhaawac u geysto Yacquub laakiin Ilaah ayaa habbeen riyo ugu muuqday oo ka waaniyey inuu waxba u geysanin Yacquub (31:24). Haddaba wuxuu ka daba tegay reerkii cararayey (31:25) aad ayuuna ugu calaancalay Yacquub (31:26-28), isagoo u sheegayo sida looga waaniyey inuusan wax dhib ah u geysanin (31:29) wuxuuna ka calaalay sanamkii laga dhacay (31:30). Yacquub haddana wuxuu fahmaya inuusan Ilaah barakadayn doonin wax uu khiyaano ku helay. Ma jirto arin haba yaraate e uu ilaa iyo yarantiisi khiyaana ku sameeyey uu ku guulaystay. Arinta keliya uu qumaati ugu guulaystay ayaa waxay ahayd tan uu sameeyey kaddib markuu yidhi, *'Daacadnimadayda ayaa mustaqbalka ii maragfuri doonta.'*

2. Yacquub wuxuu ka waramaya cabsidiisa (31:31). Tani waa qirasho muhim ah. Khiyaanada uu Yacquub samaynayey waxaa sababtay cabsi. Cabsi kastana waxaa ka dambaysa rumaysasho la'aan iyo jacayl la'aan. Iimaanka wuxuu ku shaqaynaya jacayl (Galatiya 5:6). Jacaylka ayaa cabsida daaqadda ka bixisa (1 Yooxanaa 4:18).

Iimaanka daciifka ah wuxuu dhalaya jacayl aan saldhig lahayn. Iimaanka aan saldhigga lahayna waxaa ka buuxda cabsi. Cabsida ayaa qofka ku hogaaminaysa khiyaanada.

Yacquub wuxuu ku dhaaranaya inuusan jirin qof xaday sanamyada Liibaan (31:31); waxba kama ogayn waxay naagtiisa xadday (31:32). Laakiin Raadinta uu Liibaan raadiyeyna wax midho ah ma dhalin (31:33) khiyaanada Raxeelna waxay la mid tahay tan aabbeheed (31:34-35) iyo tan ninkeeda. Yacquub fursad ayuu u leeyahay inuu xaqnima ku dhamo si iyadoo ay taasi tahay dabiicadda lagu deyan karo (31:36-37). Dhabtii wuxuu ku markhaatufuri kara inuu Liibaan gorgortan wanaagsan sameeyey kaa uu Yacquub uga dhaadhiciyey inuu u shaqeyo (31:38-41) oo waa daaficidda Ilaah oo keliya tan badbaadisay Yacquub (31:42). Liibaan weli wuu isla qumanyahay (31:43) laakiin wuxuu kutalinaya inay nabad ku kala tagaan (31:43). Labadoodu waxay galeen dhaar (31:44-46) taa oo ay dhagax minaarad ah shaaxid uga dhigeen heshiiskooda kaa oo ay ugu yedheen 'tuurka markhaatiyaasha' markii lagu fasiro afka Caraamidu iyo kan Griigga (31:47-55). Dabadeedna waxay ku kala tageen nabad.

3. Waxyaalihii la soo dhaafay ayaa hadda legdayan Yacquub. Malaa'igaha Ilaah ayaa la safrayaan Yacquub (32:1), Yacquubna sahan ayuu iska hor diray si uu dadka reerahooda ee joogeen Kancaan u ogaysiyo inuu jidka ku soo jiro (32:2-5). Laakiin durbaba wuxuu helay farriin gaaban oo naxtin leh. Iisaw ayaa u soo socda inuu isaga ka hor yimaado wuxuuna wata afar boqol oo nin (32:6). Yacquub cabsi ayaa gashay. Marka ugu dambaysay ee ay Iisaw is arkeen, Iisaw wuxuu ku dhaaranayey inuu dili doono isaga. Hadda Iisaw wuxuu u soo safraya inuu ka hor yimaado Yacquub isagoo afar boqol oo nin wata! Waa khatarta ugu weynayd uu Iisaw kala kulmayo sida ay u kala tagen labaan sano oo la soo dhaafay. Talaw muxuu samayn doonaa? Waa dembiga uu horay u sameeyey kan hadda dhibka u keenayo. Waxyaalaha uu Iisaw isaga ka cabanayo ma uusan ugala hadlin si maquul ah. Naftiisa unbuu la cararay isagoo aanan ku fikirin sida ugu faraxsan ee ay arinta ku xalin lahayeen. Hadda Iisaw wuxuu Yacquub ula soo socda afar boqol oo nin, waxay ku dhawyihiin ciidan!

Ilaah wuxuu Yacquub kula talinayey inuu si dhiiranaan ah kula macaamilmo marxaladaha la soo dhaafay. Waana Liibaan la waaninayey (31:24) iyo malaa'igaha isaga sogootinayeen (32:1) ayaa calaamada ku filan u ahaa inuu Ilaah la jiro isaga. Nabad ayey ku kala tageen Liibaan. Hadda waxaa la joogaa wakhtiga nabadi ay ka dhex dhallan lahayd isaga iyo Iisaw. Wuxuu ogyahay inuu Ilaah isaga la jiro. Wuxuu ku dhawaaqay magaca meesha la yidhaahdo, 'Mahaneem' – 'Laba qolo'. Isaga mooyaane waxaa kale oo la socda malaa'igo. Ilaaha isaga u soo diray malaa'iga sogootiyaan markuu Xaramka u socday (28:12) ayaa hadda u soo diray malaa'iga isaga u sogootiyaan Kancaan.

Laakiin xataa ciidanka malaa'igaha kuma filno inuu Yacquub dhiiranaado aaminana Ilaah oo keliya inuu awood leeyahay. Waa inuu nafsaddiisa is habeeyo! Labadiisa qolo ayuu laba u qaybiyey (32:7). Ugu yaraan kala barkooda ayaa badbaadi doona hadduu Iisaw iyaga la dagaalamo (32:8). Wuxuu weli u baahan yahay inuu qorshihiiisa baniadmeed samaysto in kastoo ay malaa'igaha uu Ilaah u soo adeejiyey dhinacyada ka jiraan. Xaaladdan lagu sugan yahay Yacquub wuxuu dareensan yahay inay habboonaan lahayd inay malaa'igaha ficil galaan si ay u xoojiyaan qorshooyinka daafaca uu isagu samaystay!

Waxyaalahan oo dhan waxay u dhacayeen inuu Yacquub nafsaddiisa ku fahmo. Waxay ahayd inuu ilaa hadda fahmo in wax alla wixii khiyaano iyo been lagu sameeyo aanay inaba wax kheyf ah u lahayn isaga. Miyey Iisaw u shaqaysay? Miyey

u shaqaysay Isxaaq? Miyey u shaqaysay Liibaan? Waxyaalaha marxaladahan oo dhan sababayna lagama shasqaynin weli. Cadawtinimada uu Iisaw Yacquub u qabay ee sababtay Yacquub inuu mudda labaatan sanno ah naftiisa la carare ahaado waxaa sababay Yacquub naftiisa. Waxaa loo malayn kara in madaama ay dhacdadaas mudda dheer ka soo wareegatay ay tahay mid la ilawbay. Noloshii Yacquub ee dembiga lahayd ayaa weli isku deyeysa inay noloshiisan hogaamiso.

Badideen waxaan gaadhnaa heer is fahankeena iyo fahanka dembiyadeena qasab nagula tusinayo. Waxa keliya uu hadda samayn karo waa inuu duceysto.

Haddaba isagoo niyad jabsan ayuu Ilaah ku noqday Yacquub. Wuxuuna sameeyey wuxuu Ilaah raali ka ahaa. Qofka marku niyad jabsan yahay diyaar buu u yahay hogaaminta Ilaah iyo doonista Ilaah. Waa suurtagal inuu Yacquub ku fikiro inuu qumaati uga jeesto waddooyinkiisa khiyaanada iyo beenta leh uusanna dib ugu noqon.

Fahan tan

1. Tan waxay ku salaysan tahay dhaqanka iyo dhestuurta ka jiri jiray meesha la odhan jiray Nuzi (waa magaala weyn ee jiri jirtay qarnigii 15aad dhalashada Ciise ka hore waxaana lagu tilmaamaya inay ku taalay Woqooyiga Iraaq). Waa arin uu dood ka taagan yahay laakiin waa dhabta jirta ee arintan lagu macnayn karo sida ay ila tahay.

Cutubka 15aad

Nabad raadinta

(Bilawgii 32:9-21)

Yacquub waxaa lagu qasbay inuu si xanuun badan nafsaddiisa ku fahmo (31:1-55). Hadda waxaa lagu hogaaminaya inuu gaadho heer uu ku jaho wareersan yahay taa uu Ilaah fursaddaasi kaga shaqaynayo noloshiisa (32:1-32).

Tan waxay bilaabatay mar uu Yacquub aad uga cabsi qabay waxa ku dhici doono markuu la kulmo Iisaw, Ilaah buu duca ugu noqday. Noloshiisa ayuu u baqaya, wuxuuna gaadhay heer uu go'aansaday inuusan mar dambe wax khiyaana ama sir ah ku ficiltamin. Haddaba muxuu samayn doonaa? Wuu duceysan kara! **Wuxuu tixgelinaya waxyaalaha uu Ilaah sameeyey maalmaha la soo dhaafay.** Ilaah xadhiidh wanaagsan ayuu la leeyahay Yacquub. Yacquub wuxuu ogyahay sida la yaabka leh uu Ilaah u barakadeeyey Ibraahim iyo Isxaaq. In kastoo ay dembiilayaal ahayeen, wuxuu og yahay inuu Ilaah ahaa '*Ilaaha...Ibraahim, Ilaaha...Isxaaq*' (32:9). Haddaan indha aan wax ku aragno leenahay, waxaan arkayna sida uu Ilaah nimcadiisa ugu deeqay kuwa horteenaa jireen. Annagu iyaga kama wanaagsanin, saa ay tahayna iyaguna ma ahan inay naga wanaagsanayeen. Geesiyaalka iimaanka ee aan Kitaabka ka akhrinayno oo dhan isla sideena ayey dembiilayaal u ahaayeen. Hadduu Ilaah iyaga u naxariistay uu caawiyey annaguna wuu noo naxariisanaya wuuna na caawinaya. Tan waxay isbedel weyn u keeneysa sida uu Yacquub u duceysanayo. Wuxuu ku duceystay, '*Ilaaha Ibraahim...Ilaaha Isxaaq...*'.

Wuxuu tixgelinaya hogaaminta Ilaah iyo balamada Ilaah. '*Rabbiyow kan igu yidhi "wadankaaga ku laabo oo reerkaaga ku laabo, oo wanaag baan kuu samayn donaa."*' Ilaah ayaa isaga ku amray inuu dib ugu laabto Kancan. Yacquub wuxuu dareensan yahay inuu jaha wareerkiisa u xilsaaro Ilaah. Ilaah ayaa ka masuul ah, Ilaah waa lagu aamini kara inuu xaliyo xaaladdaas.

Wuxuu qiranaya sida uusan u ahayn mid qiima leh. Tan waa fikirad ku cusub nolosha Yacquub. Isla sidaana dad badan ayuu khiyaanay weligiisna ma uusan ogolaanin inuu qaladkaas ka galay dadka uu khiyaanay weligiisna ma uusan qiranin inuu noloshiisa waxyaala badan uga baahan yahay. Laakiin hadda xaaladdu way is bedeshay. '*Ma istaahilo haba yaraate ee naxariistaada...*' ayuu leeyahay (32:10). Noloshiisa ayuu dib uga fikiraya. Sanada la soo dhaafay wuxuu ahaa qaxoti naftiisa la carare ah oo ka cararayey inkaarta walaalkiisa Iisaw. Haddase waxaa isaga ku daba xidhan laba qolo oo xoog badan. Wuxuu noqday nin xushmad leh oo reer leh maalna

in ku filan wuu leeyahay. Waxyaalahan oo dhan waxay ku dheceen Ilaah iyo naxariista uu Ilaah ka helay. Yacquub tan ayuu ducadiisa Ilaah kala doodaya. Hadduuba Ilaah isaga la jiray maalmahaas darnaa ee la soo dhaafay, miyuusan Ilaah hadda u wanaagsanaan doonin Isaga?

Codsigiisa wuxuu u dhiibay Ilaah. *'Iga badbaadi...gacanta walaalkay...'* (32:11).

Wuxuu ducadiisa ku dhamaystiray balamada Ilaah ee mustaqbalkiisa ku saabsan. Ilaah ayaa isaga u sheegay inuu u badnaan doono sida carada xeebta badda. Sidee buu u tarmi doonaa oo u badnaan doonaa hadduu Iisaw cidhib tidhi doono xaasaskiisa iyo carruurtiisa? (32:11).

Markuu duceystay wuxuu sameeyey wax alla wuxuu awooday uu dhinac iskiiga dhigi lahaa cadhada uu u qabay Iisaw. Hadiyado ayuu iska hor diray (32:13-20). Addeegayaashiisa waxay ahayd inay Iisaw ku yidhaahdaan, *'Wuu na daba socda.'* Waxay ahayd inay Iisaw u caddeyaan inuu Yacquub soo socdo oo uu rabo inuu Iisaw ula kulmo weji ku weji. Ma jirto hab lex leexasho loola dhaqmi karo Iisaw maxaa yeelay taasi waxay ahayd mid uu horay uga daalay intuu kula dhaqmayey Liibaan. Yacquub diyaar buu u yahay inuu Iisaw toos ula kulmo daacadna u ahaado. Wuxuu haddana horay iskiiga sii diray allabariga nabad doonka dabadeedna diyaar buu u ahaa inuu Iisaw toos ula kulmo.

Way adagtahay inuu qof ka tallaabsado aayad noocan ah isagoo aan fahmin waxa loola jeedo markii la leeyahay waan inaan ku duceysano dhiigga Ciise Masiix. Tani waa uun tusaale laakiin ma ahan mid ugu wanaagsan tusalooyinka la bixin karo. Baybalka wuxuu sheegaya inuu Ciise yahay kan dembiyadeena oo dhan aan ku mulqan karno. Isagu wuxuu noo yahay waaqdhaca inkaarta dembiyadeena naga leexinaysa. Aayaddan ayaa si quruxsan noo bandhigeysa fikiraddan. Iisaw wuu ku xanaaqsanaa Yacquub. Yacquub wuxuu iska hor diray hadiyado si uu xanaaqa Iisaw dhinac uga maro. *'Waxaan isaga ku qancinaya hadiyadda...dabadeedna waxaan arki doonaa wejigiisa'* (33:20).

Dhabtii tusaalahan ma ahan mid sax ah. Xanaaqa Iisaw waa mid daran madaama uu yahay mid damiir fudud. Xanaaqa Ilaah waa mid ku salaysan xaqnimo iyo cadaaladnimo. Waa mid aad loo damacsan yahay in dembiga adduunka afkiisa laga cidhib tiro. Hadiyadda uu Yacquub helay waxay ka mid tahay hababka midkood ee dembiga lagu baabi'in karo, laakiin dhiigga Ciise waa habka ugu wanaagsan uu Ilaah na siiyey. Laakiin dembi leexinta waxaa lagu samaynaya habka ugu wanaagsan kaa oo ah inuu jiro mid waaq dhac noo ahaaday taa oo aan halkan ka fahmayno. Ilaah dembiguu ku xanaaqsan yahay. Sida aan nahayna kuma istaahilno inaan isaga xidhiidh kula yeelano. Waxaa jira hal hab oo keliya ee lagu leexin karo xanaaqa uu Ilaah u qabo dembiyadeena, waa inaan iska hor dirnaa dhiigga Ciise Masiix. Ilaah wuu ogolanaya hadiyadda ku imaatay dhiigga inankiisa madiga ah ee ah Ciise Masiix, waxayna taasi suurtagal nooga dhigeysa inaan Ilaah toos ula kulanno. Marxaladda Yacquub hadda haysata ayaa waxay tahay inay walaalkiis nabadi ku wada heshiyaan.

Aad buu ugu dhiirigalsan yahay inuu Iisaw la kulmo si ay dib u heshiin u helaan. Tan waa fikirad ka timid Yacquub. Ma jiraan wax saaxibtinimo muujinaya uu Iisaw Yacquub u soo diray. Ficilka wuxuu ka socda dhinaca kale. Markay aamindarro iyo is afgarasho waa jiraan, yey u talaa inuu qaado tallaabada ugu horeysa? Waa inaan tallaabada ugu horeysa qaadno! Waxaa dhici karta walaalkeen inuusan rabbin inuu heshiin dambe na dhex maro, laakiin waxay dan noogu jirta inaan isaga dib ula

heshiino isaga. Waa annaga kuwa ay ku habboontahay inay tallaabada ugu horeysa qadaan.

Wuxuu qaaday tallaabooyinka kama dambaysta ah si uu Iisaw ula saaxibo.

Wuxuu diray hawla fara badan. Xarada Iisaw ayey wakhti kala duwan gadheen, *'qolo kasta way is geysay'* (32:16). Marka hore waxaa yimid ari cadka, waxaa ku xigeen idaha, waxaa sii raacay geela, waxaa ku sii xigay lo'da ugu dambaystina dameer faraska. Qayb kastoo xayawaanadan ka tirsan waxaa ku jireen dibiyo, orgiyo iyo wixii la mid ah si ay xawlihiisa u sii tarmaan. Shan goor ayuu Iisaw qofka la soo adeejiyey ka maqlaya, *'dhamaan waa hadiyado...isaguna wuu nagu soo daba jira.'* Yacquub tallaaba kasta oo ay isaga iyo Iisaw nabadi kaga dhex dhici karto oo dhan wuu ku dhaqaaqay.

Hal shey ayaa u dhiman: Waa inuu Ilaah baryada kula xarbiyo ilaa uu Ilaah baryadiisa ka jawaabi doono. Intaan ka badan kuma sii nolaan karo nolol khiyaano iyo been ay ku jirto. Waa inuu Ilaah addeeco haddii kale wax uu yahay male; waa inuu hadda ficil galo haddii kale weligiis ma ficiltami doono. Wuxuu go'aansaday inuu helo barakooyinka Ilaah ama uu dhinto isagoo barakooyinkaas doonayo.

Cutubka 16aad

Ilaah ayaa weeraray

(Bilawgii 32:22-32)

Sida aan arkaynaba Yacquub dabiicad ahaanba isagu waa khiyaanalaw iyo weliba qof dhega adag. Waaya aragnimada uu nolosha uu Liibaan kula noolaa ka helay, wuxuu bartay dabeecadaha khiyaanada inaysan wax wanaagsan ahay, saa ay tahayna dabeecadahan khiyaanada leh weli noloshiisa ayey ku jiraan. Waxaa jirta mar uu Yacquub go'aansaday inuu Ilaah tala saarto, oo uu daacadnimo ku dhaqmo way u shaqaysay oo midho kheyr leh ayuu ka goostay. *'Daacadnimadayda ayaa ii jawaabi doonta,'* ayuu yidhi Yacquub (30:33) Ilaahna wuu barakadeyey isaga. Saa ay tahayna Yacquub dhacdadaas kheyrka lahayd uu kala kulmay xaq ku dhaqashada weli ma aanay bedelin dabeecaddiisa khiyaanada leh, haddana wuxuu ku jira marxaladda ugu darnayd uu weligiis nolosha kala kulmay. Wuu ka soo tagay Liibaan suurtagalna uma ahan inuu xagga ku laabto. Saa ay tahayna wuxuu helay farriin kale oo naxtin leh taa oo ah inuu Iisawna isaga kula kulmi doono ilaa iyo afar boqol oo nin. Marka isaga iyo Iisaw isku key dambaysay Iisaw wuxuu ku dhaaranayey inuu dili doono isaga. Yacquub aad buu u cabsi qaba (32:6-7).

Yacquub wuxuu ku dadaalaya inuu si daxadir leh ku dhaqmo (32:7-8) wuuna duceysanaya (32:9-12). Dabadeedna hadiyado ayuu u diraya Iisaw isagoo umalaynayo inay hadiyadaha niyadda Iisaw bedeli doonto. Laakiin ma hubo sida uu Iisaw ku soo jawaabi doono, mana oga sida ay wax noqon doonaan. Ilaa hadda sida uu ogyahay noloshiisa weli halis ayey ku sugan tahay. Wuxuu ku sugan yahay inuu beelo wax alla wuxuu leeyahay oo dhan iyo weliba noloshiisa.

Wuxuu yimid webbiga la yidhaahdo Jabook. Dhinaca kale ee webbiga wuxuu si fiican u fahansan yahay inuu yahay dhulka uu Ilaah ugu dhaartay inuu siin doono dhasha Ibraahim. Ilaah wuxuu balanqaaday inuu dhulkaasi siin doono Yacquub, laakiin balantaas waxay ahayd mid la galay mudda ka badan labaatano sano oo la soo dhaafay mana jirin wax balantaasi Ilaah u ego oo la oofiyey labaatankaas sano gudahooda.

Weligaa miyey xaalad aad u xun ku soo martay mid aad is tiri waa maanta ama aniga way ii dhamaatay? Yacquub waa inuu xaaladdan daran ku guuleysto haddii kale noloshiisa way u dhamaatay. Balamada Ilaah horey bay u socon doonaan oo waxaa

lagu oofin doonaa dhulka uu balanqaaday haddii kale waxay noqon doonaan wax aan weligood la oofin doonin. Danta nolosha Yacquub laga lahaa horey ayaa loo wadaya haddii kale Yacquub wuxuu gaadhay heerka noloshiisa ugu dambeyso. Su'aasha waxay tahay: Dhinecee bay xaaladda u shuban doontaa? Yacquub tan wax uu ka ogyahay maleh.

Haddii uu doonayo inuu doonista Ilaah noloshiisa ku oofiyo waa inuu Kancaan aado. Hadda diyaar buu u yahay inuu xooro nolosha aan midhaha kheyarka ah lahayn oo uusan mar dambe tiisa ku socon laakiin uu noloshiisa oo dhan Ilaah u xilsaaro. Laakiin haddii ay tahay inay tani dhacdo waa inuu heshiis nabadeed ka dhex bilawdo isaga iyo Iisaw.

1. Wuxuu qorsheyey inuu keligii ahaado. Reerkiisa ayuu iska hor diray (32:21t-23). '*Yacquub keligii ayaa laga tegay*' (32:24). Yacquub wuxuu fahmay inay waajib ku tahay inuu Ilaah shaqsi ahaan ula dhaqmo.

2. Ilaah ayaa isaga u muuqday. Ilaah ayaa ah kan tallaabada ugu horeysa qaadaya. Markastana sidaa ayeey aataa. Maraha aan aad u qalbi jabsanahay Ilaah macaawinadiisa ayuu nagu soo dhex istagaa. Ilaah wuxuu u muuqday Yacquub. Muuqaal aad loo taaban karo ayaa u muuqday. Bilawgii 32:24 waxaa qoran, '*Nin ayaa Isaga la legdemay ilaa uu waaga ka beryey.*' Waxaa halkan ka dhacay dagaal, waana dagaal dhab ah [waana dagaalan shaararka lays qabtay hadduu Ilaah shaar leeyahay.] Tani ma ahayn Ilaah oo jidh noqday; ma ahan sida Ilaah oo baniaadmi Ciise Masiix ku noqday ama isku muujiyey. Dhab ahaanti waxay ahayd malaa'ig tan Yacquub la tagaalantay. Saa ay tahayna malaa'igta waxay ku muuqatay muqaalka baaniaadmiga, malaa'igtana waxay meteleysay Ilaah. Way caddahay inuu muuqaalka Ilaah ahaa (eeg 32:30). Hoosheeca 12:3 iyo 4aad waxaa qoran, '*Ilaah ayuu la xarbiyey*' oo '*wuxuu la xarbiyey malaa'igta.*' Malaa'igtan ma ahan sida jinniga ama ruuxaaniga. Jidh caadi ah ayuu ku yimid, wuxuuna la xarbinaya Yacquub isagoo doonaya sida uu u legdi lahaa uu dhulka ugu ridi lahaa. Ilaah ayaa xaliyey arinta oo la ficiltamayey Yacquub.

3. Ilaah si degan ayuu ula dagaalayeey Yacquub. '*Nin ayaa Isaga la xarbinayeey ilaa uu waaga ka baryey*' (32:24) laakiin muqaalkaas aan caadiga ahayn wuu ka badin wayey Yacquub. Maxaan arintan ku macnayn karna? Maxay tahay sababta uu muuqaal Ilaah naftiisa metelayo uusan u awoodin inuu ka badiyo Yacquu uu dhulka ku legdo? Ilaah Yacquub ayuu la xarbinayeey habbeenka oo dhan, laakiin kuma uusan guulaysanin! Sababta waxay noqon karta inuu Ilaah si taxadir leh ula ficiltamayey Yacquub [waa sida aabba wiilkiisa ciyaar legdan ah la ciyaarayo]. Ilaah wuu awooday inuu Yacquub saacad alla tuu doono uu burburiyo. Habka uu Ilaah ku dagaaltamo waa mid deganaansho leh. Wuxuu Yacquub ka badin kara oo keliya markuu Yacquub ogolaado inuu Ilaah yahay kan wax kasta ka awood badan.

Dagaalka Yacquub lala dagaaltamayey waa mid dhab ah, saa ay tahayna waxaa loo istecmaalay sida masaal lagu garan karo habka uu Ilaah Yacquub ula dhaqmayey sanado badan. Mudda labaan sanno ka badan ayuu Ilaah Yacquub la dagaaltamayey si uu dabiicaddiisa u bedelo uuna ahaado uun cusub oo Ilaah u adeegayo. Laakiin habka uu Ilaah dadka ula dagaaltamo waa hab deggan. Ilaah kuma qasbin Yacquub inuu dabiicaddiisa xaqdarroda ah bedelo.

Yacquub wuu diiday inuu ogolaado in laga badiyey. Wuxuu ku dheganaaday habkiisa uu maskaxdiisa kaga shaqaysiyey. 'Qofkan' waa inuu si xoog leh ula dagaaltamo Yacquub hadduu doonayo inuu guulaysto. Malaa'igta Ilaah waxay aad u jeclaan

lahayd inaysan cid kale arkin xarbiga ka dhex taagan labadooda. Sababta uu Yacquub habbeenimo u soo baaqday ayaa waxay ahayd inaanan wejigiisa la arkin. Isla marka uu waaga bilawday inuu baryaba muqaalkii Ilaah wuu tegay, saa ay tahayna weli kama uusan guulaysan Yacquub. Yacquub waa nin aad u madax adag oo aan durba ogolaanaynin in laga badiyo! Noloshiisa oo dhan Ilaah marnaba Yacquub ula ma dhaqmin si kulul. Mar kastaba si degan ayuu ula dhaqmayey. Ilaah wuxuu Yacquub ku caasumi jiray inuu ogolaado in laga badiyey, uu ka soo leexdo hababkiisa khiyaanada leh, una ogolaado inuu Ilaah ahaado hogaamiyahiisa, la taliyahiisa, iyo kan isaga amraya. Dagaalanka dhabta ah waa mid lagu sawirayey sida uu Ilaah sanadahan badan oo dhan Yacquub ula dhaqmayey.

Ilaah dib ayuu iisu celinaya. Ilaah wuxuu aad u doonaya inuu na bedelo, laakiin waa suurtagal inuu Ilaah nala dagaalo uusan guuleysanin! Ilaah wuxuu u baahan yahay is hooseysintenna. Wuxuu doonaya inaan Isaga iisu dhiibno Isagoo aanan na legdin oo aan dhulka nagu ridin ama na dhaawicin.

Cutubka 17aad

Guul farxad leh

(Bilawgii 32:22-33:20)

Sida aan aragnayba, dagaalanka uu Yacquub Ilaah kala kulmayey waxay ahayd mid masaal ah oo nagula tusinaya sida uu mudda dheer Ilaah ula ficiltamayey Yacquub. Ilaah wuxuu Yacquub ula dagaalamayey inuu dabiicaddiisa bedelo uu ahaado qof cuseb oo Ilaah addeeca. Laakiin Yacquub ma ahan qof sahal isku dhiibaya!

4. Ilaah markuu arko inaysan habkiisa deggan shaqaynaynin, wuxuu istecmaalaya hab ka sii xoog badan. Yacquub wuu ogolaan waayey in laga reyey. Wuu ku adkeystay inuu cadawgan aan la fahmaynin ilaa dhamaadka la dagaalo. Awooddiisa aan caadiga ahayn ayuu istecmaalay oo natiijaduna waxay ahayd Yacquub oo bawdaha ka murqacaday. Yacquub wuxuu ogaaday in – hadduusan horey u fahmin ay awoodda uu la dagaaltamayey ay tahay mid aan caadi ahayn. Wuxuu ogyahay Ilaah waa inuu noqda kan guusha iska leh. Ilaah wuu siyaadiyey awooddiisa amarka leh Yacquubna wuxuu ku qasbanaaday inuu gacanta taago.

Waa sidan sida uu Ilaah noola dhaqmayo haddii aan durbaba doonistiisa raaci wayno. Ilaah si xoog leh ayuu ula dhaqmay Yacquub taasi oo Isaga ku qasabtay inuu Ilaah iisu dhiibo. Iisawna wuu horeya. Waxaa jira webbi la gudbi doono. Yacquub waa inuu ogolaado in laga guuleystay uuna ogolaado inuu Ilaah ka helo barako ku hogaamisa inuu awoodo inuu raaco amarada Ilaah.

5. Yacquub waa laga reeyey laakiin hadda wuxuu u riyaaqaya barakooyinka Ilaah si ka badan si uu weligiis uga bahnaaday barakooyinka Ilaah. Ilaah hadda wuxuu doonaya inuu tago (32:26ba) laakiin Yacquub si uusan weligiis Ilaah ugu baahnaanin ayuu hadda Ilaah ugu baahan yahay. Wuu ogolaaday in laga reeyey. Wuxuu ogaaday inuu Ilaah wax kasta ku samayn karo noloshiisa awooddiisana ay ay jirin wax lala barbardhigi karo. Haddaba wuxuu ku dhegay awooddii la yaabka lahayd oo wuxuu ka baryey barako. In kastoo la nabareeyey uu naafoobay, wuu ku dhegay awooddii la yaabka lahayd ee isaga la xarbinasay. *‘Kuma sii daynayo ilaa aad I barakadeeysid,’* ayuu yidhi (32:26ta).

Yacquub wuxuu iisu dhiibay martidaas xagga samada uga timid. Waa la nabaryeeyey oo wuu nafoobay laakiin weli wuxuu ku sii adkaystay inuu u baahan yahay inay

barakooyinka Ilaah noloshiisa soo galaan. Waa sidan sida uu Ilaah naga rabo inaan ku dhaqano. Wuxuu rabaa inaan diyaar u ahaano wax alla wuxuu rabo inuu nagu sameeyo, wax alla wuxuu noogu yeedho inaan sameyno. Yacquub Ilaah ayuu iisu bandhigay ka badan si uusan weligiis noloshiisa kaga dhaqmin. Malaa'igta waxay Yacquub kula talisay inuu ahaado qof daacad ah. *'Waa maxay magacaadu?'* Yacquub magaciisa waa 'maroojiye' ama 'Dafe'. Cumrigiisa inta uu adduunka ku noolaana badana dabiicadahiisa waxay fashirayeen magaciisa. Dhawaan wuxuu u riyaqayey inuu waddooyinkiisa xaqdarroda ah ka soo noqdo uu ahaado nin Ilaah u adeega. Haddaba malaa'igta ayaa ku boorisay isaga: *Waa maxay magacaadu? (32:27ba)*. Yacquub diyaar buu u yahay inuu su'aashaas ka jawaabo. Wuxuu ogyahay inuu macnaha magaciisa yahay 'Dafe', mid dadka lugaha ka dafa. Hadda diyaar buu u yahay in loogu yeedho kan uu yahay iyo weliba sida uu noloshiisa oo dhan ku noolan jiray. Wuxuu qirtay inuu dabiici ahaanba dharti uu yahay sida uu magaciisa u dhigan yahay (32:27ta).

6. Yacquub guul ayuu ku helay guuldarroda uu kaga soo baxay la dagaalanka Ilaah. Madaama uu hadda Yacquub ogolaaday in laga reeyey, iisuna dhiibay Ilaah, Ilaah diyaar ayuu u yahay inuu u soo dego macaawinada Yacquub ducooyinkiisana ka jawaabo. *'Magacaada mar dambe ma ahaan doono Yacquub, 'Dafe,' ayuu leeyahay Ilaah (32:28)*. Hadda wixii ka dambeysa Yacquub wuxuu lahaan doonaa magaca lagu tilmaami doono dabiicadaha 'Israa'iil'. Weli waa uun macnihii dagaalanka laakiin waa mid ku salaysan 'la dagaalanka Ilaah'

Yacquub Ilaah buu la dagaaltamay sida looga reeyeyna waxay isaga u ahayd guul! Ilaah hadda diyaar buu u yahay inuu Yacquub caawiyo. Balamadii uu Ilaah hadda ka hore isaga ka ballanqaaday weli waa sidoodi oo waa in la oofiyo. Ilaah wuu u ogolaan doonaa Yacquub inuu gudbo webiga Jabook oo wuu geli doonaa dhulka laga ballanqaaday. Yacquub xataa niman buu la dagaaltamay wuuna ka reeyey. Ilaah diyaar buu u yahay inuu Yacquub ugu abalgudo dadaalkiisa muddada socday laakiin waa inuu horta la heshiyo Iisaw.

Yacquub wuu habsaday inuu jaalnima qoto dheer la galay Ilaah. Wuxuu muuqaalkii aan caadiga ahayn ee isaga la dagaaltamayey ku yidhi, *'Fadlan magacaaga ii sheeg'* (32:29). Wuxuu ogaaday waxa isaga la dagaaltamayey inuu ahaa awood aan caadiyan ahayn. Wuxuu ku fikiraya inay awooddaasi ahayd Ilaah naftiisa! Ilaah wuu kordhiyey dadaalka uu Yacquub kula xarbinayey taa uu Yacquub ku gaadhsiiyey heer uu gacanta ka taago.

Ilaah magaciisa ma muujin doono. Muujinta magaca Ilaah wuxuu imaan doonaa maalmaha Muuse taa uu Ilaah muujin doono macnaha guud ee magaciisa ah 'Yahweh' – Ilaaha dadkiisa ku badbaadinaya dhiigga wanka. Saa ay tahayna Ilaah wuu barakadeeyey Yacquub. Wuxuu isku muujiyey inuu yahay kan naga reeysa si aan barakadiisa u helno.

Yacquub wuxuu meeshaasi ugu yeedhay 'Beniyeel', *'wejiga Ilaah'* (32:30). Yacquub wuxuu og yahay inuu la kulmay waxyaalaha qarsoon ee Ilaah. Waxayna dhacday habbeenimo. Malaa'igta waxay tagtay intuuusan waaga beryin. Saa ay tahayna Yacquub wuxuu xaqiiqsaday inuu Ilaah la jiray.

7. Yacquub waxaa lagu baraarujiyey inuu inta noloshiisa ka hartay uu ahaado mid macaawinada Ilaah oo keliya ku socda. Isagoo jiiisaya ayuu gudbay webiga Jabook (32:31). Mar dambe looma ogolaan doono inuu mar dambe dabiicadahiisi

khiyaanada lahaa ku laabto. Hadda kaddib wuxuu ahaan doonaa mid laangare ah oo Ilaah taagera ka dhiganaya. Waxa uu habbeenkaas la kulmay waa inay ahaato habka uu ku noolan doono inta nolosha ka dhiman. Hadda kaddib waa inuu ahaado mid garanayo meelaha uu noloshiisa kaga liito si uu si degdeg ah Ilaah macaawino uga raadsado.

8. Hab noolaydka waa habka looga baahan yahay inay quruunta Israa'iil ku nolaato. Waxay iyaga u noqotay inaysan cunin hilibka laga soo goyey qaybta bawdaha neefka (32:32). Yacquub ama Israa'iil sida hadda loogu yeedhayo – waxay xoogga saraysa inay dadkiisa xusuustan wixii isaga qabsaday. Sidaa daraaddeed quruunta mustaqbalka ee Israa'iil waa inay ku noolaato sida awowgood ka horeeyey ku nolaa. Waa inay ahadaan dad yaqaana meela ay ka liitaan oo ay noqdaan kuwa ku degdega inay Ilaah taagero ka raadsadaan.

9. Ilaah si buuxda ayuu u ogolaaday rajada uu Yacquub leeyahay ee ah inuu heshiis nabadeed dhex maro isaga iyo walaalkiis Iisaw. Bilawgii cutubka 33aad waa dhamaadka sheekada Bilawgii cutubka 32aad. Waxay ka hadlaysa natijooyinka ka soo baxayaan nolosha Yacquub kaddib markuu Ilaah daacad u ahaaday. Rajada uu Yacquub lahaa oo ahayd inuu heshiis nabadeed dhex maro isaga iyo walaalkiis Iisaw waa la fuliyey. Intuu safarkan ku socday, waxay u egtahay inuu dareenka Yacquub wax iska bedeleen. Yacquub wuxuu la dagaaltamay niman (eeg 32:28) iyo weliba wuxuu haddana la dagaaltamay Ilaah! Wuxuu mudda u riyaaqsanaa inuu heshiis nabadeed dhex maro isaga iyo walaalkiis taasna wuxuu ku helay guusha jacaylka.

Yacquub wuxuu arkay Iisaw oo soo socda. Wuxuu gashaan ka dhigtay uu duulanka hore geliyey kuwa reerkiisa ka tirsan ee uu u arko inaysan isaga qiima u lahayn. Lee'ah oo ahayd tan labaad ee uu jeclaana wuxuu ku daray duulanka labaad ee safka hore ku xigga. Kuwa qoyskiisa ka tirsan uu aad u jeclaana wuxuu geliyey safka ugu dambeyo (33:1-2). Dadka u kala eexashada waxay ahayd dhaqan ay soo mareen hogaaminta Yacquub ka horeeyey oo dhan! Dadka Ilaah weli ma gaadhin heerka xigmadda Ilaah ee aan ka arkayno Axdiga Cusub.

Yacquub naftiisa ayaa reerkiisa hor socday. Aad buu uga fiirsanaya inta uu ku socdo Iisaw, wuxuuna ku ficiltamaya hab muujinaya inuu wax ka xun yahay. Waa hab uu Yacquub ku muujinayo waxyaalihii xumaa uu ku sameeyey walaalkiis taas uu hadda rabbo inuu bogsiiyo boogtaas (33:3).

Laakiin Ilaah wuu ka jawaabay ducadiisa. Iisaw oo niman fara badan ula soo socday ayaa soo dhaweeyey isaga (33:4), waxaana halkaas ka aasaasmay qoys farxad leh oo wada heshiyeen taasi oo u ogolaatay inuu Yacquub reerka walaalkiis Iisaw baro naagihii iyo carruurtiisa (33:5-7). Yacquub wuxuu sharaxay sida uu aad ugu riyaaqayo inuu Iisaw ka helo jacayl iyo dembi dhaaf (33:8), wuxuuna xoogga saaray inuu Iisaw ogolaado inuu qaato hadiyadaha uu keenay (33:9-11).

Iisaw wuxuu doonaya inuu la safro walaalkiis (33:12) laakiin Yacquub wuxuu codsaday inuu si tartiib ah reerkiisa ula safro (33:13-14). Wuxuu ballanqaaday inuu mar dambe Iisaw la kulmi doono. Iisaw wuxuu iisu dhiibay inuu macaawino dheeraad ah bixiyo laakiin looma baahnayn wuuna iska tegay Iisaw (33:15-16). Yacquub wuu sii safray, wuxuuna ku degay uu reerkiisa cid uga dhigay meel la yidhaahdo Sukood (33:17) laakiin wuxuu dhul ka iibsaday Shekeem (33:18-19), meeshaasi uu mawlac ka dhisay, wuxuuna ugu yeedhay *'Ilaah, Ilaaha Israa'iil'* (33:20; erayga Israa'iil ee lagu magacaabay mawlaca waxay macnaynaysa Yacquub ee ma ahan quruunta). Hab sidii hore ka weyn ayuu Yacquub hadda u aqoonsan yahay inuu Ilaah yahay Ilaahiisa.

Chapter 18

Dib u fahmida Ilaah

(Bilawgii 34:1-35:11)

Israa'iil (sida hadda Yacquub loogu yeedhayo) wuxuu jawaab la yaab leh u helay⁷ wuxuu mudda dheer u baahnaa oo ah inuu heshiis nabadeed dhex maro isaga iyo walaalkiisa Iisaw. Hadda wuxuu awood u leeyahay inuu Kancaan dego balamada Ilaahan ay fulaan kuwa isaga lagu fulin lahayna dib loo soo cusboonaysiyo.

Saa ay tahayna waxaan og nahay in boqortooyada Ilaah lagu helo '*markii dhibatooyin fara badan la maro*' (eeg Faalimaha Rasuullada 14:22). Jarrabaadda iyo tijaabinta qaas ah waxay Isra'iil ugu imaanayaan carruurtiisa. Cutubada xigaan waxaan ka arkayna sida uu dhibatooyin ula ugala kulmayo Diinah (Cutubka 37), waxayna ahayd mid ku timid cunugiisa ugu dambayey ee ah Benjamiin (Cutubka 35), iyo Yuusuf (Cutubka 37) iyo welibe Yahuudah (Cutubka 38). Waxaan isaga ku butaacmay rafaad badan oo xagga qoyska uga yimid taa uu kala kulmay wareer badan taa oo isaga ku qasabtay inuu ka safryo Shekeem meesha uu ku soo degay reerkiisa (Cutubka 34).

1. Xanuunka iyo rafaadka inta badan wuxuu nooga yimada dadka aan aad isugu dhawnahay. Hogaamiyaasha nimanka ahaa oo dhan badidood waxay ahayeen sida waalid aan daxadir u lahayn carruurtiisa. Ibraahim hal naag ka badan ayuu qabay. Isxaaq aad buu Iisaw uga jeclaa carruurtiisa kale. Israa'iil wuxuu lahaa afar nagood iyo laba iyo toban wiil laakiin isagu ma ahayn aabba wanaagsan oo qaas ah. Waxaan aragnay sida daran uu Raxeel iyo Yuusuf uga jeclaa kuwa kale. Kaddib markuu dhacdooyinkaas oo dhan kala kulmay Liibaan oo Lee'ah uusan jaclayn hoosta loo geliyey, isagu sabab kasta ayuu lahaa inuu waxa uu dareensan yahay dareemo. Saa ay tahay habkaasi ma ahayn habka ugu wanaagsan uu waalid ku dhaqmo. Aabbahyaasha oo dhan, Ibraahim, Isxaaq, Israa'iil ma jirin midkood oo la odhan karo waxay ku dhaqmeen nolol boqolkiiba boqol looga deyan karo.

Israa'iil wuxuu lahaa **gabadh wareegato ah**. Israa'iil wuxuu ku degay Shekeem. Mar dambe mar ay carruurtiisa qaan gareen, mid ka mid ah gabdhahiisa, Diinah, waxay booqatay reer Kancaan (34:1). Waxaa iyaga gartay Shekeem. Wuxuu ahaa will dhallin yar ah oo aad u madax adag, kaa oo ah wiil uu boqorka dhalay, wuxuuna inanta ku qasbay inay isaga xoog kula seexato isaga (34:2). In kastoo xidhiidhka si qaldan ku bilawday, wuu jeclaaday inanta (34:3) wuxuuna aabbahiis ka codsaday inuu arros ay labadoodu isku guursanayaan diyaariyo (34:4).

Israa'iil naftiisa wuxuu ahaa **aabba aan toosnayn**. Wax buu ka ogaa arinta dhaceysay (34:5) saa ay tahayna ma uusan qaadin wax tallaaba ah uu kaga hor tegayey dhacdadaas (34:5). Xamoor aroos buu diyaarinayey markay gabadha walaaleheyd imanayeen (34:6-7).

Dabadeedna waxaa ficil galeen **laba wiil oo dara oo arinta macaarad ku ahaa**. Shekeem aabbahiis, Xamoor, wuxuu go'aamiyey inay labada reer is guursadaan oo ay beecshara ka dhexeeyso labadoodu (34: 8-10). Shekeem diyaar buu u ahaa inuu bixiyo wax alla gabadha yaradkeeda ah ee lagu sheegan doono (34:11-12).

Marka iyada ah wiilasha Israa'iil waxay iska dhigeen inay raali ka yihiin fikiradda Xamoor, iyagoo codsanaya inay dadka Xamoor oofiyaan hal sharuud oo ah in buryaqabka laga gooyo (34:13-17). Nimankii magaaladana waa laga dhaadhiciyey fikiradda iyada ah dhamaan nimanka oo dhanna waa la guday (34:18-24). Saa ay tahayna, markii nimanka oo dhan la guday oo ay hannuun guryaha ku jogaan, Simcoon iyo Laawi waxay ku ficilqadeen inay ummadda magaaladaas oo dhan laayaan kama ay reebin xataa Xamoor iyo Shekeem (34:25-29). Tan waxay ahayd marxalad lagu macnayn karo godobsasho. Waxay aargudanayaan waxay Diinah samaysay. Waa hadiyad yar oo si fool xuma ah ku timid. Nabaddoonkii heerka sare joogay weji xun ayuu qaatay. Saa ay tahayna Israa'iil naftiisa wax lagu eedo ayuu leeyahay. Qumaati uma uusan xanaanayn inantiisa Diinah. Waxba kama uusan qaban marka ugu horeysay ee ay arintaan dhacaysay (34:5). Haddii ay gabadha Raxeel ahaan lahayd hab duwan ayuu ku ficiltamai lahaa! Inanta Lee'ah waxay ahayd mid uu Israa'iil aad u xanaynaynin, oo madaama uu Israa'iil arinta waxba ka qabanin, wiilashiisa ayaa sida la qumanayd ku ficilqaaday waxayna ahayd weji xumo maxaa yeelay ummad dhan ayey laayeen. Hababka Iraa'iil waa kuwa uu dembi ku jiro oo aan laysku halayn karin; hababka Simcoon iyo Laawi waxay ahayeen kuwa aad u xun. Meesha laysku cabiri lahaa waa dhexaadka labadooda hab. Israa'iil wuu awooday inuu mudaharaado uu weydisto sabeen xidh laakiin labadanba midna ma uusan samayn oo kuwa kale ayuu u ogolaaday inay gacan ku dhiiglayaal noqdaan. Israa'iil wuxuu aad uga cabsi qabay natiijada ficilkan laakiin tallaabooyinka uu qaaday ma ahayn kuwa si fiican xooga u saarayey inuu dhabtii ka xumaa dhacdada (34:30); waxba ficil ma uusan qaadin taa oo wiilasha ka dhigtay inay sida la qumanayd ku dhaqmaan (34:31). Aabbo dembiga ku fudud ayaa dhallay ilma ay maskaxdooda bislaanin oo weliba ficila xun ku dhaqmayaan.

2. Wakhtiyada ugu dhibka badan ayaa Israa'iil ku qasbeen inuu cusboonaysiyo xidhiidhka uu la leeyahay Ilaah. Ilaah aad buu u tixgeliya xiliyada aan aad ugu baahannahay inuu dib noo cusboonaysiyo. Israa'iil wuxuu ku qasbanaaday inuu ka safro Shekeem marxaladaha Diinah ka soo gaadhay daraaddeed. Ilaah ayaa hadda isaga ku hogaaminaya inuu aado Bedel, meesha uu marka ugu horeysay uu Ilaah kula kulmay taas uu Ilaah hadda isaga ku amrayo inuu halkaas mawlac ka dhiso (35:1). Israa'iil wuxuu u baahan yahay inuu fikiraddii asliga ahayd uu Ilaah ka qabay dib ugu laabto. Maraha qaarkood Ilaah wuxuu dib noogu soo cusboonaysinaya isagoo na

xusuusinaya waxyaalihii hore oo nagu leh, ‘*samee waxyaalihii waagi hore aad samaysay*’ (Muujintii 2:5).

Haddaba Israa’iil wuxuu mid kastoo reerkiisa ka tirsan ku baraarujinaya inay iska maydhaan wax kastoo shar ah kana toobad keena si kastoo ay u yartahayba. Waa inay dhar kale oo cusub gashtaan (taasi uu macnaheedu yahay inay nolosha ay dadka kula dhaqmayaan ay bedelaan) oo ay Ilaah dibu ugu noqdaan, Ilaahaasi Israa’iil u gurmaday markuu xaaladda noloshiisa ugu darnayd ku jiray (35:2-3). Reerka oo dhan ayaa u safray Bedel (35:4). Ilaah ayaa iyaga siinaya daafac qaas ah inta ay sii safrayeen (35:5-6). Israa’iil wuxuu dhisay mawlac, Ilaah ayuu caabuday, wuxuu dib u soo xusuusanaya waxyaalihii hadda ka uu nolosha kala kulmay, wuxuuna go’aansanaya inay isaga iyo reerkiisuba ay ahaan doonaan kuwa noloshooda oo dhan ay u noolaan doonaan una adeegi doonaan Ilaah Ibraahim.

Waxay ahayd mar ay taariikh kaamilantay. Facii hore wuu dhamaanaya. Dibooraah way dhimatay (35:9). Waxay digniin u ahayd Israa’iil taa oo lagu ogaysinayey inuu facii aabbihiis dhamaanayo oo uu iskiisa ku soo harayo inuu hogaamiyo dadka Ilaah. Dadka Ilaah weli waxay ku xidhnayeen hal qoys qoyskaasi oo ah kii Ibraahim; Israa’iil ayaa durbaba ahaan doonaa hogaamiyaha keliya ee dadkan xilka u haya.

Ilaah Israa’iil ayuu xusuusinaya magaciisa cusub iyo dabiicadihiisa cusub. Isagu waa ‘Israa’iil’, mid awoodda inuu ahaado mid uu Ilaah barakadeeyey. Mar dambe isagu looguma yeedhi doono ‘Yacquub’, mid khiyanalaw iyo weliba dafe ah (35:9-10).

Dabadeedna Ilaah wuxuu odayaashan hore xusuusiyey inuu Isaga yahay ‘El Shaddai’. Magacan horey ayaan u soo aragnay. Waa magaca macnihiisa yahay ‘Ilaaha caawiya kuwa aan taagta lahayn’. Wakhtigan uu reerkiisa la xarbinaya nolosha dembiga leh uu Israa’iilna uu khatar kaga sugan yahay xagga Kancaaniinta, wuxuu xaqiiq u lahaan kara inuu Ilaah yahay ‘El Shaddai’, Ilaaha macaawinadeena u soo degayo markaan u baahannahay Isaga.

Cutubka 19aad

Annaga, Ilaaheena iyo addeegga aan Ilaah u addeegeeyno

(Bilawlgii 35:10-29)

Maraha qaarkood waa muhim in nala xusuusiyo qofka aan nahay iyo nooca xidhiidhka aan Ilaah la leenahay. Ilaah wuxuu 'Israa'iil' xusuusinayey balamadiisa (Gobaabin ayaan gelinaya '...', si aan u fahanno inaan ka hadlayno 'Israa'iil' ee ah qofka ee ma ahan quruunta). Yacquub wuxuu noqday 'Israa'iil' – mid Ilaah la dirira, qof ogolaanaya inuu Ilaah awood badan yahay si uu barakada Ilaah u helo (35:10). Ilaah waa 'El Shaddai', Ilaaha diyaar u ah inuu caawiyo kuwa aan taagta lahayn.

Ilaah wuxuu 'Israa'iil' xusuusiyey addeegidda uu Ilaah ugu adeegayo noloshiisa. 'Waxaad ahaan doontaa mid midho dhalla' ayuu Ilaah ku yidhi 'Israa'iil'. 'Quruuma dhan ayaa ayaa kaa soo bixi doonaan oo weliba waxay quruumahaas ku imaan doonaan dhashaada (35:11). 'Dhulka Kancaan ayaa lagu siin doonaa' (35:12).

Ma jirto mid ka mid ah waxyaalahan oo marka marka ugu horeysa la sheegayo. Ilaah hadda ka hore ayuu Yacquub u sheegay inuu magaciisa ahaa 'Israa'iil' (eeg 32:28). Ilaah wuxuu u muuqday sida uu magaciisa macnaynayo ee ah El Shaddai – Ilaaha kuwa aan taagta lahayn – Maalma hore waagii Ibraahim. Waxay ahayd sida Ilaaha u yimid inuu badbaadiyo kuwa liita caawiyeyna Ibraahim balamaduna ka dhigay kuwa horey loo soo riixay (eeg Bilawlgii 17:1). Isla markaana balamada dhulka iyo barakooyinka kale ayaa laga balanqaaday 'Israa'iil' hadda ka hore (eeg 28:13-15). Sidaa daraaddeed waxyaalahan kuma cusbeyn 'Israa'iil'.

Waxaa jiraan marar ay marxaladaha ay nolosheena ku sugan tahay nagu qasbayso in nala xusuusiyo qofka aan nahay, Kan uu yahay Ilaah, iyo sida aan Ilaah ugu addeegi lahayn. Haddii kale waan habsamayna oo ka leexanayna waxyaalaha nagu waajibka ah.

Muuqaalka kuwa aan nahay iyo aragtida aan Ilaah ka qabno iyo weliba wuxuu Ilaah noogu talagalay inaan ugu adeegno waxay ahaanayaan kuwa aanan xaqiiq u lahayn haddaan dib noola xusuusin. Ilaah ayaa u muuqday 'Israa'iil' waana marka saddexaad uu Ilaah 'Israa'iil u muuqanayo. Saddexda goorna waxay ahayd mar uu 'Israa'iil xaalad daran ku jiray uusanna ka maarmi lahayn inuu helo macaawinada Ilaah. Waxay ahayd mid dhab ah iyo awood aad u xoog badan markuu qofka ficilada Ilaah muuqaal ku arkayo; dabadeedna muuqaalka Ilaah wuu libmay (35:13).

'Israa'iil wuu tixgeliyey xusuusta Ilaah. Wuxuu dhisay mawlac xusuustiisa ay dhagax tahay (35:14); waxay ahayd habka uu isku xusuusin jiray waxyaalaha dhaceen. Wuxuu rabbay inuu weligiisba xusuusto Bedel. Wuxuu dhulka ku difjiyey dhibic cabitaan ah sida saddaqa bixin (35:14); taasi waxay calaamad u ahayd sida uu qofka shaqsigaa ah Ilaah isugu dhiibo isla sida uu Ciise uu nafsaddiisa u bixiyey inuu ku badbaadiyo aadanaha (Ishacyaah 53:10). Wuxuu dhagaxa xusuusta ku shubay saliid (35:14); tani waxay calaamad u ahayd caleema saaridda iyo barakeynta meeshaasi; Waagii hore saliidka waxaa loo istecmaali jiray xafladaha caleemo saarka.

Israa'iil wuxuu ku waajiban yahay inuu marxalad kastoo xun uu ku daayo awoodda Ilaah. Yacquub wuxuu meesha ugu yeedhay 'Bedel'. Ma uusan doonaynin inuu ilawbo meeshaasi uu Ilaah isaga kula kulmay laba jeer habab weliba la yaab leh ayuu Ilaah isaga halkaas kula kulmay (35:15).

Durbaba Yacquub wuxuu la kulmay marxalad isaga ku adkaatay inuu Ilaah tala saarto. Waxaa timid **dhimashada Raxeel**. Raxeel xaway gashay xanuunka dhalhada midka ugu darnaa (35:16-17) taasi oo iyada ku qasabtay inay wiilka ay umushay ugu yeedhto magac aan rajo lahayn (35:18). Yacquub weli wuxuu ogyahay in xidhiidhka uu Ilaah la leeyahay uu yahay mid jira oo wuu ka rajo weyn yahay fikiradda ay Raxeel qabto. Wuxuu ilmaha dhashay ugu yeedhay 'Benyamiin', 'wiilka koofurta' ama 'wiilka gacanta midigta'. Waxay ahayd in 'Benyamiin' uu ahaado wiilka ugu magaca weynaa ee Yacquub kaa oo ka dhahay naagta uu Yacquub aad u jeclaa ee ahayd Raxeel. 'Israa'iil wuxuu minaarad u dhisay naagtiisa uu ugu jeclaa wuxuuna sii watay safarkiisa uu ku socday xagga Efraim (35:19-21).

Waxaa jira **dembiga Ruubeen**. Mid ka mid ah wiilasha Israa'iil ayaa ka sinaystay Bilhah, mid ka mid ah dumarka gaarka ah uu Yacquub ka naageysanayey uusanna xadhig ku qabin (35:22). Waxay u egtahay madaama uu yahay curudka inuu rabbo inuu la wareego xilka reerka, tanna waa dhaqan jiri jiray uu qofka hogaanimada kula wareegi jiray (eeg 2 Samu'eel 16:15-23 marxalad tan la mid ah).

Dabadeedna waxaa jira **gunudkii faca Isxaaq**. Rebekah way dhimatay. Waxaa jireen laba iyo toban wiil (35:23-26) facii horena wuu baaba'ay. Isxaaq ayaa ah kan ugu dambeya ee dhimanaya. Yacquub ayaa isaga la jira ugu dambaysta, Yacquub iyo Iisaw way wada joojin duugta Isxaaq (35:27-29).

Waxay ahayd Yacquub inuu Ilaah ka helo xaqiiqda waxyaalaha uu ballanqaaday maxaa yeelay, Yacquub xaalad xun ayuu ku sugan yahay waayo, wax alla wuxuu ku tiirsanayey oo dhan way wada burbureen oo la kala didhiyey. Kuwa badan oo wiilashiisa ka mid ahna way ka niyad jabeen isaga. Naagtiisa Raxeel ayaa isaga aad gacan u siini jirtay. Mar dambe ayuu dib u soo xusuusan doonaa maalmahay '*Raxeel ku dhimatay, murugadayda*' (Bilawgii 48:7).

Tani waxay ahayd dhamaadka taariikh jirtay. Danta uu Ilaah lahaa durbaba way ka gudbi doontaa Yacquub oo waxaa loo xilsaari doonaa Yuusuf dabadeedna Yahuudah. Ruubeen wuu is niyad jebiyey. Simcoon iyo Laawi way caddeeyeen inay yihiin niman

karti leh markii loo kaco xagga dhib kicinta. Dhaxalka reerka waxaa la marin doonaa Yahuudah, kaa oo ah wiilka afraad. Yuusufna qayb weyn ayuu ka ciyaari doonaan dhacdadaasi durbaba dhici doonta.

Maraha qaarkood dhacdooyinka aan nolosha kala kulano ayaa nagu qasbaya inaan ka fikirno mustaqbalka. Hawsha uu Yacquub qaban lahaa ma ahan mid ku ekeyd wakhtiga uu isagu noolyahay oo keliya. Waxay ku xidhan tahay mustaqbalka, iyo waxyaalaha dhici doonaan dhimashadiisa kaddib, iyo mustaqbalka boqortooyada Ilaah.

Sheekada Yacquub halkan ayey ku egtahay. Marka dambe ee xaalad Yacquub ku saabsan laga hadli doono waxay xidhiidh la lahaanaysa sheekada Yuusuf. Dhacdada ugu dambaysa nolosha Yacquub ayaa waxay tahay sida uu ugu laabanayo Bedel iyo marxaladaha ku xidhiidhsan. Ilaah wuxuu Yacquub siiyey muujin cusub. Dhibatooyin kasta dhiiranaan ayaa ku mari karnaa marba hadduu Ilaah noloshaasi ka dhex muuqdo. Dhibatooyinka waxaa laga yabaa inay faa'ido leeyihiin.

Dembigga ay samaynayaan kuwa aad noogu dhaw walbahaar weyn ayuu nagu haya. Waxaa jiri karaan xusuusin fara badan oo na xusuusinaysa inay nolosha tahay mid mudda gaaban gudaheeda ku dhamaamayno. Waxaa dhici karta in kuwa nolosheena aan aad uga qiimeyno nagala qaado. Laakiin hadduu Ilaah si joogta ah noo xusuusiyo kuwa aan nahay, kan uu yahay, iyo waxyaalaha uu naga balanqaaday inuu noo samayn doono – wax kasta way wanaagsanaan doonaan. Ma ahan inaan aad ugu mushquulsanaanno farxadda adduunka iyo hormarkeeda; durbaba dhacdooyin ayaa imaan doonaan oo nagula xusuusinaya inaysan inaysan adduunyada ahayn waxa aad ugu wanaagsan ee aan qiimaynayno. Su'aasha waxay tahay: inta ay nolosha ku sii dhawaanayso xagga nolosha weligeed ah, miyaa ka war qabnaa inaan maal ku asturanayno xagga samada? Miyaan ku dhiirigalsannahay inaan wax qiima leh Ilaah u qabanayno? Tilmaanteena, Ilaaheena, hawsheena way asturan yihiin waana waxa ugu wanaagsan ee noogala baahan yahay inaan maskaxda ku hayno.

Cutubka 20aad

Mustaqbalka Iisaw

(Bilawgii 36:1-37:1)

Intaanan ka jeesanin sheekada Yacquub oo aan u jeesanin sheekada Yuusuf, waxaa jirta hal cutub oo ka hadlaya nololaha Iisaw. Bilawgii waa xidhiidhka sheeka qoyska, laakiin intaanan qoysaska badidood sheekadooda ka tageyno waxaa heleyna sawirka waxyaalaha ku dhacaya qaybaha qoysaska liita intaanan nabadgelyo lagu odhan iyaga.

Haddaba kaddib markii la bixiyo horudhaca cusub (36:1), waxaan akhrinayna wax ku saabsan wiilasha Iisaw (36:1-4) iyo odayaasha Edoom (34:29-30). Boqortooyada way ka jirtay Edoom ka hore xataa intaanay Israa'iil boqortooyo yeelanin (34:31-39). Bilawgii 34:40-43 waxay magacaabaysa kow iyo toban magaala oo Edoon ku taala taa ay magaala kasta lahayd hogaamiyaheeda.

Iisaw wuxuu lahaa aasaas xun. Aabbihiis ayaa kharibay oo haddana waxaa isaga khiyaanay walaalkiis. Dhabtii wuxuu ahaa curudka dhabta ah ee Isxaaq laakiin mar hore ayaa Rebekah loo sheegay inay balamada qoyska ku fuli doonto Yacquub ee ma ahan Iisaw. Markuu Iisaw doortay duni jacaylka bedelkii waxyaalaha Ilaah (eeg 25:30). Wuxuu doortay inuu waxyaalaha waweyn ee Ilaah ku bedesho hal baaquli ee fuud ah kaa uu hal maalin iyo hal mar oo keliya kaga baxay (eeg 25:32). Aad buu ugu faraxsanaa naagaha aan Yahuudda ahayn uu qabay (24:3-4) aad buu hab noolaydkiiisa kaga niyad jebiyey reerkiisa (26:34-35).

In kastoo uu aasaas xun lahaa oo uu weliba daahiyey dhaxalka uu heli lahaa, weli aad buu u jeclaa waxyaalaha Ilaah. Waxay u ekaan karta inuu Ilaaha aabbihiis Ibraahim la kulmay markuu ilaa iyo afar boqol oo nin walaalkiisa kaga hortegayey si uu ula tagaaltamo. Yacquub wuxuu la xarbiyey Ilaah iyo qof oo labadooduba wuu ka badiyey. Waxay u egtahay Iisaw wuxuu miyirkiisa ku xagaagay baryada uu Yacquub

baryayey. Dhabtii markuu Yacquub la kulmayey qalbigiisa wuu bedelmay (eeg 33:1-12). Laakiin waxay ahayd mar ay mindhi uus ku tagtay oo qumaati looma bedeli karin waxyaalaha ruuxiyanka ah, Axdiga Cusubna wuxuu istecmaalaya oo nagu waaninaya nolosha ugu horeysay ee Iisaw si aanan si joogta ah ku diidin dhaxalkeena maxaa yeelay, ugu dambaysta waan wayni doonnaa laakiin waxaan nagala qaadi karin xidhiidhka aan la leenahay qoyska Ilaah (eeg Cibraaniyada 12:16).

In kastoo uusan ahayn kan loo doortay inay Israa'iil ama Ciise ku yimadaan, Ilaah wuxuu isaga siiyey hawaska balamada badan ee waxyaalaha adduunka ku soo geli doonaan Ciise Masiix.

Iisaw wuxuu lahaa saddex nagood ee ugu waweynaa (36:1-3). Magacyadooda way ka duwan yihiin kuwa aan ka akhrinayno 26:34-35 iyo 28:9. waxaa dhici karta inuu lahaa naaga badan oo saddex ugu caanka ahaa oo keliya la magacaabay.

Iisaw wuxuu lahaa shan wiil oo laga sheegayo 36:4-5. Iisaw wuxuu ku guuray gurigiisa, waxaana sababay dhacddooyinka aan ka akhrinayno 36:6-8. dhulka cusub waxaa loogu yeedhay Edoom.

Iisaw wuxuu lahaa saddex iyo tobban wiil uu awaw u ahaa sida aan uga akhrinayno 36:9-14. Afar iyo tobban Iisaw ka soo farcamayna waxay odayaal ka ahadeen reeraha halkaas joogay. Waxaana lagaga waramay 35:15-19. Waxaa jireen ilma iyo ila adeerada u ahaa Seciir oo isaguna ku nolaa isla dhulkaasi Edoom, sida loogaga hadlay 36:20-28; mid iyaga ka mid ah wuxuu caan ku ahaa inuu lama degaanka ka fahmo ceelal ay biyo kulul ka soo butaacayaan (36:24). Toddoba odayaalka tuulooyinka ka mid ah waxay ka yimideen dadka (36:29-30). Reer Edoom boqora ayey lahaan jireen xataa ka hore intaanay Israa'iil boqor yeelanin. Saddeec boqoradan ka mid ah waxaa lagaga hadlay 36:31-39.

Kow iyo tobban reer Edoom ka mid ah waxay xukumayeen magalooyin ku yaalo dhulka Edoom.

Haddaba maxaa macna ah oo ku jira waxyaalahan oo dhan oo lagaga hadlaya Iisaw iyo farcankiisa?

1. Tan waxay calaamad u tahay in xataa **Iisaw oo aan horey loo dooranin uu Ilaah barakadeynayo**. Xulashada uu Ilaah Yacquub u xushay inuu ahaado waddada uu barakooyinkiisa u soo marinaya dadkiisa ee ah Ciise Masiix inuu badbaadiyaha aadmiga ahaado ma ahan in Iisaw laga hor istaagay barakadooyinka oo dhan. Waa inaan ogaano in Kiniisadda ay ku jiraan dad hawl qaas ah loo doortay. Laakiin xataa kuwa badbaaday in kastoo aan loo xulanin hawl qaas ah ama shaqa qaas ah, Ilaah weli wuu barakadeynaya!

2. Waxay calaamad u ahay in **barakooyinka uu Ilaah barakadeeyo inay waxba kaga duwanayn tan uu ku barakadeeyo kuwa uu hawl qaas ah u doortay**. Yacquub waxaa laga balanqaaday inuu midh; Iisawna midh buu lahaa. Yacquub waxaa laga balanqaaday dhul; Iisawna dhul buu lahaa isaguna. Yacquub waxaa la siiyey balanta ahayd inay farcankiisa ka soo bixi doonaan boqoro; Iisawna boqoro ayaa ka soo farcameen.

3. **Kuwa uu Ilaah doortay wakhtiya adag ayey nolosha kala kulmaan laakiin natiijada loogu abaal gudayo waa mid heer sare ah**. Iisaw midh buu lahaa isla sida Yacquub laakiin midhtaasi ma ahayn mid natiijadeedu ahayd Ciise Masiix. Iisaw dhul buu lahaa isla sida Yacquub laakiin dhulkaasi ma ahayn kan lagu tilmaamay dhulka cusub iyo samada cusub. Dhabtii marar badan dad Yacquub waa laga xoogay dhulka

oo Masaray addooma ku ahaayeen. Dhulka iyaga laga ballanqaaday wuxuu ahaan doonaa kan ay wada dhaxli doonaan dhamaan rumaystayaasha Ciise rumaysan oo addeecay. Balanta waxay u egtahay tan laga balanqaaday Iisaw, laakiin abaal marinteeda waa heer sare. Iisaw wuxuu lahaa boqoro isla sida Yacquub waxaana isaga la siiyey ka hore intaanay Israa'iil boqor helin, laakiin boqornimadaasi ma ahayn tan uu Ciise ku imaanayey.

Kuwa uusan Ilaah hawla qaas ah u adeegsanin waxay heli doonaan wax alla wixii dheef ah oo adduunka ku jira ee ay kuwa hawlaha qaaska ah loo doortay helaya, saa ay tahayna ugu dambaysta Ilaah kuwiisa uu u doortay hawlaha qaaska ah heer sare ayuu ula dhaqmaya.

Waxay ahaan lahayd in lagula baraarujinaya in markay dad kale hawsha aan qabano si ka wanaagsan u qabtaan, markii lagu cabiro heerka adduunka, dhaxalkeena si degan ayuu ku imaan doonaa laakiin heer sare ayuu ku imaan doonaa. Iisaw wuxuu helay hadiyado badan inta adduunka laga helo laakiin reer Edoom wakhtiya adag ayey mustaqbalka kala kulmi doonaan. Waxay ahaan doonaan kuwa cadho badan oo xanaaq iyo uqdad ka buxaan (eeg Tirintii 20:21). Reer Ameleek iyo reer Edoom waxay ahaayeen kuwa ka soo farcamay Iisaw laakiin ma dareemi doonaan barakooyinka Ciise. Waan uun rumaysad Ciise la rumaysto tan taarikhda Iisaw lagu bedeli karo. Mid kastoo Iisaw ka soo farcamay kan uu ahaadaba, wuxuu waxay badbaadada ku helayaan wiilka Yacquub, Rabbigeena Ciise Masiix. Iisaw wuxuu lahaa barakadooyinkiisa laakiin barakooyinka uu Yacquub helay ayaa heer sare jooga oo ma ahan kuwa lays barbar dhigi karo waayo, wuxuu helay dhulka Kancaan (37:1).

Cutubka 21aad

Wiil dhallin yar ah iyo Mustaqbalkiisa

(Bilawgii 37:2-36)

Sheekada Bilawgii waxay hadda ku hoobanaysa Yuusuf, in kastoo uu Yacquub sheekada gadaal dambe ka soo geli doono. Isla sida ay u ahay odayaashii hore oo dhan, Ibraahim, Isxaaq, Yacquub, Yuusuf – Yuusuf waa qof mustaqbal qaas ah leh markii laga eego xagga qorshaha iyo danaha Ilaah laga eego.

1. **Yuusuf waa in ujeeddo leh** (Bilawgii 37:2-11). Noloshiisa hore waa mid caadi ah. Wuxuu ahaa adhi jir (37:2). Isla sida ay qof kasta la tahayba, wuxuu la kulmay dhibtooyin badan. Wuxuu ahaa mid waxyaala badan horey u sii sheega intanay dhicin oo kula hadlayey walaalihiis (37:3-4). Arinta uu ku wanaagsanaa ayaa waxay tahay wuxuu u riyaqayey sida uu mustaqbalkiisa uga fulin lahaa doonista Ilaah. Ilaa hadda meesha ay arinta joogto kuma garan karno waxa uu mustaqbalkani yahay laakiin isla sida ay u ahay rumaystayaasha ka qayb qaatay balamada Ilaah, wuxuu leeyahay hiba uu xagga Ilaah ka helay. Hibadiisa waa mid qaas ah: wuxuu awood u leeyahay inuu riyooyin ka helo xagga Ilaah riyooyinkaas ay waxa ay mustaqbalka ka sheegayaan run ahaato (37:5). Ilaa hadda waxyaalaha uu ku riyoonayo waxay ku saabsan yihiin noloshiisa shaqsi ahaanayd. Hal mar ka badan ayuu riyooyinkan helay (37:6-8, 9).

Yuusuf qalad buu galay qaladkaasi oo ahaa inuu riyooyinkiisa reerkooda la qaybsaday. Tani wax wanaag ah kama uusan helin. Walaalihiis wax wanaag ah uguma fikirayaan fikiradaha riyooyinka uu la qaybsaday daraaddeed waayo, riyooyinka isagay saraysiinayeen. Yuusuf yaraw isla weyni unbuu ka qaaday waxyaalahaasi noloshiisa looga muujiyey, walaalihiisana waxay ku dhalisay masayr (37:10-11). Xataa Yacquub ayaa isaga canaantay, in kastoo uu arinta aad uga fiirsanayey madaama uu hadda ka hore laba riyo ay isaga xidhiidhka uu nolosha Ilaah la leeyahay wax ka shegeen, mid wuxuu ku helay Bedel mid kalena Beniyeel.

Qof kastoo Masiixi ah waxaa jirta hawl uu Rabbigu ugu yeedhay, waana wax uu Ilaah qofkaas ka siinayo hadiyad wanaagsan xagga boqortooyada Rabbigeena Ciise Masiix.

2. **Yuusuf wuxuu u baahnaa in la tababaro.** (Bilawgii 37:12-35). Isla sida ay u tahay qof kasta uu Ilaah adeegsado, Yuusuf wuxuu u baahnaa diyaarin khiyaas ah. Ilaah ayaa isaga doortay. Wuxuu leeyahay mustaqbal iyo hibo ruuxiyan ah, saa ay tahayna Ilaah wuxuu u baahan yahay inuu Yuusuf naftiisa noloshiisa ka shaqayo.

Tababarkiisa **si degdeg** ah ayuu ku bilawday. Waxaa jirta maalin maalmaha noloshiisa ka mid ah oo ku bilaabanaysa si caadi ah. Walaalahiisa waxay ku shaqaynayaan adhi jir nimo. Yuusuf, oo ah kan uu aabbaha jeclaa, cidduu joogaa (37:12). Yacquub ayaa isaga u diray aado safar dhereerkiisu yahay ilaa iyo 80 kilomitara si uu uga war doono xaaladda walaalahiisa (37:13-14).

Tababarkiisa **si la yaab** leh ayuu ku bilawday. Yacquub inaba kuma fikirin inuu Yuusuf khatar ku sugnaan doono, laakiin wax aanan la filanaynin ayaa dhacay. Walaalaha uu doonay si degdeg ah laguma heli karin. Saa ay tahayna Yuusuf wuu adkaystay ilaa uu walaalihiis ka helay wuxuuna fahmay inay meesha uu ku ogaa – Dothan (37:15-17) ka guureen oo ay degeen meel ka jirta ilaa iyo labaatan iyo shan kilomitara. Shekeem waxay ahayd meel ay si jooqta ah ku soo booqan jireen reerka Ibraahim laakiin Dodan waxay ahayd meel ka sii fog meela ay aqoonta u lahaayeen. Wiilasha waxay degeen meel ay ogayeen inay xor u ahaayeen inay ku dhaqmaan wax alla waxay rabaan oo cid arki doonto ma jirto. Yuusuf oo meel fog ka soo socda ayey arkeen oo isla markiiba waxay ku tashteen inay ka takhsuusaan madaama uu cidda aad uga fogaa. Wixii aan ka ahayn Ruubeen, dhamaantood waxay ku tashteen inay dilaan Yuusuf (37:18-20). Waxa ay aad uga nebanayeen isaga waxay ahayd inay riyoyinkiisa run noqdaan. Waxay rajaynayaan inay rajooyinkiisa burburiyaan. *‘Waan arki doonnaa waxyaalaha ka soo dhallan doona riyoyinkiisa,’* ayey yidhaahdeen (37:20).

Ruubeen wuxuu tallo ahaan u soo jeediyey inaanan halkaas isla markaas lagu dilin oo laakiin lagu dilo mid ka mid ah ceelasha ugu dheer si uu si tartiib ah u dhinto (37:21-22). Si qarsoodi ah ayuu u qorsheystay inuu badbaadiyo Yuusuf. Waxay ku dhaqaaqeen inay qorshooyinkooda oofiyaan (37:23-24) laakiin haddana waxaa dhacday arin lama filaan ah. Mar uu Ruubeen dhaween ayaa waxaa meesha soo mareen kuwa reer Ismaciil (oo haddana loogu yeedho reer midia sida ku dhigan 37:28, 36) ah oo beecsharaley ah oo ritiya xidhiidhsan wata. Waxay wateen alaab ay doonayeen inay kaga beec mustaraan Masar (37:25). Walaalihii waxay arkeen hab ay ku lacageystaan isla markaana iskiigana fogeyaan Yuusuf. Waxay Yuusuf kuwii safarka ahaa kaga iibiyeen addoon ahaan (37:26-28). Ruubeen ayaa soo noqday, wuxuuna fahmay wixii dhacay laakiin waxay ahayd mar ay mindhi uus ku tagtay oo wax badbaadada ah uu Yuusuf u tari lahaa ma jirin (37:29-30). Wax kale oo go’aan ah ma lahayn oo aan ka ahayn inuu walaalihiis kula heshiiyo go’aankooda. Waxay Yacquub ka dhaadhiciyeen inay dugaag duureyd cuneen Yuusuf (37:31-35).

Midda ugu yaabka badan ee dhacdadan ku saabsan ayaa waxay tahay Ilaah ayaa waxoo dhan hogaaminayey. Hadduu Yacquub maalintaas Yuusuf dirin lahayn, haddii ay walaalaha meel fog cidda ka joogi lahayn, haddii aanay beec mushtariyaashi safarka ahaa meesha mari lahayn, haddii uu Ruubeen iyaga ka maqnaan lahayn marka iida ah...sida ay dhacdooyinkan oo dhan iskuugu xidhiidhsanayeen dhamaan muhim ayey ahayeen si ay wax lama filaan ah u dhacaan. Laakiin Ilaah ayaa wax kasta hogaaminayey oo wakhtigiisa ugu habboonayd ayaa la gaadhay. Ilaah dhacdooyin ayuu noo diyaarinaya si aan tababar u helno, si aan iisu diyaarino mustaqbalkeena, si uu waddada ugu xaaqo boqortooyadiisa. Si degdeg ah oo la yaab leh ayey ku dhacayaan. Markaan waxyaalahan oo dhan dib u eegno waxaan arkayna inuu Ilaah ka

ka dhex muuqday wax kastoo dhacayey. Marxaladaha oo dhan aad bay la yaab u leeyihiin. Ilaah ayaa ka dambeya wax kastoo dhacayey.

Isla sidaas ayaa u taala qof kastoo Masiixi ah. Ilaaha weyn ee na uuntay qorshooyinka uu noo leeyahay, doonistiisa ayuu nagu tababaraya. Yuusuf waa nin dhallinyar ah oo habbooyin leh laakiin wuxuu u baahan yahay waxyaalaha dheraad ah intuusan u diyaa garoobin hawlaha loogu yeedhay. Qof adhi jir ah ma ahaan karo mid loo xilsaaro hawlaha maamulka ee uu Fircoon u baahan yahay in loo qabto. Qofkaasi waa inuu tababar dheraad ah hela si uu boqorka uga qanciyo hawl qabadkiisa. Tababarada qaarkood waa xaga dabiicadda qaarna waa xagga waxyaalaha aan la filanaynin ee xagga Ilaah nooga yimadaan. Laakiin tan ayaa ah midda hadda haysata Yuusuf. Waa mid xanuun badan laakiin waa mid ay dan muhim ah ku jirto. Ilaah xaqiiq ayuu u leeyahay wax alla wuxuu samaynayo. Qaybta ugu dambaysa ee sheekada Yuusuf waxaan ka arkayna inay Ilaah waxyaala waweyn mustaqbalka Yuusuf ugu dan leeyahay. *'Reer Ismaciil waxay isaga ka iibiyeen Motifa, kaa oo ah mid ahaa midiidinka Fircoon'* (37:36).

Cutubka 22aad

Sheekada Yahuudah

(Bilawgii 38:1-30)

Sida ay sheekada u bedelantay uga soo baxday tii Yacquub oo ay u soo gashay tan Yuusuf waa mid la yaab leh. Saa ay tahayna sabab ayaa jirta ee aan wax uga baranayno Yahuudah madaama uu mar dambe sheekada ka dhex muuqan doono.

Sheekaduna waa tan, Yahuudah wuxuu guursaday gabadh reer Kancaan ah wuxuuna ka dhalay saddex wiil (38:1-5). Dabadeedna midka wiilashiisa ugu weyna ayaa guursaday oo sidaas ayuu Yahuudah ku helay gabadh uu awaw u yahay, Timiro. Markay dhacday inay Timiro si lama filaan ah carmalad ku noqotay, dhaqanka wuxuu ahaa in ninka dhintay walaalkiis uu carmaladda la seexo si wiil loo raadiyo si ay qaybta ay reerka ku leedahay joogta u ahaato (38:6-8). Wiilka labaad wuxuu damcay inuu habbeen la seexo Timiro laakiin inaba ma uusan ku faraxsanayn inuu wiil ka uureysiyo iyada (38:9-10). Guurkan ay Laawiyiinta dhaqanka ka dhigteen dhibkiisu lahaa (ilaa maantadanna qayba adduunka ka tirsan ayaa looga dhaqmaa) laakiin waxay ahayd hab carmalad wiil looga dhalin lahaa si ay u ahaato mid reerka laga guursaday xaq ku leh. Ilaah aad buu uga xumaa sida Timiro loola dhaqmay; wiilka labaad ee iyada guursadayna wuu dhintay.

Wakhti xaadirkan la joogo Yahuudah, aabbaha wiilasha Timiro guursadeen, wuxuu go'aansaday inuu habka inantan loola dhaqmayo bedelo (38:11). In kastoo iska dhigayo inuu wiilkiisa saddexaad mustaqbalka iyada caawin doono, Yahuudah waxba kama uusan qaban marxaladdeeda iyadoo ah carmalad aan haysanin wiil iyada daafaca.

Wakhti dambe marxaladda Timiro kaddibna Yahuudah ayey naagta ka dhimatay. Yahuudah waxaa caddayd inuu ahaa nin lagu yaqaanay inuu gabadh alla tuu doono ka faa'ideysan doono. Timiro ayaa isku deyday inay ka faa'ideysato xaaladdiisa (38:12-

15) isla markaana waxay ku dadaashay inay wax caddayn ah ku haysato (38:16-19). Yahuudah ma uusan awoodin inuu gabadha si daacadnima ah ula balamo (38:20-23) arintana waxay noqotay mid aan sal lahayn. Laakiin saddex bilood kaddib markii la arkay Timiro oo uur leh dhabta ayaa soo baxday (38:24-26). Mudda kaddibna Timiro mataana ayey dhashay (38:27). Mataanada midkood in kastoo uusan ahayn kan ugu horeyey dhalashada, ayaa ku hor maray inuu gacantiisa kan kale ka soo hor mariyo oo ku dhegay xadhag uu ku helay xaqa uu ku noqonayo inuu yahay kana ugu horeyey (38:28-30). Mar kale, *'Kan ugu weyna ayaa u adeegay kan yar,'* Maxaa yeelay kan ugu horeyey ee gacantiisa banaanka u soo bixiyey ayaa ahaaday awowga dhasha Ciise (eeg Ruut 4:18; Matayos 1:3; Luukos 3:33).

Maxay tahay macnaha iyo casharka muhimka ah ee ka dhigay inay sheekadan ka tirsanaato buugga Bilawgii?

1. Waxay xoogga saraysa in qorshooyinka uu Ilaah Israa'iil u leeyahay ay dhamaan yihiin kuwa nimcada Ilaah ku yimid. Mar kastaba sheekada reerka Ibraahim ku saabsan dadka guul wadayaalka ah markii loo kaco xagga xidhiidhka ay Ilaah la leeyihiin, dhamaan waxay wada ahaayeen kuwa dembiilayaal ah isla sida ay dadka kale ee adduunka ku nool yihiin. Ibraahim wuxuu ahaa nin marar badan been sheegay marxaladaha cabsida leh uu maray darradood. Isxaaq waxaa ka tan badiyey damaca uu u qabay inuu cuno cunta midda ugu wanaagsanayd. Yacquub wuxuu ahaa mid madax adag oo weliba khiyaanalaw ah. Haddana waxaan arintooda halkan ku hayna laba iyo tobbanka walaalo ee ahaan doonaan awawayaasha laba iyo tobbanka qabiil ee Israa'iil. Laakiin waa muhim in xoogga la saaro oo laga hadlo in sheekooyinka Ilaah ee Baybalka ku jira aanay ahayn kuwa uu Ilaah ku fuliyey dad noloshooda oo dhan alla ka cabsasho ku noolaa. Halkan waxaan ka arkeyna laba iyo tobbanka awowo ee Israa'iil. Way ku faraxsan yihiin inay arkaan Yuusuf oo la dilayo in kastoo uu walaalkood yahay. Mid walaalahaan ka mid ah – Yahuudah wuxuu ahaa mid ay fikiraddiisa ka duwanayd tan walaalihiisa. Qorshaha Ilaah mar kastaba horey ayey u soconayan maxaa yeelay, Ilaah ayaa kuwa dembiilayaasha ah noloshooda bedelaya oo damiirkooda xaggiisa u soo celinaya. Ilaah weligiis dembiilayaasha kuma cadaabayo dembigood laakiin qalbiyadooda ayuu ka shaqaynaya si ay iisu gartaan xaggiisana u soo laabtaan.

2. Sheekada waxay sharaxaysa isbedelka ugu weyn ee ka dhex dhacay noloshaha Yahuudah. Waxay u egtahay inay dhacdadan isbedel weyn u keentay noloshaha Yahuudah. Markay dhacdadan dhacaysay, wuxuu ahaa nin lagu yaqaanay noloshiisa fasuuqa ah iyo weliba inuu ahaa nin aan naxariis iyo naxdin aan dadka u lahayn, wuxuu ahaa nin aan u naxariisanin walaalkiis Yuusuf iyo gabadha ay wiilashiisa guursadeen – Timiro. Markay si lama filaan ah ku uuraysatay wuxuu ku hadlay hal shey isagoo leh, *'Hala gubo iyada'* (38:4). Waxay ahayd Yahuudah kan keenay fikiradda ahayd in Yuusuf laga iibbiyo beec mushtariyaasha reer Ismaciil. *'Maxaa faa'ido ah ayaan ka heleyna haddii aan dilno walaalkeen?'* ayuu yidhi. *'Aan ka iibino reer Ismaciil...'* (37:26-27). Yuudas markuu go'aamadan gaarayey wuxuu ahaa mid naxariis la' oo baniaadmiga u daran.

Saa ay tahayna waxaan arkayna Yahuudah oo mudda gaaban bacdigeed aabbiihiis naxariis u baryaya (44:18-34). Wuxuu ahaaday sida Ciise maxaa yeelay, wuxuu diyaar u ahaa inuu qof kale dembigiisa xilka iska saaro si uu u silco meeshuu walaalkiis silci lahaa (14:33) oo isagu ayaa aad uga walbahaarsanaa xanuunka iyo dhibatooyinka soo gaadhay odaygan gaboobay ee Yacquub (44:34). Waa codsigiisa waxaa Yuusuf gaadhsiiyey heerka uu walbahaarka ka batay (45:1). Maxaa sababay

isbedelkan la yaabka leh ee ka dhex dhacay dabiicadda Yahuudah? Waxay ahayd dhacdadii ka dhacday Bilawgii 38aad.

3. Sheekada Yahuudah waxay nagu hogaaminaysa xulashada ah inuu Yahuudah yahay qabiilka Wiilka Daa'uud. Wakhti dambe markaan gaadhno qaybta buuga ee ka hadlayso waxyaalaha loo malaynaya inay dhici doonaan ee lagu tilmaamay wiilasha Yahuudah, waxaan fahmi doonaa inuu Yahuudah yahay kan loo doortay inuu leenka boqoraadda ahaado. In kastoo ay qabiilada Yahuudah oo dhan ku aasaasmeen nimcada Ilaah, saa ay tahayna waxaa jiraan kuwa si qaas ah loogu addeegsan doono waxyaalaha dhici doonaan. Ruubeen wuxuu barakooyinka ku wayey nafsaddiisa sharka lahayd (49:4), Simcoon iyo Laawi aad bay u gardarro badnayeen (49:5-7). Waxay ahayd wiilka afraad, Yahuudah kan la siiyey balanta sharafta iyo xidhiidhka dhabta ah (49:8-12). In kastoo ay nimcada Ilaah ay la yaab tahay ma ahan mid muhim ah inaan ka hadalno sababta uu Ilaah dadka ugu kala eexanayo, saa ay tahayna waa run oo Ilaah dadka wuu siiya hadiyado fursadaha qaaska ahna waxaa iska leh oo keliya dadka Ilaah daacadda u ah ee ka farxiyaan. Waxa halkan Ilaah ka farxiyey waxay ahayd ninkan naxariista darnaa oo hadda noqday mid dadka u naxariista. Marxaladda Yahuudah bedeshayna waxay ahayd sharaf darroda iyo ceebta ka soo gaadhay marxaladda uu galay heerka uu nolosha ka joogay. Waxay niyad dhis u tahay kuwa sameeyey wax uu Ilaah raali ka ahayn. Waxa sharafta darran ee aan Ilaah hortiisa ku samayno waxaa laga yaaba inay noqdaan kuwa dhismada nolosha boqortooyada Ilaah aan ku geleyno ka tirsan. Markuu Ilaah dooranayey hal qabiil oo reer Israa'iil ka tirsan inuu noqdo kan uu Ciise ku imanayo, ma uusan dooranin qabiilka kuwa uu ugu jeclaa, Yuusuf. Wuxuu doortay qabiilka Yahuudah! Waxaa Ilaah ka farxiyey dembiilaha demiyadiisa ka tobad keenay oo Ilaah u soo noqday. Yahuudahii naxariista darnaa wuxuu noqday ninka ugu naxariista badan.

Cutubka 23aad

Iisu diyaarinta Hawsha Ilaah

(Bilawgii 39:1-23)

Yuusuf waa la tababarayey. Noloshiisi sahlamayd ee reer Kuush oo ahayd midda uu aabbihiis ku noolaa si lama filaan ah ayey gunudkeeda ku gaadhay wuxuuna addoon ku ahaaday guriga Botifa. Way xanuun badnayd laakiin danta ayaa qasabtay maxaa yeelay, waxay ahayd qaybta tababarka uu Ilaah siinayey Yuusuf.

1. **Tababarka Ilaah waxaa isugu dhex jira xanuun iyo stareex.** Markuu Ilaah mudda na tababaro, waxaan dareemeyna inuu Ilaah cadaw nagu yahay. ‘Waa maxay sababta ay tan ku dheceyso?’ ayaan nidhaahnaa. Laakiin waxaa haddana noo caddanaysa inuu Ilaah si joogta ah noola jirayo. Ilaah wuu yaqana sida uu isugu dhex darayo xanuunka iyo stareexa. Yuusuf waa addoon guri ka adeegayo. Waxaa isaga lahaatay Botifa (39:1). Noloshiisi stareexa lahayd way dhamaatay oo mar dambe ma ahaan doonto. Saa ay tahayna Ilaah isaguu la jiray (39:2). Botifa caadi ayey u ahayd inuu helay nin shaqaala ah ee lamidka ah nimanka kale ee la addoonsado (39:3) oo durbaba hawlaha gurigiisa oo dhan ayuu u xilsaaray Yuusuf (39:4). Markuu Botifa si la yaab leh u hor maray (39:5), wuxuu Yuusuf u xilsaaray ku dhawaan wax alla wixii maal ahaa uu lahaa (39:6ba).

Waaya aragnimada uu Yuusuf helay waxay ahayd mid isku dhex jir ah. Marka ugu horeysa waxay ahayd xaalad aad u xanuun badan. Waa khasab inuu xaqdarroda walaalkiis dembaajisay inay ahayd mid nafsaddiisa aad u taabatay. Waxay u egthay inuu Ilaah isaga dafiray. Wuxuu riyadiisa ku arkay walaalihiis oo isaga u jilbajoogsanayaan, laakiin weli ma aanay u jilba joogsanin isaga ilaa hadda.

In kastoo ay ku labnayd silec, waxaa jirtay khiyaas uu nafsaddiisa kaga qancay. Yuusuf wuxuu ahaa maamuleh shaqadiisa ka soo baxaya oo dhacdooyinka uu xagga Ilaah kala kulmayana waxay isaga u tahay tababar dheraad ah.

2. Sharafta Yuusuf waa la tijaabiyey. Wuxuu ahaan nin aad u qurxsan (39:6ta). Naagta Botiifa waxay bilawday inay Yuusuf shukaansato (39:7). Wuu diiday inuu sineysto. Taasi waxay sharaf dhac u tahay Botiifa (39:8-9ba); xagga Ilaahna waa dembi (39:9ja).

Jarrabaaddan waxay ahayd midda ugu heerka saraysa. Wuxuu ahaa nin dhalinyar ah oo qaba dareemada ay dadka dhalinyarta ah leeyihiin. Aad buu ciddooda uga fogaa. Jarrabaadda waxay ahayd mid joogta ah (39:10). Maalin ayey naagta Botiifa xoogga saartay xod xodashada ay Yuusuf ku shukaansanaysay (39:11-12ba). Laakiin marxaladdan oo dhan gudaheeda Yuusuf wuxuu noqday qof dhabtii daahirsanaanta looga deyan karo markay imaato sida jarrabaadda layskiiga xajiyo. Wuxuu yidhi 'maya' (39:8); wuu dhiibtay sababta ku qasabtay inuu 'maya' yidhaahdo (39:8-9). Fikiraddiisa ma uusan bedelin in kastoo marxaladda ku hareersanayd ay ahayd mid sare (39:10). Isagu ma ogolanayo inuu is geeyo meel uu kala kulmayo jarrabaad ('*Ma uusan dhegeysanin*') amaba ma dhageysan doono '*inuu iyada la seexdo*'). Ugu dambaysta wuu ka cararay iyada markuu arkay inay xaaladda ka sii darnaanayso (39:11-13).

3. Waxaa lagu tijaabiyey xaqdarroda ugu sareysay. Waxaa loo malayn kara in isla marka uu Yuusuf jarrabaaddan ka guulaysto amaalin marin ka heli doono Ilaah, laakiin is af garasho waaga halkaa kuma idlaanin, heer ka sii xun ayey gaadhay. Diidmada uu Yuusuf diiday inuu iyada la seexdo waxay keentay nacayb heer sare ah. Marka ugu horeysay isagay rabtay ina ka sinaysato; dabadeedna way nacday isaga. Waxay u yeedhay nimanka guriga ka dhex shaqaynayeen (39:14) waxayna bilawday inay ninkeeda eedeysa. Markay saa yeeleyso waxay tusinaysa inaysa xidhiidh wanaagsan la lahayn ninkeeda (39:15). La yaab male taasi ayay ahaan karta sababta ay u rabtay inay Yuusuf sariirta kula istareexo. Waxay bilawday inay marxaladda uga war bixiso habkeeda khiyaanada leh (39:16-19) iyadoo Yuusuf xumaati oo dhan ku nabaysa oo waxay ka dhigtay inay ahayd Yuusuf kan shukaansaday oo si kastay dhoobo u marisay magaciisa. Taasi waxay muujinaysa sida aanay wax jacayl ah u qabin Yuusuf, in kastoo ay soo dhaweysay.

Yuusuf waa khasab inuu dareemay xanuunka sida daran ee loola dhaqmay. Wuxuu tusiyey sharafta heerka ugu sareysa xagga Ilaah iyo xagga sayidkiisaba. Laakiin hadiyadda uu helay oo dhan waxay ahayd af lagaado. Wuxuu ku jira xaalad uusan isku difaaci karin. Caddeynta ayaa isaga ka soo hor jeedda. Naagta waxay gacanta ku haysa khamiiskiisa ay ka siibtay markuu iyada ka cararayey. Isagu ma jirto hab uu ku caddayn karo wax alla wuxuu ka sheegi lahaa sida ay wax u dheceen. Aad bay isaga ugu adagtahay inuu is difaaco.

In kastoo ay hab cajiib ah tahay tan nafteeda waa qayb ka tirsan waxyaalaha Yuusuf lagu tababarayey. Qof kastoo doonaya inuu Ilaah daacad u ahaado wax wanaag ah ee ay adduunyada ka sheegeysa ma leh, oo isagu ama iyadu waa inay waxyaala badan oo kutiri kuteen ah laga sheegaa sheeko kastoo ku saabsan qofkaasi. Marka ugu horeysa uu qofka nolosha bilaabay waa inuu barto sida loola macaamiltamo waxyaalaha eedeynta ah. Yuusuf wax uu samayn karo ma jirto.

Naagta Botiifa way sheegtay dhacdada waxayna u sheegtay isla sida iyada ay rabtay in wax loo fahmo, Botiifana aad buu uga xanaaqay waxa ay naagtiisa u sheegtay uu sameeyey Yuusuf (39:19). Waxaa dhici karta inuusan boqolkiiba boqol rumaysanin naagtiisa maxaa yeelay, Yuusuf lama dilin, sida dhaqanka uu ahaa in qof saa sameeyey isla markaasba la dilayo. Bedelkeeda waxaa isaga lagu fadhiisay qaybta guriga ee ugu heerka saraysay ee ay Fircoon iyo marti sharaftiisa fadhiistaan (39:20).

Ilaah wuu yaqaan sida layskuugu dhex daro dhibatooyinka iyo istareexa. Waa qorshaha Ilaah inuu ogolaado inaan dhibatooyin kala kulano nolosha. Ma jaclaysanayno silica laakiin waan u baahannahay. *Annagu...waan ku faraxnaa dhibatooyinka, annagoo og inay dhibatooyinka keenaan dulqaad...* (Rooma 5:3). Way inoo habboontahay in nala tababaro nalana hoosaysiyo iyadoo waddada Ilaah nagula toosinayo. Saa ay tahayna Ilaah wuu og yahay sida uu dhibatooyinka noogu cabidhayo si aanay u ahaanin kuwa na burburinayaan. Isla sida uu naxariis uga helay guriga Botiifa, isla sidaas ayuu hadda Ilaah naxariis uga helay markuu ku jiray xabiska Fircoon (39:21). Isla wixii guriga Botiifa ka dhacay ayaa haddana ka dhacay xabsiga Fircoon. Yuusuf durbaba waxaa laga dhigay maamulaha sare ee xabsiga oo dhan. Maamulidda dadka xabisan waxay ahayd mid ka dhib badan maamulidda hawlaha hawlaha maalka Botiifa. Tababarkan waa mid marxaladiisa ay tii hore la mid tahay; Yuusuf wuxuu ahaa maamule. Laakiin tababarkan waa ka culusyahay kii hore. Ilaah wuxuu isaga u diyaarinayey maalin uu xukumi doono dhulka Masar oo dhan (41:41).

Ilaah wuxuu Yuusuf u tababarayey hawl uu u dhiibi doono. Qof kastoo Masiixi ah wuxuu leeyahay hawl uu Ilaah u qabanayo waana inaan rajayno inuu Ilaah hawsheena kor meydh ku samayo si aan tababar u helno si aan u ogolaano inuu Ilaah sida uu doono hawshiisa noogu fushado. Inta badan tababarkan wuxuu ku imanaya marxalad aad u dhib badan. Saa ay tahayna marxaladdaasi wuxuu naga dhigaya kuwa ka qayb qaata, waxaan fahmayna inaan waayaragnimo ku heleyno wuxuu noogu talagalay inaan Isaga ugu shaqayno intaan noolnahay. Sida ay hawsha u balaaran tahay ayuu tababarkana u weynahay.

Cutubka 24aad

Barbaarista Hadiyadda

(Bilawgii 40:1-41:13)

Ka bilaabato dhallinyaronimadiisa Yacquub wuu ogaa inuu karti leeyahay. Wuxuu awooday inuu helo uu weliba macnayno riyoooyinka kuwaa oo boqortooyada Ilaah wax looga hawl gelinayey. Wuxuu ogaaday inay waalidkiisa iyo walaalihis ay gaadhi doonaan heer ay ahaan doonaan kuwa isaga taagero ka doonta. Riyoooyinkiisa ayaa markuu Kancaan ku soo laabtay ka dhigeen inuu ahaado nin is huba oo mustaqbalkiisa ahaan doono mid heer sare ka joogi doono jagooyinka.

Ilaah fursad ayuu siiyey Yuusuf si uu u lahaado wakhti u la qabsado noloshiisa cusub. Markuu Ilaah na siinayo waddada aan nolosha cusub ku raaci lahayn inta badan waxaan dareemeyna inay tahay arin aad u xanuun badan. Badanaanan waxaan ku fikirnaa inaan nolosheeni hore dib ugu laabano. Waxaana dhici karta inaan habbeen iyo dharaar duceysanayno si uu Ilaah meesha uu naga soo waday noogu celiyo. Hadduu Yuusuf aaminsanaa ducada – isla sida uu yeelay – waa inuu habbeen iyo maalinba duceysanayey oo Ilaah ka codsanayey inuu isaga dibu ugu celiyo Kancaan.

Marka ugu horeysay ee aan Yuusuf la kulmaynay wuxuu ahaa 17 jir (37:2). Wuxuu ahaa 30 jir marka uu Fircoon u qaadayey xilka maamulka (eeg 41:46). Haddii laysku daro muddada uu joogay guriga Botiifa iyo iyo tan uu ku jiray xabsiga Fircoon waxay isku dhantahay ilaa iyo laba iyo tobban sanno. Laga yaaba haddii aan isku deyo inaan khiyaaso wuxuu meesha Botiifa joogay ilaa iyo lix sano Xabsiga Fircoonna wuxuu joogay ilaa iyo lix sano oo dheraad ah.

Hadiyadda Ilaah oo la ficil gelinayo. Yuusuf xabiskuu ku jiray markii laba kale oo dembiilayaal ah lagu soo riday xabsiga. Ninka miiska Fircoon maamulayey ee cabitaanka siinayey iyo weliba kan burka dubi jiray way dembaabeen oo iyaguna

xabsigaa lagu riday (40:1-4). Labadooduba way riyoodeen Yuusufna wuu fahmay (40:5-8ba). Yuusuf karti ayuu leeyahay riyooyinka lagu fasiro. Isla markiiba wuxuu ogaaday inuu labada riyoba uu fasiri karo. *‘Miyaadan ogayn in fasiraaddu Ilaah iska leeyahay?’* ayuu weydiyey (40:8ta).

Yuusuf dhibatooyin iyo welwel badan ayuu mudda dheer ku jiray laakiin muddadan oo dhan kartida uu lahaa ma lumen. Ma uusan luminin kartida riyooyinka ee uu lahaa markuu 17 jir ahaa. Hadda wuxuu heystan fursad uu ku hawl geliyo kartidaas uu Ilaah ka helay. Ma ahan inuu ahaan doono mid aad caan u ah ama aad loogu mahad celin doono. Isagu waa uun maamule ka hawl hayo xabsiga. Laakiin waxay isaga siinaysa fursadda ah inuu ogaado kartida uu Ilaah ka helay inaysan lumin ama aan laga ceshanin.

Xaqiiq ayuu u leeyahay waxyaalaha ku saabsan kartidiisa. Inaba kama shaki qabo inuu fasiri karo riyooyinkan. Qofka kartida leh aad buu qof kale uga fahansan yahay kartidiisa! Qofka wacdiyaha ah wuu hubaa inuu wacdinta awoodo. Kuwa heesana way hubaan inay heesi karaan. Dadka leh kartida bogsiintana way hubaan inay markay duceyaan ay bogsiin imaan doonto. Hadiyadaha Ilaah ma qarsomaan oo way is muujinayan. Awood kastoo Ilaahiyan ah waa mid Ruuxa Qoduska ah ee Ilaah ku timaado (1 Korintos 12:7). Maraha qaarkood waxaan is weydina *‘sidee baan ku garan kara hibadayda?’* Tani ma ahan su’aal ay tahay inay aad maskaxda nooga qabsato. Hadiyadda Ilaah waa mid muuqata. Dhibka keliya ee jira waxay tahay qofka hibadaas la siiyey ayaa u malayn kara in wuxuu samayn lahaa ay cid walba samayn karto. Wacdiyaha wuxuu u malaynaya inay hibada wacdinta tahay tu uu qof kasta samayn karo! Qofka la siiyey hibada soo dhaweynta dadka wuxuu umalaynaya inay cid walba hibadaas leedahay. Hibada waa wax qaas ku ah qofka la siiyey. Yuusuf wuu hubaa inuu riyadan fasiri karo. Haddaba macnayn farxad leh ayuu kii boqorka cabitaanka siinayey ka siiyey riyada uu riyooday (49:9-13).

Hababka uu Ilaah nagu amro inaan ku dhaqano waa kuwa aan laga leexan karin. Markuu Ilaah nolosheena ka shaqaynayo si uu noo tababaro, si uu noo dhigo meesha uu naga doonayo inaan joogno, hababkiisa waa kuwa aan inaba laga jeesan karin. Waan isku deyi karnaa inaan leexino ama aan bedelno doonistiisa laakiin waxaan fahmayna inay tahay arin aad u adag in doonista Ilaah la leexiyo waayo, dhacdooyinka uu qorsheeyey sida uu u qorsheeyey ayey ahaan doonaan. Markuu Ilaah bayaan nooga dhigo wuxuu nala rabo waxaan fahmayno inuu dadaalkeena oo dhan ee aan isku badbaadinayno uu yahay mid aan midho dhalin doonin. Yuusuf wuxuu xaqiiq u leeyahay inuu kan boqorka cabitaanka siinayey uu xor ahaan doono, haddaba fursaddaas ayuu ka faa’idaysanayey oo wuxuu rabbay inuu xabsiga iska saaro (40:14). Wuxuu isku deyi inuu qof dhibatooyinkiisa u sheegto si uu naxariis uu xabsiga kaga baxo u helo (*‘Markay wax kuu hagagaan I soo xusuuso...’*). Wuxuu isku deyaya inuu cabashadiisa gaarsiyo dadka ugu jagada sareya (*‘Fadlan mid uun iigu naxariiso, Fircoon hortiisa igu soo hadal qaad’*). Wuxuu isku deyey inuu naxariis raadsado (*‘Waa lay af duubay...’*). Wuxuuna isku deyaya inuu iin la’aantiisa u bandhigo cid kastoo ka dhageysanayso (*‘Ma jirto wax dembi ah aan galay oo aan ku istaahilo inaan xabsigan ku jiro...’*). Laakiin waxyaalahan uu sheegtay oo dhan ma jirto mid u midha dhali doonto. Ilaah ma ogolaan doono inuu Yuusuf iska xoreeyo tababar uu Ilaah ugu talagalay inuu wax ka barto. Qorshooyinka Ilaah horey ayey u soconayaan lagamana hor tegi karo waxayna ku yimadaan wakhtiga dhabta ah.

Ninkii riyada loo fasiray wuxuu hadda haysta caddeyn ku saabsan hibada uu Yuusuf leeyahay. Maxaa yeelay, ninkii kale ee boqorka burka u dubayeyna fasiraadda uu

riyadiisa u helay waxay ahayd mid aad u fool xun ama uusan ku farxaynin (40:16-19) oo durbaba labadooduba riyoooyinkooda isla sida loogu fasiray ayey noqotay (40:20-22). Saa ay tahayna hababka uu tijaabiyey oo dhan ma jirto mid midho dhashay. Ilaah si layaab leh oo aan ka hor imaad lahayn ayuu hawshiisa horey ugu wada oo Yuusufna wuxuu isku deyaya inuu xor ahaado ka hore intuuusan wakhtiga uu Ilaah qorsheeyey aan la gaadhin wuuna ku guuleysan waayey. Ninka uu farriinta ugu dhiibtay ee boqorka cabitaanka siinayey wuu ilawbay farriintii (40:23). Yuusuf xabsiga ayuu ku haray ilaa iyo laba sanno oo dheraad ah (41:1).

'Badbaadada waxay ka timadda xagga Rabbiga' (Sida uu Yoonis u sharaxayo, eeg Yoonis 3:9). Markuu Ilaah dabiicadaheena ka shaqaynayo si uu mustaqbalkeena u hagaajiyo, wuxuu ku ficiltamaya sida ugu wanaagsan uguna awoodda badan. Si sahlan ayuu meeshuu rabbo nagu marinaya laakiin haddii aan awooddeena iyo garadkeena iskugu deyno inaan iska leexino wuxuu Ilaah nala rabbo innaba kuma guuleysanayno. Si taxan ayey habka uu Ilaah rabbo iyo dhinaca uu rabbo ugu soconayaan mana jiraan wax bedeli karo sida ay dhacdooyinkaas u taxan yihiin. Sida aan uga baxsan karno edbinta Ilaah waa uun markuu Isaga nagu toosiyo habka aan kaga baxsan lahayn. Ilaa uu Isagu ficiltamana, waxaan ku jireyna mar kastaba diyaarintiisa la yaabka leh.

Hibada oo la fahmo waxay tahay. Hibada iyadaa is cadaynaysa. Ma ahan inaan annaga wax sharaxaad ah ku sheegno. Haddii ay waxa aan umalaynayno inay tahay hadiyad xagga Ilaah nooga timid, waa la fahmi doonaa. Fircoon wuu riyooday (41:1-7); ma jirin qof macnayn lahaa (41:8). Laakiin ninka koobka boqorka hayey ee hadda ka hore ay Yuusuf xabsiga iskula jireen oo riyo loo fasiray ayaa soo xusuustay Yuusuf (41:9-13). Awoodda Yuusuf waxay ahayd mid uu koob haya inaba ka shaki qabin. Yuusuf inaba ma doonaynin inuu Koob hayaha u sharaxo inuu leeyahay hibada riyoooyinka lagu fasiro. Awooddaasi waxay ku muuqatay hab iska cad oo caadi ah. Waa tan habka ay hibada uu qofka leeyahay u egtahay. Iyada ayaa iisu hadlaysa.

Cutubka 25aad

Ka maqlidda Ilaah

(Bilawgii 41:14-36)

Fircoon muujin ayuu ka helay xagga Ilaah saa ay tahayna ma uusan fahmin muujinta uu helay.

Wakhtigii tababark iyo silica isla sida uu il biriqsi ku bilawday ayuu haddana il biriqsi ku dhamaaday. Isla sida uu Ilaah edbintiisa nagu edbiyo isagoon nagala tashanin, isla sidaas ayey dhamaadka edbintaasna ku yimada Isagoo aanan nagala tashanin. Sanada badan ka hore intuusan Yuusuf ku dhex dhimbanin silica uu si lama filaan ah isagoo ciddooda ka fog taa oo isaga ka dhigtay inuu ku fikiro inuusan mar dambe cidda ku laaban doonin ilaa dhimashada aabbihiis. Isla sidaas ayuu si lama filaan ah silacaas ku dhamaaday. Yuusuf wuxuu ku jira xabsi. Wax rajo ah oo xornima ahna ma uusan arkin ilaa iyo laba sanadood. Mudda dheer wax uu qaban lahaa ma jirin oo aan ka ahayn inuu duceysto. Wuu jeclaan lahaa inuu ka fakado xabsiga laakiin wuxuu fahmay inay xornimadu weligeed imaan doonin.

Durbaba *'Fircoon wuxuu amray in si degdeg ah Yuusuf loogu keeno oo si dhaqso ah ayey xabsiga uga soo bixiyeen oo ay Yuusuf Fircoon hor keneen'* (41:14). Haddaba iridda ayaa la garaacay. 'Yuusuf!' Ilaah ayaa farriin Fircoon ku socota Yuusuf u soo mariyey. Waxyaala badan ayaan ka baranayna dhacdada oo ku saabsan sida uu Ilaah noola xidhiidho.

1. Ilaah wuxuu Yuusuf u istecmaalay inuu doonistiisa ku muujiyo kaddib markuu is hoosaysiyo. Yuusuf wuu ka soo tegay madax adeegnimadii uu yaraantiisa lahaa. Fircoon ayaa isaga ku yidhi, *'Waxaan maqlay inaad awood u leedahay macnaynta riyoooyinka'* (41:15). Yuusufna wuxuu ku jawaabay, *'Ma ahan aniga kan macnaynayo. Ilaah ayaa Fircoon siini doono jawaabta ku habboon riyoooyinkiisa'* (41:16). Bal ka fikir Yuusuf oo nin dhallin yar ah ayaa jawaab ceenkan ah ay ka soo

baday e. Qof dhallin yar ah oo 17 jir ah wuu isla weynaan lahaa oo ku kibri lahaa hibadiisa. Laakiin hadda waxyaalahaas oo dhan kama aragno nolosha Yuusuf. Yuusuf wuxuu mudda dheer ku qasbanaaday inuu ogolaado in dhacdooyinkan oo dha ay ku saabsan yihiin noloshiisa iyo xidhiidhka uu la leeyahay Ilaah. Noloshiisa, hadiyaddiisa, waxa isaga ku dhici doono – wax kastaba gacanta Ilaah ayey ku jiraan. Hadda wuxuu ku hadlaya deganaan laakiin dhabta arinta ayuu ku hadlaya. ‘Ma ahan aniga; waa Ilaah’. Wuxuu diyaar u yahay in loo istecmaalo sida qalab lagu muujinaya muujinta loogu talagalay Fircoon.

2. Ilaah tallaabooyin kala duwan ayuu wakhtiya kala duwan ku dhaqaaqaya. Isla sidaas ayey u ahayd Fircoon. Marka ugu horeysa wuxuu helay riyo, laakiin wax dheeraad ah ayuu u baahnaa. Ilaah wuxuu rabbay inuu Fircoon raad qaado riyadaasi si uu u fahmo waxyaalaha uu Ilaah noloshiisa kaga dan leeyahay. Fircoon wuxuu sheegay riyadiisa. Wuxuu ag joogay webbiga Nayl oo wuxuu arkay marka ugu horeysa toddoba neef oo lo’ ah oo burbuuran marka labaadna wuxuu arkay toddoba neef oo lo’ ah oo caateysan (41:17-21). Riyada labaadna wuxuu ku arkay toddoba ‘dhegood’ oo ay engejisay dabeesha kulul ee ka imaanaysay dhinaca lama degaanka (41:24ba). Fircoon wuxuu riyada uu ku riyooday u sheegay sixiroolayaasha aan Yahuudda ahayn laakiin way awoodi wayeen inay riyadaas macnayaan (41:24ta).

Markuu baahidiisa ogaaday kaddib wuxuu dareensan yahay inuu u baahan yahay macnayn dheraad ah. Ilaah ayaa isaga kula hadlaya tallaabooyin ilaa haddana weli ma fahansano wuxuu Ilaah ku hadlayo. Tan ayaa isaga ku qasabtay inuu u yeedho Yuusuf.

3. Ugu dambaystii muujintii Ilaah waxay ku imanaysa si cad oo qalbi dhis leh. Yuusuf wuu isku kalsoonyahay oo wuxuu ku hadlaya habsiinyo. Markuu qofka hiba leeyahay ama uu muujin ka helo Ilaah, mar kasta waxaa jirta caddayn kuugu dhiiri gelinaysa inaad ka niyad jebin ku ficiltanka hibadaada. Qofka hibada iska leh ayaa dhiiranaan ku istecmaalaya kan loogu talagalay inuu farriin ku helana wuu fahmaya in farriinta uu qofka hibada leh ka helay tahay mid camfacaad leh.

Yuusuf wuu og yahay inay labada riyooyinba ay isku macna leeyihiin (41:25). Waa Ilaah kan amraya waxyaalaha Ilaahiyanka ah waana Isaga kan diyaar u ah inuu ficilqaado (41:26). Waxaa jiri doonaan toddoba sanno oo dhereg ah iyo toddoba sano oo abaar ah (41:27-31). Madaama muujintan marka labaad lagu celiyey waxay caddaynaysa inay dhacdadan durbaba si dhaqso ah ku dhici doonto (41:32).

4. Muujinta Ilaah waxaa lagu bixiyaa dan ficilgal leh. Yuusuf wuxuu sameeyey wax ka weyn macnaynta riyooyinka. Wuxuu bixiyey faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan waxa dhici doona iyo sida loola macaamilmi doono. Waa in maamuleh hiba leh loo dhiibo maamulkan cusub (41:33). Waa inuu ahaado mid karti leh xigmadna leh maxaa yeelay, waxaa loo baahan yahay sanca maamul iyo cilmiga wax kala habaynta. Waa inuu ahaado mid awooda inuu wisaaradda beeraha ee wadanka Masary kala maamulo wakhtigaas oo dhan markay dhereg jirto iyo markay abaarta imaan doontaba. Waa uun qof karti leh kan awooda inuu maamulo isbedelka dhici doona toddobada sanno ee ugu horeysa kaddib. Oo weliba waxaa toddobada sanno dambe ee ay abaarta jiri doonta xamili kara nin karti iyo garad leh. Maamulahan waa inuu ahaado mid ku waajiban Fircoon naftiisa waana inuu ahaado qof uu Fircoon aamini karo (41:34). Maamulahan waa inuu ahaanin mid faasuq ku dhaqma. Waa inuu boqolkiiba labaat cashuur ah ka gooyo misingada la beer goyn doono toddobada sanno ee ay dheregta jirto (41:35). Misingada waa in maqsiinada lagu aruuriyo

waxayna fududeyn doontaa qaybinta cuntadaasi waaya dambe ee ay abaarta jiri doonto (41:36).

Erayga Ilaah waa sidaa; waa ficilgal. Masixiinta hadda jiraan waxay u baahan yihiin inay codka Ilaah dhageystaan. Muujinta uu Yuusuf helay iyo tan uu dadka kale ku faa'ideyeyba ma ahan uu sheeko qoraal laga dhigay. Waxaa su'aal ahaan loo soo jeedin kara, 'Hadda madaama aan Baybalka haysanno miyaan weli u baahannahay inaan helno muujinta sida tan uu Yuusuf helay?' Su'aashan waxaa loogu jawaabi kara: Baybalka waa inaan loo akhrinin sida muujin **qabooban**. Waa in loo qaato inuu yahay Erayga nool ee Ilaah. Waa inaan farriinta Ilaah Eraygiisa ka helna isla sida degdegta ah uu Yuusuf ugu baahnaa inuu sida ugu degdegta badan badbaado u helo iyo markuu Ilaah isaga u muujinayey macnaynta lagu macnaynayey riyadii Fircoon. Fircoon markuu riyoooyinka ku riyooday weli wuxuu u baahnaa faahfaahin dheraad ah. Sida Erayga Ilaah loo akhriyana waa isla sidaa. Markaan Erayga Ilaah ee aan qoraalka ku haysano gacanta noogu jiro waxaan u baahannahay 'Yuusuf'; waxaan u baahannahay qof noo fasira qoraalka Baybalka. Qofka wax fasiraya wuxuu ahaan karaya mid ku jira marxalad kale oo ka duwan tan aan ku jirno isla sida ay u ahayd Bohonkii Itoobiyaanka ahaa sida aan uga akhrinayno Faalimaha Rasuullada 8:31 ee u baahnaa inuu helo qof u fasira qoraalka uu akhrinayey. Saa ha ahaatee, ugu dambaystii 'Yuusufkii' fasiraadda bixin lahaa wuxuu ahaaday Ruuxa Qoduuska ah.

Cutubka 26aad

Xukun Buuxa

(Bilawgii 41:37-57)

5. Erayga Ilaah qumaati ayaa loo fahmay. Aad bay u wanaagsan tahay markuu Ilaah ku hadlayo dhiirinaan iyo awood dhan. Fircoon durbaba wuxuu fahmay wuxuu Yuusuf ku hadlayo inay tahay mid xagga Ilaah ka timid. *'Wax kastaba way ku roonayeen Fircoon hortiiisa iyo shaqaalaha Fircoon oo dhannba hortooda'* (41:37). Fircoonna wuxuu fahmay in siba halkaa uu ka muuqday *'Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah'* kaa oo ahaa inuu Yuusuf ka dhex shaqaynayey (41:38).

Markuu Erayga Ilaah awood sare ku yimaado isagaa is caddeynaya. Erayga wuxuu wata awooddiisa uu qofka ku xukumayo. Markuu Ruuxa Ilaah awooddiisa oo dhan ku shaqaynayo, ma jiro qof su'aali karo inuu kaasi yahay Erayga Ilaah. Erayga awood sare ayuu ku yimadaa oo laguma wareerayo kan uu yahay! Bawlos wuxuu yidhi injiilkiisa wuxuu ku yimid hubaal oo dhan (1 Tesaloniika 1:5). Waxaa la soo jeedin karaya su'aasha ah haddaba yaa awood lahaa ma Bawlos baa mise kuwa farriinta Bawlos ku timid dhageysanayaan? Dhamaantood! Markuu Erayga Ilaah ku yimaado awoodda buuxda ee Ilaah xataa qofka loo dhiibay wuxuu ku hadlaya dhiirinaan buuxda kuwa dhagaysanayuna waxay lahaanayaan kalsooni ah warka ay maqlayaan wuxuu uga yimid xagga Ilaah.

6. Habka uu Erayga Ilaah ku yimid wuxuu noqday mid heer sare ah oo muhim ah. Kaddib markuu sanada badan silcay, Yuusuf wuxuu ahaaday mid la saraysiyey isagoo aan isla weynaanin. Hibada uu Ilaah na siiyo way is bandhigtaa. Markay Kiniisadda sida looga baahan yahay ay ku shaqaynayso hibada uu Ilaah siiyey waa laga aqoonsan doonaa wax tarkeeda. Qof kastoo Masiixi ah halna ha ahaate wuu leeyahay hibada Ruuxa Qoduuska ah, mid kastoo Masiixi ah wuu leeyahay hawl uu Ilaah uga xilsaaray Kiniisadda Ciise Masiix. Hadiyaddeena ayaa nagu hogaaminaysa

dooqa aan ka ciyaari lahayn Kiniisadda Ilaah. Waa mid aad u wanaagsan markaan joogno meesha uu Ilaah noogu talagalay inaan joogno iyo weliba inaan samayno wuxuu Ilaah noo xilsaaray. Uma baahno haba yaraate ee wax bunbuunin ah. Hababka uu Yuusuf tijaabiyey inuu isiga xoreysiyo xabsiga Fircoon wax midho ah ma dhalin. Ugu dambaystii markuu diyaar ahaana ma jirin wax khiyaano ah ama awood baniaadmi ah uu xor ku ahaaday. Habka ugu deganaanshaha weynayd iyo weliba isagoo aan wax dadaal ah awooddiisa ku samaynin ayuu isla markiiba ku helay jagada ugu saraysay ee loo soo tababarayey. Fircoon wuxuu fahmay inuu Ilaah muujinayo mustaqbalka Yuusuf (41:39); Wuxuu fahmay inuu u qalmay shagada maamulka wisaaradda ee ay Masar u baahnayd ((41:39) durbaba wuxuu isaga siiyey awood sare (41:40-41). Waxaa isaga la siiyey calaamad lagu garanayo awooddiisa taas oo ahayd faraanti (41:42). Waxaa la siiyey dhar sharaftiisa kordhinaya, iyo kul uu luqunta gashtay taasi oo micnaheedu ahaa inuu ahaa nin muhim ah. Sanada badan hadda ka hore marka ugu horeysay uu tababarka ugu horeyey Ilaah ka helayay wuu qiima belay Yuusuf waxaana ka lumay dharka gacmaha dheraa uu xidhnaa. Hadda wuxuu gaadhay heer qiimahiisa loo soo celiyo dhar sharaf lehna loo xidho.

Hadda wuxuu xor u yahay inuu awood ku amar bixiyo (41:43). (Amar oo dhan isagaa gacanta loo geliyey oo wax la samayn lahaa uu isaga ansixin ma jirin. Tani waxay ahayd sida heerka uu hadda Ciise ka joogo wax bariddeena. Ciise ayaa ah boqorka adduunka oo dhan oo wax kastoo uu Ilaah samaynayo wuxuu ku samaynaya Wiilkiisa. Markuu Ilaah na sharfayo waxaan Ciise la qaybsanayna sharafta isaga la siiyey, oo Isagaan la shaqaynayna kana hoos shaqaynayna. Tani ma ahan awoodaha adduunka laga yaqaano. Waa xaalad ku sugan xukumaadda jacaylka iyo qalbiga naxariista leh ka imaanayso. Yuusuf wuxuu Masar u xukumay inuu waddankaas barako u ahaado iyo inuu ahaado sida aabbo ama adhijir dadka xanaanayo.

Yuusuf waxaa lagu waqlalay magac ka mid ah magacda reer Masar (41:45). Wuxuuna guursaday gabadh uu dhallay nin wadaaddada Masar ka mid ah taasina waxay isaga u kordhisay sharafta iyo soo dhaweynta uu Masriyiinta ka helay (41:45). Waxaa loo dhiibay shaqo uu qabto taasoo isaga u rusqeysay inuu waddanka afartiisa gees gaadho (41:45ta-46).

7. Erayga Ilaah eek u yimid Yuusuf waxaa ku jirtay farriin tilmaamaysa wax imaan doonaa taasina waxaa lagu xaqiijiyey sida ay wixii la sii sheegay run ku ahaadeen oo rumaysay in Eraygaasi runtii xagga Ilaah ka yimid. Haddii aanay jiri lahayn toddoba sano oo dhereg ah iyo toddoba sano oo baahi ah, erayga Ilaah ee Yuusuf ku yimid wuxuu ahaan lahaan mid laga shakiyo. Markuu Erayga Ilaah wato farriin sii sheegid ah, aad bay muhim u tahay in wixii la sii sheegay ay ficil galaan. Sida uu Yuusuf yidhayba, waxaa jireen toddoba sano oo dhereg ah oo Yuusuf wuu sii dabagalay erayga uu Ilaah ka helay (41:47-49).

Ilaah wuu oofiya balantiisa. Haddii ay tahay muujin yar uu Ilaah naga tusinaya mustaqbalkeena iyo haddii ay tahay wax aad u weyn uu naga tusinayo mustaqbalkeen ee aan ka akhrinayno Kitaabka, dhamaan Ilaah wuu oofin doonaa. Wakhtigan gudahiisa Yuusuf wuxuu dhallay laba wiil, Manaaseh ('Kan sababa xaaladda wax lagu ilawbo') oo ahaa curudkiisa, iyo Efreem ('Kan wuxuu sameeyaba ku liibaana') oo ahaa curud ku xigeenkiisa. Ilaah wuu ugu abaal mariyey Yuusuf sanadaha badan uu silica soo maray abaalmarintaasi uu ku soo dhaweyey farxad iyo liibaan (41:50-52).

Toddobada sano ee baahidana, waxay sii xaqiiqaysay inuu Erayga Ilaah been ahayn (41:53-57).

8. Aaminimada Yuusuf aaminka ku ahaa Erayga Ilaah waxay u keentay natiijooyin ay baraka ka buuxdo. Yuusuf si daacadnima ah ayuu ula dhaqmay Fircoon. Isla sida uu ninkii bur dubaha ahaa daaca ugu ahaa oo fasiraadda dhabta ah uga siiyey riyadiisa, isla sidaa ayuu si run ah ugu fasiray riyoooyinka Fircoon. Aaaminimadiisa waa loogu abaal mariyey. Wuxuu helay jago, awood, reer, farxada isaga ilawsinaysa xaaladaha murugada badnaa uu horey u soo maray, liibaanid isaga siisay qalbi degan iyo qancid. Abaarta waxay ahayd mid adduunka oo dhan wada saamaysay. Dhacdooyinkaas dheceen waxay wadda u furayeen sida uu Yuusuf xidhiid ula lahaan lahaa Kancaan. Hawsha uu Ilaah ugu adeegayo waa mid wada saamaynaysa quruumaha adduunka oo dhan. Wakhti xaadhirkaas la joogay Yuusuf wax rajo ah uma lahayn inuu mar dambe arki doono Yacquub ama walaalihiisa. Noloshiisa cusub ayaa ka dhigtay inuu ku ilawbo *‘waxyaalaha guriga aabbihiis ku saabsan oo dhan’* (41:51). Laakiin qayb ka tirsan abaal marintiisa waxay ku xidhnayd qorshaha Ilaah oo wada saamaynayo faca Yacquub oo dhan. Waxaa dhici karta Yuusuf inuu la yaabana in xidhiidhkiisa iyo Yacquub iyo walaalihiisa isaga si xun u galeen uu yahay mid kama dambays ah oo ay weligood is arki doonin. Waxaa ka soo wareegtay sanado badan ka bacdi markuu walaalihiis siiyey farriinta ahayd inuu iyaga xukumi doono. Marka ugu horesay uu farriintaas uu Ilaah ka helay bixinayey wuxuu ku bixiyey si carruurnima ah iyo weliba nacasnimo. Laakiin Erayga Ilaah weligiis ma bedelmi doono. Sheekadu waxay u leexanaysa wakhtiga uu Ilaah tixgelin lahaa balamada uu horey u qaaday ayaa dhowaan kaamilmi doonta. Yuusuf daacad buu u yahay Erayga Ilaah. Markii Erayga la tixgelin doono, isaguna waa la tix gelin doonaa.

Cutubka 27aad

Dadka kale ku soo dhawey toobadkeenidda

(Bilawgii 42:1-21)

Yuusuf wuxuu la yaabanaa inuu mar dambe arki doono Yacquub iyo walaalihiisa iyo in kale. Noloshiisa cusub ayaa ka dhigtay inuu ilawbo *‘Waxyaalaha guriga aabbihiis ku saabsan oo dhan’* (41:51). Ilaah si awood leh oo xeer sare ah ayuu ula dhaqmaa dadkiisa. Wuu tababary wuuna hogaamiyey Yuusuf sanada badan. Hadda sheekada waxay gaadhay heer ay u leexanayso sida ay Yuusuf iyo walaalihiisa iyo Yacquub ay mustaqbalkoosa ula tacaalayaan. Waxay ahaayeen dad dembiilayaal ah oo qaladaad badan sameeya. Yacquub sanadihiisa hore wuxuu ahaa mid khiyaanalaw ah oo aan dadka kale wax la jeclayn. Qaladaadkan noloshiisa ku jiray ayuu Ilaah aad uga shaqanayey. Saa ay tahayna ilaa hadda waa suurtagal inuu dembiyadaas sameeyo.

Carruurta Yacquubna waa kuwa iyaguna dembiilayaal ah. Waan aragnay nacasnimada Diinah, iyo dhibatooyinka faraha badan ee ay wiilasha Yacquub. Waan aragnay sharka ay sameeyeen Rubbeen iyo walaalihiisa iyo sida ay u hinaasayeen Yuusuf iyo Benyamiin.

Yacquub iyo reerkiisana durbaba way daremeen abaarta adduunka oo dhan saamaysay oo waxay u safreen Masar si ay cunta uga doontaan (42:1-3). Isla sida uu Ilaah dhibatooyinka nolosha Yuusuf farriin ku gudbinayey, marxaladda abaarta ayuu hadda u istecmaalay nolosha Yacquub iyo reerkiisa si uu hawl ugu fuliyo tegitaankooda Masar. Yacquub ma doonaynin inuu Benyamiin diro maxaa yeelay isla sida uu Yuusuf u jeclaan jiray ayuu hadda u jacayl yahay Benyamiin (42:4).

Tobbankii walaalo way yimideen Masar waxaana loo geeyey Yuusuf. Way u sujudeen isaga – waxayna ahayd ficil lagu tixgelinayey wuxuu Yuusuf labaan sano ka hore ku riyooday uu walaalihiis ugu sharaxay (42:5-6). Waa inay ahayd maalinta ugu qiirada

badnayd uu Yuusuf noloshiisa kala kulmay markuu fahmay inay kuwaasi walaalihiis yihiin (42:7).

Yuusuf sidee buu ula macaamiltami doonaa iyaga? Waxaa suurtagal ahaan lahayd inuu iyaga kula dhaqmo **aargudasho**. Wuu lahaa awood iyo fursad uu iyaga xabsiga ku rido oo ay halkaas ku jiraan tobban sano isla sida isaga loo xabisay oo sanada badan loo xidhay. Wuu awooday inuu iyaga inuu iyaga u muujiyo **inuu isaga yahay kan guusha leh iyaguna ay yihiin kuwa khasaaray**, inuu hortooda iskula weynaado, inuu iyaga ku jesjeeso, inuu iyaga ka dhigo kuwa iisu dareema inay dembiilayaal yihii. Laakiin ma uusan samaynin mid ka mid ah waxyaalahan oo dhan.

1. Wuxuu iyaga kula dhaqmay hab is celin leh. Kuma uusan degdegin inuu isukeymuujiiyo iyaga kan uu yahay. Wuxuu rabbay inuu iyaga caawiyo laakiin caawinta dadka kale inta badan waxay qaadanaaysa wakhti xaadir ah. Qofka waa inuu suga ilaa wakhtiga lagula balamay in lala kulmayo. Wax qiima ah kuma jiraan inuu qofka wuxuu yahay oo dhan hal mar soo banaana dhigo (eeg Matayos 7:6). Marka ugu horesa uu iyaga la kulmay, Yuusuf wuxuu iyaga ula dhaqmay sida dad marti caadi ah oo wax eexasho ah uma uusan samayn (42:7). Ma ahan wuxuu dareensan yahay laakiin waa sida uu ku ficiltamay. Isagu wuu gartay iyaga laakiin iyagu ma aanay gara isaga (42:8). Ilaah mar kastaba si cadaalad ah ayuu noola dhaqma. Sababa Isaga u qaas ah daraaddood ayuu Ilaah maraha qaarkood si culus noola dhaqmaa laakiin habka uu nagula dhaqmayo ma ahan waxa uu uurka noogu hayo. Habka culus uu nagula dhaqmayo waa wax uu Ilaah dan ku wato laakiin waxaan hubnaa inuu dhabtii ina jacayl yahay uu wanaag nala rabo.

2. Wuxuu doonaya inay iyagu is gartaan oo ay gartaan taariikhdooda. Si culus ayuu iyaga ula dhaqmay ilaa ay ka gareen heer ay taariikhdooda uga sharaxaan isaga. Wuu ogyahay inuu Ilaah dan weyn ka leeyahay qoyska Yacquub oo dhan, wuxuuna xusuustay muujinta reerkan ku saabsan uu sanada badan ka hore maqlay (42:9). Maragfur been ah ayuu ka sheegay iyaga (42:9). Wuxuu Botiifa kala kulmay maragfur been ah. Hadda waxay isaga kala kulmayaan maragfur been ah. Waxay bilabeen inay sheekadooda shegaan. Waxay u yimideen inay cunta helaan (42:10). Waxay shegeen inay laba iyo tobban walaala ah yihiin (42:11). Labaatan sanno ayaa ka soo wareegatay inta ay kala tageen Yuusuf laakiin weli maskaxday ku hayaan. Kama hadlayaan inay ahaayeen kow iyo tobban wiil laakiin waxay ka hadlayaan inay ahaayeen laba iyo tobban! Ma aanay ilawbin waxay ku sameyeen Yuusuf. Haddii aad wax shar ah samaysid, xataa haddii ay labaatan sanno ka soo wareegato weli dhacdadaasi qalbigay kaa qabsanaysa. Ma awooddid inaan ilawdo; xumaanta aad ka xuntahay waxa aad samaysay tobnaad sanno ayey ku haysan doontaa. Markay arkeen inay xaaladda sii adkaanayso, waxay magacabeen Benyamiin iyo Yuusuf (42:12-14). Hadda Yuusuf wuxuu fahmay inuu Benyamiin noolyahay. Ma aanay iska xoorin Benyamiin sida ay isaga reerka uga dhex xooreen. Xumatooyinkan oo dhan markay ku sameyeen kaddib waxaa loo diiday inay meelna u dhaqaaqin. Iyagu sii dacaadeyey ilaa ay qalbiyadooda dib uga shaqaysiyaan ama iisu badhaan nafsaddooda. Haddaba wuxuu rabbay inuu ogaadu sida ay ula ficiltamayaan Benyamiin oo wuxuu iyaga ku amray inay xabsi geli doonaan ilaa ay Benyamiin keeni doonaan (42:15-16). Xabsiyu ku riday iyaga (42:18). Waxay isaga ka iibiyey dad isaga u iibsaday inay addoonsadaan. Iyagu isku meel wada fadhiisiiyey. Wuxuu doonaya inuu reerkiisa oo dhan tobadkeenid ka dhex dhaliyo. Wuxuu doonaya inuu qof walba dembiyadiisa garto oo uu qofba kan kale cafis ka weydisto. Dabadeedna wuxuu dhiibtay tallooyin ah sida lagu tijaabin lahaa damiirkooda iyo sida uu midba kan kale u arko (42:19-20). Maxay dareemi doonaan haddii uu midkood silcayo oo

laakiin kuwa kale la sii daayo? Sidaasi ayaa ku dhacday Yuusuf naftiisa. Mid ka mid ahaa laba iyo tobbankii walaalaha ahaa – Yuusuf wuu silcay laakiin kow iyo tobbankii kale nolol istareex ah ayey ku jireen. Maxay dareemi doonaan hadduu sharuud uga dhigo inay kanaan Benyamiin? Benyamiin, kaa oo ahaa wiilka labaad ee Raxeel, kaasi oo hadda ah kan uu Yacquub ugu jacayl yahay kow iyo tobbanka carruur, kaasi oo ah mid lagu bedelay jagadii uu Yuusuf aabbihiis Yacquub u haayey. Miyey ku fikiri doonaan inay isaguna ka taqsuusaan? Miyey ku farxi doonaan inuu Benyamiin xabsiga ku xidhnaano intay iyaga ka baxsanayaan?

Ugu dambaysta wuxuu iyaga gaadhsiiyey heer ay ku ogoladaan dembiyadooda. *‘Dhabta waan ka xunnahay,’* ayey yidhaahdeen (42:21). Way iisu qirteen dembiyadooda (*‘Nin walba wuxuu walaalkiis ku yidhi...’*). Waxay qirteen naxariis darrodooda darnayd. (*Waan aragnay sida uu u awoodda darnaa... waanna maqli waynay oohintiisa...’*).

Way qirteen xaaladda ay kaga sugan yihiin inkaarta Ilaah (*‘Haddaba xumaanta aan u geysanay way nagu soo noqotay’*).

Ilaah nolosheenu ka shaqaynaya si uu tobad keenidda noogu hogaamiyo. Maraha qaarkood xaalada daran ayey qaadanaysa in nagula ficiltamo si aan ku ogolaano inaan nahay kuwa aan nahay. Markaasi ayaan runta isku qiranayna. Markaan diyaar u ahaanno inaan runta iisu sheegno, Ilaah diyaar buu u yahay inuu na barakadeeyo.

Cutubka 28aad

Hoos joogidda amarka Ilaah

(Bilawgii 42:22-43:14)

Walaalaha Yuusuf meel fog ayey mudda gaaban gudaheeda kaga yimideen. Sanada badan ayey ogolaan wayeen ama qofna la qaybsan wayeen waxay ku sameeyeen Yuusuf. Hadda qalbiyadooda ayey ka ogoladeen dembiyadooda oo midba kan kale ayuu u qirtay. Rubbeen wuxuu iyaga xusuusinaya sida uu uga hor istaagay waxay samaynayeen laakiin ay dhagaysan wayeen (42:22). Way ogyihiin waxaa iyaga loo keenay inay maalinta xisaabtankooda loo keenay (42:22).

Yuusuf waxyaalahan oo dhan ma jirto mid uu ku faraxsan yahay! **Waa isla sida ay wax u dhacaan markuu Ilaah ogolaanayo inaan silecno.** Ma ahan inuu Isagau awood lahayn. Oo ma ahan inuu Isaga yahay mid madax adag. Waxa dhacaya oo dhan wax buu ka og yahay. Wuu awooday inuu joojiyo laakiin ma uusan rabbin inuu joojiyo. Isagu kuma farxo silica aan marayno. Laakiin wuu ka war qaba silica aan marayno wuuna nagu daynaya maxaa yeelay, dantiisu ku gudanaya. Yuusuf danta ugu jirtay ayaa waxay ahayd inuu reerkiisa oo dhan ku soo celiyo dareenkooda oo ay tobadkeenan oo midba midka kale u qirto dembiyadiisa. Waxa uu sameeyey waxay ahayd wax uu ku waajibanaa inuu sameeyo. Laakiin isagu kuma faraxsano. Inuu baxay ayuu ciil la baroortay taa uu ku muujinayey sida uu uga xunyahay dhacdada oo dhan (42:23-24ba).

Wuu noqday oo wuxuu sii watay hawshiisi hore. Wuu is raaciyey midkood, Simcoon, wuxuuna u ogolaaday inuu arko isagoo xarga lagu xidhayo (42:24ta). **Waxay iyaga xusuusinaysa ficiladii ay Yuusuf ku sameeyeen.** Waxaa la siiyey cunta ay cidda la

adaan lacagta ay cuntada ku bixiyeenna waa loo celiyey (42:25) wayna labteen (42:26).

Intay dib u sii safrayeen waxay fahmeen inay loo soo celiyey lacagta ay cuntada ku bixiyeen (42:27). Aad bay ula yabeen sida ay wac u dheceen. Noloshooda oo dhan waxay ku xidhantahay cuntada ay ka helayaan Yuusuf saa ay tahayna waxay u egtahay inuu Ilaah ka hor taagan yahay hab kastoo ay qalbi jilec kaga heli lahaayeen Yuusuf (42:28). Waxay u eg tahay inay wax kasta macaarad ku ahaadeen iyaga. **Isla aragtidaas ayuu yuusuf lahaa markuu marxaladaha daran iyo silica badan marayey.** Yuusuf wuu shalayn lahaa oo wuxuu odhan lahaa, ‘haddii uu aabbahay ii dirin lahayn inaan walaalahay raadiyo, haddii uun aanay u guuri lahayn Doodan, haddii uun uu Rubbeen maqnaan lahayn markay walaalahayga kale reer Ismaciil iga iibinayeen...’ Waxay u ekeyd inuu Ilaah macaarad ku ahaa Yuusuf. Haddana waxay u eg tahay inuu Ilaah macaarad ku yahay walaalihiisa isaga shar ku sameeyeen mana jirto wax ay ka qaban karaan.

Bacdigeedna cidda ayey tageen oo waxay sheekada oo dhan u shegeen Yacquub (42:29-34). Isla sida ay dhacdadaasi waxyaalihii la soo dhaafay u xusuusisay tobbanka walaalo, isla sidaas ayuu Yacquubna u ahaaday mid sheekada dhacdadaasi ku soo xusuusta waxyaalihii hore loo soo dhaafay. Yacquub muxuu samayn doonaa? Miyuu weli Yuusuf wiilasha kale ka jeclaysan doonaa mise wuxuu sii jeclaanaya Benyamiin? Intay juwaamaha furfurayeen waxay fahmeen inay lacagtii ay cuntada ku iibsadeen dambiishooda loogu soo riday (42:35). Cuntadooda oo dhan waxay ku heleen iyagoo aan wax lacag ah ku bixinin! Waxay u egtahay inay tuuga ahaayeen, mana awoodi doonaan inay is difacaan. **Haddana waa uu isla hawshii qabsatay Yuusuf.** Yuusuf waxaa dacaadeysay naagtii Botiifa wuuna awoodi wayey inuu is difaaco.

Tani waxay walaalaha dhex keentay inay is xaxagasho iyo eedeyn imaato. Yacquub wuxuu yidhi, ‘*Waxaad iga waddeen laba carruurteyda ka mid ah haddana waxaad rabtiin inaad Benyamiin iga waddaan!*’ (42:36). Rubbeen wuxuu dhiibtay tallo maskaxgal ah (42:37); waa calaamadda ugu horeysa ee lagu tilmaami karo qof nafsaddiisa mid kale u bixinayo. Waa calaamadda ugu horeyso oo lagu caddeynayo welwelka iyo dhibaataada jirta iyo inuu jiro qof xilka iska sarayo inuu wax xaliyo. **Yuusuf qayb ayuu kaga guuleystay inuu walaalihiis tobadkeenid ka dhex daliyo.**

Laakiin Yacquub diyaar uma ahan inuu ka laabto fikiraddiisi ahayd inuu carruurta Raxeel ka lexjaclaysto kuwa kale. Wuxuu diyaar u yahay inuu Simcoon dhinto bedelkii uu sii dayn lahaa Benyamiin (42:38). Saa ay tahayna Ilaah wuu yaqaan sida uu noola dhaqmo hab adag ilaa aan ka gaarno heer aan arkayno inaan waxtar lahayn. Abaarti way sii faaftay (43:1) oo durbaba Yuusuf iyo reerkiisa cuntada ay haysteen way ka dhamaan doontaa oo mar kale ayey haddana cunta u doonaanayaan Masar. **Yuusuf wuxuu ku dhaqmaya iimaan iyo dulqaad.** Wuxuu rajaynaya inay abaarta sii jirto si ay marxaladdaasi u ahaato mid wiilashiisa oo dhan isaga ku soo celisa mar kale. Durbaba cuntada guriga reerka Yacquub way dhamaatay (43:2) oo Yacquub wuxuu doonaya inay ku labtaan Masar. Wuxuu aad u jeclaa inay kuwa kale tagaan oo laakiin Benyamiin loo reebbo laakiin Yahuudah ayaa isaga la hadlay oo u sheegay in haddii ay Benyamiin is raaci doonin aan wax cunta ah laga siin doonin Masar (43:3-5).

Yacquub wuu yaaban yahay. Wuxuu Benyamiin ku jacayl yahay jacayl loo ekeysin karo mid lagu magacaabi karo sanam caabudid. Noloshiisa oo dhanba aad buu u

jeclaa Raxeel iyo labadeeda cunug ee kala ah Yuusuf iyo Benyamiin. Haddana Benyamiin waa ilmaha kii saddexaad ee gacantiisa ku jira. Yacquub aad buu u qiimaynayey Benyamiin. **Waxaa isaga lagula talinaya inuu sheyga uu aad u qiimeynayo Ilaah siiyo.**

Arintan haddana waxay gaadhay heer laysku xaganayo oo laysku eedeynayo. Heerkan la joogo Yacquub wuxuu iyaga ku waaninaya inay runta u shegaan (43:6). Waxay isku deyeen inay hortiisa isku difacaan (43:7). Waa isla xaaladdii jirtay sanada la soo dhaafay, markay walaalaha hinaasayeen Yuusuf.

Saa ay tahayna waxaa muuqata calaamad ah inay walaalahan jacayl cusub iyo naxriis iisu qabaan midba midka kale. Yacquub diyaar uma ahan inuu Benyamiin sii daayo laakiin Yahuudah ayaa xilka iska saaray inuu Benyamiin nabad ugu soo noqon doono gacanta Yacquub (43:8-9). Intay sii doodayaan wakhtiga wuu sii gurmaya (43:10) cuntada ay haystaanna way sii yaranaysa.

Yacquub waa inuu ogolaado codsiga wiilasha ee ah inuu sii daayo Benyamiin si uu iyaga ula aado Masar (43:11-14). **Mar kale ayaa isaga la gaadhsiyey inuu heerka ugu saraysa Noloshiisa u xilsaaro.** *'Haddii ay sidaani tahay sida ay wax ahaan lahaayeen...'* wax uu ka qabo ma lahan. *'El Shaday ha idinla jiro'*, Waa magaca Ilaah ee uu macnihiisu yahay 'Ilaaha awoodda badbaadada leh' waxaana inta badan lagu istecmaala marxaladaha daran ee awoodda baniaadmiga ka sareeyaan (eeg Bilawgii 17:1; 28:3; 35:11). *'Haddii aan murugeysannahay, waan murugeysannahay,'* ayuu yidhi Yacquub.

Yuusuf wuxuu dhib iyo dheefba ku dadaalaya inuu reerkooda oo dhan iska horkeeno. Yacquub waa inuu ogolaado inuu kala jacilaanta uu ilmahiisa kala jeclaaday ay dhibaataada jirta wax kaga geysatay. Walaalahan waa inay is weydiyaan inay cadawtinimadoodi ku sii jiri doonaan oo ay dembiyadooda inkiri doonaan oo ay aabbahood iyo midba midka kale inay dhexdooda cadawtinima iyo nacayb ku sii dhaqmayaan.

Cutubka 29aad

Jacaylka waa inuu saldhig adag lahaado

(Bilawgii 43:15-34)

Yuusuf wuu ku guuleystay waxyaalaha qaarkood. Sida uu reerkooda ula dhaqmay si tartiib ah ayey iyaga ku soo dhaweynaysa heerka toobad keenidda. Walaalaha Masar ayey ku soo noqdeen iyagoo wata laba raabka lacagta ay wax ku iibsan lahayeen iyo Benyamiinba (43:15). Yuusuf aad buu ugu farxay imaatanka Benyamiin. Ma ahan oo keliya inuu ku faraxsan yahay inuu walaalkiis arkay; waxay si dheraad ah calaamad u tahay inay walaalihiis ay walaalkood Benyamiin ula dhaqmin sida darnayd e ay isaga ula dhaqmeen. Waxay haddana calaamad u tahay inuu Yacquub aad Ilaah u tala saaranayey ka badan inta uu Benyamiin wiilasha kale ka jeclaa. Isla markiiba wuxuu qorsheeyey in xaflad weyn la dhigo si uu walaalihiis ula farxo (43:16-17). Walaalaha aad bay uga cabsi qabaan in la geeyo guriga Yuusuf. Waxay dareensan yihiin inuu Ilaah iyaga ka soo hor jeedo iyadoo ah inay u arkeen inay dhibaato hor leh nolohsooda ku bilaabatay. **Waa sida aan dhamaanteen dareenno markaan dembigaan geysanay la dhiboonayno.** Wax alla waxaan la kulano waxay dareemeyna inay tahay xukumaad nagula xukumayo. Waxaan noqonayna kuwa welwelsan oo ku walbahaara adduunka Ilaah, iyadoo aan dareemeyno inay wax kasta naga soo hor jedaan. *'Ninkani waa naga gees,'* ayey yidhaahdeen (43:18). Ar maxay habaabsan yihiin! Wakhtigan oo dhan Yuusuf wuxuu ku dadaalayey sida ay ku barakoobi lahaayeen, sida ay mukhtaatkooda ku heli lahaayeen, iyo sida uu xidhiidh wanaag uga dhex dalin lahaa dhexdooda iyo isaga. Laakiin habka uu ku sameeyey waa hab iyaga ka dhigaya kuwa ka xumaada waxay isaga ku sameeyeen. Sidee buu xidhiidh iyo jaalnima ula lahaani karaya walaalihiis iyaga ka fikiraya waxyaalaha xun xun ee ay ku sameeyeen isaga? Yuusuf ma lahayn hab kale uu iyaga kula dhaqmi lahaa. Waa inay horta aqbalaan oo ay ka soo noqdaan cadawtinimadii ay qabi jireen intuusan iyaga la yeelanin jaalnima iyo saaxibtinima cusub.

Isla sidaas ayuu nagula dhaqmaya Ilaah. Si joogta ah ayaan uga cabsi qabnaa uguna xunnahay adduunkiisa aan ku noolnahay saa ay tahayna mar kastaba xaaladaha Ilaah ma ahan kuwa naga soo horjeeda; waxaa loogu talagalay inay naga dhigaan kuwa Isaga aad ugu dhawaada. Waa inuu ku shaqayo si aan ku ogolaano dembiyadeena iyo xumaanta aan falnay oo dhan haddii kale jaalnima heer sare ah nagama dhaxayn doonto annaga iyo Ilaah.

Waxay isku deyayaan inay sharaxaan wax ku saabsan lacagta (43:19-22) laakiin Yuusuf ayaa iyaga qalbi qaboojiyey (43:23). Wuu u wanaagsanaa iyaga. Wuxuu soo bixiyey Simcoon wuuna u adeegay baahidooda (43:24). Waxay maqleen inay la cuntayn doonaan Yuusuf (43:25).

Cuntayntii ayaa bilaabatay. Waxay isaga siyeen hadiyadaha ay u keneen (43:26; eeg 43:11), wuxuuna iyaga ka wax ka weydiyey xaaladda Yacquub (43:27-28) oo si heer sare ah ayuu ula macaamilooday walaalkiisa gacaliye – Benyamiin (43:29). Sidan ayuu Ciise noola macaamilmaya markuu doonayo inuu na barakadeeyo. Ciise isuma key muujinayo intaan weli dareensannahay inaan dembiilayaal nahay ilaa aan laakiin wuxuu si buuxda isu key muujiya markaan dareensannahay inaan nahay kuwa dembiyadooda loo cafiyey uu ka buuxo iimaan dhan. Mar doonayo inuu isu key muujiyo markaan dareensannahay inaan nahay kuwa xukuman. Laakiin intuu Ciise

iska xajinayo inuu isu key muujiyo, waxaa ka buuxa uu noo leeyahay Jacayl. Aad buu uga dan leeyahay marxalad kastoo aan nolosha kala kulmayno (*'Wuxuu wax ka weydiyey xaaladda ay nolosha kaga sugan yihiin,'* (43:27). 43:27).

Yuusuf weli diyaar uma ahayn inuu isu key sheego kan uu yahay laakiin waxaa ka batay jacaylka uu reerkooda u qabo taa daraaddeed wuu is celin waayey. Waxay ahaatay inuu banaanka u baxo ayuu ooyay (43:30). Walaalaha wax aad u xun ayey ku sameeyeen isaga laakiin Yuusuf xumaanta lagu sameeyey oo dhan dhinac buu u dhigay. Wax uqdada ah uu iyaga u qabo ma jirto. Aad buu ugu faraxsan yahay una jacayl yahay iyaga oo farxaddiisa waa mid isaga gaadhsinaysa heer uu is celin waayey. Jacaylka Ciisena waa sidaa oo kale. Waxaan u malayn karnaa inuu macaarad nagu yahay – laakiin fikiradda aan qabno ma ahan wax aan ka ahayn xumaanta aan samaynay iyo muujinta aan ku muuninayno sida aan nafsad ahaanteena dadka ula macaamilno. Madaama aan xukumaad dareemeyno markaan dadka u gefno waxaan u malaynayna inuu Ilaahna saa noola macaamilmayo markaan u gefno. Laakiin Ciise saa ma ahan! In kastoo ay walaalaha si aad u xun ula macaamilooden waa hore, Yuusuf inaba wax uqdad ah uma qabo iyaga. Wuxuu aad uga walbahaarsan yahay aadna u jacayl yahay inay iyaga xaaladdoodi hore ee dembi la'aanta ahayd reerkoodi hore ula midobaad.

Yuusuf wuu soo noqday cuntaytina way bilaabatay (43:31-32). Waxay ahayd wax la yaab leh oo habka loo fadhiistay waxay muujisay sawirka sida ay ciddooda ku ahaan jireen (43:33). Ciise waa sida Yuusuf. Xataa maraha qaarkood oo aan Isaga xumeynay oo aan ka jeesanay, macaaradnimadu waa mid xaggeena ka timid ee ma ahan tu xaggisa nooga timid. Isagaan ku dembaabnay; Isagoo aan wax xumaati ah nagu samaynin.

Binjarii waxaa loola dhaqmay si heer sare ah oo sharaf mudan (43:34). Heerkan sare ee sharafta leh uu Yuusuf ula dhaqmay walaalkiis Benyamiin waxay ku imaatay madaama uu Benyamiin yahay walaalka dhabta ah ee Yuusuf. Walaalaha kale waxay ahayeen kuwa aanay waalidiinta oo dhan wada wadaagin. Yuusuf wuu wada jeclaa dhamaan walaalahiis oo dhan laakiin Benyamiin ayuu aad ugu dhawaa maxaa yeelay, waxay ahaayeen isku hooyo – waxaa dada dhashay Raxeel. Waa sida sida uu Ciise noola dhaqmo. Isagu waa walaalkeen. Isagu waa **Wiilka** Ilaah, laakiin annagu waxaan nahay wiilasha la korsaday ee Ilaah. Ma ahan inaan hooyo wada wadaagnay laakiin xagga ruuxiyanka ama xag Ilaah waxaanu nahay walaalaha Ciise. Waxaan wada wadaageyna muuqaalkiisa baniadminimo; Isaguna wuxuu nala wadaagaya muqaalkeena baniadminimo. Waxaan ka wada nimid isku qoys. Waxaan nahay isku Aabbo – Ilaah. Ciise wuxuu noola macaamiltamaya sida walaalihiisa ka da'da yar. Isagu taajir buu ka yahay xag sharaf iyo awoodba laakiin laakiin wuxuu diyaar u yahay inuu *'wiilal badan ka dhigo kuwa ka qayb qaata sharaftiisa'* (Cibraaniyada 2:10). Wuxuu qorsheynaya inuu walaalihiis keeno meesha uu Isagu ku heysto sharafta iyo maalka, Isagoo hogaaminaya boqortooyo heer sare ah isla sida uu Yuusuf madaxa uga ahaa Masar. Wuxuu doonaya inuu nala qaybsado maalkiisa oo dhan iyo garadkiisa oo dhan iyo wax alla wuxuu haysta oo dhan.

1. Waxaan alkan ka arkayna casharka ah inay dhibatooyinka ay isaga horey u soo mariyeen oo dhan inuu iyaga faa'ido u ahaa, ee ma ahayn mid ku sugnayd inuu isagu aargudasho sameeyo. Yuusuf aad buu uga fog yahay mid qalbigiisa ay uqdad iyo aargudasho ku jirto.

2. Waxay nabaraysa inuu halkaasi ka jiray dulqaad aad u weyn. Yuusuf mudda dheer ayuu niyeysnaa inuu isu key muujiyo iyaga laakiin iyagaan weli diyaar ahayn.

3. Waxay tusaysa iimaan heer sare ah. Yuusuf wuxuu rajaynaya inuu iyaga gaadhsiyo heer ay ku fahmaan muhimadda ku jirta cafiga Ilaah iyo inay damiir wanaagsan ku lahaadaan Ilaah hortiisa.

Cutubka 30aad

Yuusuf Wadaadkii sancoolaha ahaa

(Bilawgii 44:1-34)

Yuusuf wuu xoreyey walaalihiis, oo weliba wuxuu iyaga kula taliyey in lacagtooda loo celin doono (44:1). Koobkii Yuusuf ee qalinka ahaana waxay ahayd in lagu rido juwaanta Benyamiin (44:2). Subaxnimadii ayey baxeen (44:3) oo durbaba dadkii Yuusuf ayaa ka daba yimid iyaga oo rabbeen inay badhaan allaabtooda oo ay weliba ogadaan sababta ay u xadeen alaabta Yuusuf (44:3-5). Walaalihii way is difaceen oo yidhaahdeen inaysan jirin wax ay xadeen (44:6-8). *'Qof alla kii idinka mid ah oo wax lagu arki doono ahaado mid dhiman doono...'* (44:9). Durbaba koobkii waxaa laga dhex helay juwaanta Benyamiin (44:10-12).

Maxay tahay sababta uu Yuusuf habkan sirta ah ula dhaqmayo? Ma ahan inuu ciyaar samaynayo ama uu iyaga ka aar gudanayo. **Yuusuf wuxuu tijaabinaya dhabta ka jirta toobadkeenka walaalihiisa.** Waa habka uu ku tijaabinayo si uu ku ogaado xidhiidhka dhexdooda ka jira iyo sida ay Yacquub xidhiidh ula leeyihiin. Miyey weli dafiri doonaan midkood si ay iyaga u faa'ideystaan? Miyey weli dan yeeli doonin dareenka Yacquub? Marxaladdan uu Yuusuf keenay waxay ahayd mid uu walaalihiis ku tijaabinayey si uu ku ogaado inay weli ku dhaqmayaan sida ay isaga ula dhaqmeen labaan sanoo la soo dhaafay. Labaan sanoo la soo dhaafay waxay qorsheeyeen inay Yuusuf dilaan. Hadda dhimashada Benyamiin waxaa iyaga sahal uga dhigay Yuusuf! Sidee bay ku ficiltami doonaan? Miyey Benyamiin ku dayni doonaan inuu xaaladdan ku rafaado? Miyey ka tala bixi doonaan fikiradda Yacquub oo ay ka aar gudan doonaan wiilka uu aad u jeclaa, kaa oo ah kan ay dhashay ee la yidhaahdo Benyamiin? Yuusuf wuxuu rabay inuu ogaado.

Yuusuf aad buu u dan yeelaya inuu ogaado sida ay wax ahaan doonaan. Miyey walaalaha ogolaan doonaan in Benyamiin Yuusuf lagu soo celiyo si loo xabiso? Aad bay u wanaagsanayd inuu Yuusuf ogaado inuu is bedel weyn ka dhex dhacay nolosha walaalihiisa. Mar dambe ma samayn doonaan waxay walaalkood Yuusuf ku sameeyeen labaan sanadood ee la soo dhaafay. Sanada la soo dhaafay aad bay ugu rafadeen inay dhib mariyaan wiilka uu Yacquub ugu jeclaa ee ah Yuusuf; hadda dhib kasta ha ku qaadato ee waxay diyaar u yihiin inay badbaadiyaan wiilka uu hadda Yacquub ugu jacayl yahay ee ah Benyamiin.

Walaalaha way caddyeen inay xaaladda toobadkeenka dhab ka tahay. Markay arkeen Yuusuf inuu xaaladda sii adkaynayo (44:14-15), Yahuudah ayaa hadda ahaaday af hayeenkooda. *'Ilaah wuu soo banaan dhigay dembiyada addoomadaada'* (44:14); wuxuu u malaynaya in dhabtii uu Benyamiin koobka qalinka xaday. Kuma daynayo inuu Benyamiin xaaladdaas dhib ku galo. Wuxuu yidhi waxay diyaar u yihiin inay dhamaantood ku xabisnadaan Masar. Wuxuu dareensan yahay inay waxay ku sameeyeen Yuusuf ay hadda iyaga ku soo noqotay. Waxay noqonayaan kuwa maxabiis u ahaaday Masar isla sida ay Yuusuf u iibiyeen uu maxabiis uga ahaaday Masar sanada badan oo la soo dhaafay ka hore. Walaalaha way ogoladeen gefkooda maxaa yeelay, waxay umalaynayaan in ciqaabta walaalkood ay qabsatay oo iyaga loo edbinaya waxay walaalkood Yuusuf kusameeyeen daraaddeed. Ciqaabtiisa ayaa hadda korkooda ah.

Dabadeedna Yuusuf wuxuu iyaga hor dhigay imtixaan qaas ah. Iyaguu xoreeyey madaama uu fahmay inuu walaalkood Benyamiin xabsiga lagu ridi doono (44:17). Waa isla sawirkii ee waxyaalihii ay Yuusuf ku sameeyeen sanada badan ka hore markay Yuusuf u direen inuu addoon ka ahaado Masar oo ay laakiin xornimadooda xoojiyeen. Sidee bay ku ficiltami doonaan hadda?

Ilaa halkan waxaan arkayna inuu Yahuudah bixinayo hadal aad qalbiyada u taabanayo (44:18-34). **Hadalkiisa wuxuu caddeeyey jacaylka uu u qabo Yacquub.** Sanada badan oo la soo dhaafay waxba kama aanay danayneynin Yacquub markay Yuusuf iska leexinayeen, laakiin hadda wax kasta way bedelmeen. Yahuudah wuu macnayey. Yacquub aad buu u jacayl yahay Benyamiin (44:18-20) oo isagoo aan qalbigiisa oo dhan ku rabbin ayuu sii dayey Benyamiin (44:21-29). Nolosha Yacquub waxay ku rakabantahay nolosha Benyamiin (44:30). Hadduu Yahuudah la noqon waayo Benyamiin walbahaarka Yacquub wuxuu ahaan doonaa mid heer gudub gaadhay (44:30-31). Yahuudah wuxuu u riyaaqaya Benyamiin jacaylka uu aabbihis Yacquub u qabo awgeed.

Hadalkiisa waxaa ku jirtay fikiradda ah inuu ahaa mid lagu doorsaday Benyamiin. Wuxuu ahaa kan ballanqaaday inuu ka dambayn doono nabadgelyada Benyamiin ilaa uu dib cidda ugu soo laabto isagoo nabad ah (44:32). Hadda waxaa imaatay qaybta ugu boorista badnayd ee hadalkiisa. *‘Addoonkaaga ha hadho...bedelkii wiilkan uu xabsiga geli lahaa...’* (44:33). Jacayl uu aabbihis u qabo daraaddiis ayuu u rabay inuu isaga xabsiga galo oo Benyamiin xor laga dhigo. Haah, dhabtii, waa isla ficilka uu Ciise ku sameeyey iskutallaabta. Markuu iskutallaabta saarna waa sida iyadoo uu Ciise ku yidhi Aabbaha ‘Addoonkaaga ha haro bedelkii...’ ‘Aan aniga ahaado kan iskutallaabta lagu qodbayo bedelkii dembiilayaasha la qodbi lahaa.’ ‘Aan aniga ahaado kan inkaartaada qaadaya bedelkooda.’ Ciise wuxuu iisu dhiibay sida waaqdaheena. Yahuudah wuxuu ku ficiltamay sida Ciise Masiix. ‘Aan aniga ahaado kan bedelkii Benyamiin xabsiga geli lahaa.’ Waxay caddaynaysa inay walaalaha qumaati u toobadkeneen aadna u bedelmeen aadna uga xun yihiin wax alla oo ay horey u sameeyeen. Xataa markii la siiyey fursad ay iyaga xor ku ahaadaan oo ay laakiin kaga tagaan Benyamiin way dideen inay la’ aantiis tagaan. Waxay ku tashteen inay silcaan bedelkii uu Benyamiin silci lahaa jacayl ay aabbahood u qabaan awgiis. Ciise sidaa buu ahaa. Wuxuu doortay inuu edbinteena qaato si aan u ahaano kuwa xagga Rabbiga xidhiidhkooda ka wanaagsanaado.

Hadalkiisa waxaa ka muuqata in Yahuudah naftiisa uu yahay nin cusub. Hadda waan fahansannahay sababta sheekada Bilawgii cutubka 38 loo geliyey halkan cutubka 37 iyo cutubka 39. Waa dhacdooyinkan ka dheceen cutubka 38 kuwa is hoosaysinta ugu weynayd u guda geliyeen Yahuudah oo waxay xaaladdaasi isaga ku hogaamisay inuu ahaado nin is hoosaysin leh oo dadka naxariis iyo jacayl u qaba. Wuxuu ahaa dembiile niyad jabay oo ahaaday dembiile is hoosaysiyey oo qalbi jilecsan lagu abuuray.

Yuusuf ugu dambaystii wuxuu ahaaday nin imtixaanadiisa ku aaminay inay walaalahiisan ay dhabtii yihiin kuwa toobadkeenay dembiyadii ay sameeyeen sanada badan oo la soo dhaafay. Haddii hadda fursad kale la siiyo mar dambe kuma noqon doonaan waxay sanada la soo dhaafay sameeyeen. Haddii ay fursad kale helaan oo ay isla dembigii ku sameyaan, way ka wada horjeesanayaan oo walaalkood Benyamiin la taagnaan doonaan.

Durufta ayaa ku qasabtay Yuusuf inuu ku dhaqaaqo wuxuu sameeyey. Maxaa faa’ida ah ee ay lahaan lahayd hadduu reerkooda oo dhan Masar keeni lahaa ee ay laakiin

uqdaddii iyo nacaybkay qabeen weli iisu qabaan intay Masar jogaan? Maxay tahay faa'idada ku jirta inay walaalihiis meesha ku xanaaneyo oo ay isaga ka ag dhawadaan haddii ay marba haddii ay dilayaan isaga fursadda ugu horeysa ee ay heli doonaan?

Laakiin waxyaala badan oo dheraad ah ayaa jira. Ma ahan oo keliya inuu Yuusuf intixaanada uu walaalihiis siiyey kaga caddaatay inay bedelmeen, **laakiin wuxuu kaloo dhexdooda midba midka kale u muujiyey inay is aaminaan oo ay ogadaan inay daacad iisu yihiin oo ay qalbi nadiif ah iisu hayaan.** Waxay dib ugu labteen nolohsii hore ee ay ku noolaan jireen intaanay xaaladdii darnayd marinin Yuusuf oo weliba intay waxyaalahan oo dhan dhacayeen ma aanay ogayn in qofka ay la macaamiltamayeen uu Yuusuf ahaa ayey casumaadda oo dhan dideed isla sida ay yeeli jireen labaatan sanoo la soo mooday. Waxay lahaan doonaan farxadda ah inay ogadaan inuu mid kastoo iyaga ka mid ah bedelmay. Waxay ku faraxsanaan doonaan inay jarrabaad kastoo loo dhigay aad si xoog leh uga hor jeesteen si aanay dib ugu noqonin dembiyadii ah horey u sameeyeen labaatan sannoo la soo mooday.

Weliba waxyaala dheraad ah ayaa jira. **Yuusuf wuxuu Yacquub siiyey caddeyn ku filan oo lagu ogaan karo inay wiilasha toobad keneen oo ay bedeleen noloshooda.** Dhabta ku saabsanayd dilkii laysku deyey in Yuusuf la dilo iyo sida ceelka moolda dheraa loogu ridi lahaa iyo sida ay reer Ismaciil uga iibiyeen – waxyaalahan oo dhan way soo wada bixi doonaan. Waxaa dhici karta inuu Yacquub u baahnaan doono in sida dhabta ah ee ay wax u dheceen loo sheego. Sidee buu u qaadan doonaa wiilashiisa dhacdadadan naxtinta lahayd sameeyey? Laakiin Yuusuf durbaba wuxuu soo bandhigay caddayn ku filan oo shegeysa sida ay wiilasha u toobadkeeneen oo ay uga soo noqdeen waddooyinkoodi sharka lahaa. Warka ku saabsan dembiga ay faleen iyo sida ay dhabta uga toobad keeneen dembiyadooda hal mar ayaa la wada gaarsin doonaa Yacquub.

Yuusuf wuxuu ahaa wadaad sancooola ah iyo mid reerkiisa dhaqanayey. Wuxuu iyaga gaadhsiiyey heer ay dembiyadooda kaga toobadkeenaan wuxuuna suurtagal ka dhigey inay iyaga iyo kuwa falkooda kula jirayba fahmaan inuu isbedel weyn ka dhacay noloshooda. Waxay diyaar u yihiin inay mar kale ahadaan reer midoobay oo ku midoobay Masar gudaheeda.

Cutubka 31aad

Cafiska daafaca leh

(Bilawgii 45:1-28)

Yuusuf hadda wuu qanacsan yahay in la gaadhi wakhtiga uu isu key muujin lahaa walaalihiisa. Wuu xaqiiqsaday inay walaalaha ka xun yihiin waxyaalihii dembiga ahaa ee ay sanada badan oo la soo dhaafay ay sameeyeen.

1. Saamaxadda Yuusuf aad bay u weynayd oo ma uusan doonaynin inay cid kale ogaato dembiga ay walaalihiis galeen. Sheekada ku saabsan waxyaalahay sameeyeen waa suurtagal in la ogaado hadduu qof joogo meesha uu walaalihiis isu key muujin doono. Sidaas daraaddeed ku alla kuwii Masriyiinta ahaa oo halkaa joogay ayuu iska diray (45:1). Hamigiisa aad buu u weyn yahay (45:2). Gofka Ilaah ka cabsada oo Ilaah addeeca waa qasab inuu leeyahay qalbi jilecsan oo dadka jacayl. Markaan cafinaayo ma doonayno inuu qof kale ogaado wuxuu qofka aan u cafinaayo nagu sameeyey.

2. Marka ugu horeysa walaalaha aad bay uga cabsadeen Yuusuf. Amakaag ayey ahaayeen cabsina way qabeen (45:3). Waan fahansannahay sababta. Dembi aad u weyn ayey ka galeen Yuusuf! Hadda isagu waa qofka ugu awoodda badan ee ay yaqaniin oo ay hadda naxariistiisa oo keliya ay ku fakan karaan. Markaan aad uga xunnahay dembiga aan samaynay – waa xaalad khatar ah.

3. Yuusuf wuxuu doonaya inay daremaan inay cafisan yihiin. Ma doonayo inaba inuu iyaga ka nixiyo. *‘Kaalaya agtayda,’* ayuu ku yidhi iyaga. Dabadeedna wuu u xaqiijiyay inay xaaladda xumeyn. *‘Waxba ha walbahaarina oo waxba midkiin midka kale yuusan ku xanaaqin.’* Ilaah sidaas ayuu noola dhaqmaya. Ma doonayo inaan inaba ku culaabaysanaano dembiyada aan samaynay. Walaalaha si aad ah oo ay dhab ka tahay ayey ku toobadkeeneen. Yuusuf ma doonayo inay inaba ku culaabsanadaan ka walbahaarka dembiyadii ay horey u sameeyeen. Ilaah wuxuu doonaya inaan dareenno in naloo cafiyey oo Yuusufna waa sida Ilaah oo wuxuu doonaya inay walaalihiis ogadaan inay yihiin kuwa dembiyadooda loo cafiyey (45:4-5ba).

4. Yuusuf wuxuu arkaya in xataa dembiga ay faleen lagu oofinayey dan weyn (45:5ta-8ba). Ilaah ma abuurin dembiga, saa ay tahayna ma ahan Ilaah ka hogaamiya dembiga mana hogaamiyo habka uu dembiga isku muujiyo. Ilaah wuxuu horseeday in hinaaska Yuusuf la hinaasay inuu gaadho heer lagu fulinayo doonista Ilaah. Way sahlan tahay in la cafiyo haddii la arkayo faa’idada ku jirta natiijada dhacdata. Yuusuf wuxuu rabaa inuu xaaladda oo dhan si sahlan ku macnayo si ay walaalihiisa sahal u qataan si ay iisu cafiyaan. Ilaah ayaa ka dambeeyey xaaladdan ilaa natiijadeedan laga gaadhay. *‘Ilaah ayaa I soo diray...Ilaah ayaa I soo diray...Ma ahan idinka kuwa halkan ii soo diray laakiin waa Ilaah...’* (45:5,7,8). Yuusuf saddex goor ayuu tan ku dhawaaqay. Wuxuu doonaya inay dhexdooda midba midka kale u cafiyo.

Ilaah wuxuu istecmalaya dembiga baniaadmiga. Iskutallaabta Ciise waxay ahayd mid aad u fool xumeyd laakiin Ilaah ayaa horseeday dembiilayaasha si doonistiisa si ay o oofiyaan dantiisa ee ma ahan dantooda.

5. Wuxuu doonaya inay dareemaan inay isaga nabad la leeyihiin. Isagu waa qof muhim ah (45:8ta). Waa inay warkan gaadhsiyaan Yacquub oo ay isaga u soo wadaan Masar (45:9-13). Wuxuu raba inay ogadaan inuusan wax uqdad ah u qabin iyaga waxaan ka ahayn jacayl iyo xanaan wanaag uu iyaga la rabo. In kastoo ay waxay ku sameeyeen ay isaga u geysatay xanuun iyo walbahaar labaan sano ah, Yuusuf wuxuu doonaya inay dareemaan inay isaga nabad la yihiin oo ay dareemaan inaysan weligood wax xumaan ah ku samaynin isaga.

Badanaa dadka ‘cafiyaan’ waxay yidhaahdaan waan ku cafiyey laakiin waxay jeclaan lahaayeen inay kuwa ay cafiyeen dareemaan xanuunka dembigaas oo ay la dhibtodaan. Yuusuf sidaa ma ahayn. Hab ayuu siiyey iyaga. Garbahooda ayuu ku ilimeeyey. Wuu dhuunkaday iyaga. Ugu dambaysta wuu ka dhaadhiciyey iyaga inuusan waxba u qabin iyaga. Waa uun markaas oo kaddib markay daremeen inay xor u yihiin inay isaga la hadlaan (45:14-15).

6. Midnimada reerka waxaa jirta hab ay dadka kale u taabanayso. Masriyiinta ayaa fursad u helay inay ogadaan sida la yaabka leh ee ay reerkan ku midawbeen (45:16). Waxba kama oga dhacdooyinka sanada badan ka hore dheceen oo sababay sida uu Yuusuf Masar ku yimid. Waxyaalahaas oo dhan horey ayaa si xigmad leh looga shaqayey. Jacaylka wuxuu dedaya dembiyo fara badan. Laakiin midnimada jacaylka lagu midawbay ee u dhaxayey Yuusuf iyo walaalaha ayaa aad u soo jiiday Fircoon oo wuxuu noqday mid isaguna aad ugu roonaado Yacquub iyo reerka oo dhan (45:17-20). Yuusuf wuxuu iyaga u dhiibay hadiyado ay u qadaan Kancaan si ay ugu geyaan Yacquub (45:21-24). Meesha uu jacaylka Ilaah dadka ka dhex muuqdo, dad badan ayaa jeclaanaya inuu qoyska noocaas ah ka mid ahaado. Dadka waxay jacayl yihiin wax kastoo jacaylka la xidhiidho oo haddii ay jacaylkaas dadka Ilaah ka dhex arkaan dadka Ilaah aad bay u jacayl yihiin inay ka mid ahaadaan qoyskaas.

7. Yuusuf wuxuu doonaya inuu difaaco jacaylka midnimada ee ka dhex jira reerkiisa. Intay sii baxayeen wuu waaniyey iyaga: ‘waddada ha ku doodina.’ Wuu ogyahay sida dareemada dembiga ay muran u kiciyaa. Intay sii socdeen waxaa suurtagal ah inay ka sheekeysanayaan sida ay wax u dheceen waana suurtagal inuu muran iyo eedeyn uu midba midka kale eedeynayo bilaabato. Waxay bilaabaya inay is weydiyaan qofka ay ka timid fikiradda ahayd in Yuusuf la dilo dabadeedna waxay xusuusan doonaan wuxuu qof walbaba ku sameeyey midka kale iyo weliba waxay ku sameeyeen Benyamiin.

Waa wax caadi u ah hogaamiye kasta inuu dhawro deganaanta iyo nabadda dadka uu hogaaminayo. Yuusuf dardaaran ka ayuu iyaga kala dardaaramay markay noqonayeen maxaa yeelay, wuxuu rabbay inuu nabadda dhawro. Jacaylka wuxuu u baahan yahay in la dhawro. Jacaylka wuxuu u baahan yahay in loo fikiro lana tixgeliyo. Jacaylka isma ilaaliyo ismana dhaqaaleyo. Jacaylka wuxuu u baahan yahay in eraya qaas ah loo istecmaalo si loo dhawro looguna hayo dadka Ilaah dhexdooda.

8. Aqbaar wanaagsan ayaa suganaysa Yacquub. Yacquub kuma saaxan kumana soo toosin inuu mar dambe Yuusuf arki doono, laakiin hadda way caddahay inuu arki doono! Way labteen si ay ugu shegaan warka wanaagsan (45:25-26) oo isagina amakaag ayuu la dhacay. Waxay isaga siinaysa nolol cusub (45:27) wuxuuna iisu diyaariyey inuu Yuusuf la kulmo (45:28). Nimcada la yaabka leh uu jacaylka is cafinta keenay dad badan ayuu sii taabtay oo noloshooda bedelay. Wax uu Yacquub aad wax kasta adduunka uga jeclaa ayaa hadda suurtagal noqon doonaan inay dhacaan. Aad buu Raxeel u jeclaa ka bilaabata maalinta ugu horeysay uu isha saaray iyada oo gabadh ah. Dabadeedna aad buu u jeclaa una hanaanaynayey wiilashiisa iyo

weliba labada uu ka dhalay Raxeel. Mudda labataan sano dhan ayuu lumiyey Yuusuf laakiin hadda wuxuu ku dhawyahay inuu mark kale arko isaga. Nimcada Ilaah dib ayey u cusboonaysinaysa rajooyinkeena oo waxay soo dhalinaysa waxyaalaha ugu waweyn ee aan mudda u riyaaqaynay inay ficil galaan. Yacquub wuxuu rabbay inay boqortooyada Ilaah horay u sii socoto oo weliba wuxuu rabay inay boqortooyada Ilaah horay uga sii socoto wiilka curudka u ahaa uu ka dhalay Raxeel. Hadda Ilaah wuxuu isaga siiyey wuxuu qalbigiisa jeclaa.

Cutubka 32aad

Yacquub oo tijaaba cusub bilaabaya

(Bilawgii 46:1-47:12)

‘Israa’iil’ (sida maraha qaarkood Yacquub loogu yeedhayo) waxuu hadda diyaar u yahay inuu u safro Masar. **Maraha qaarkood Ilaah waxyaala cusub ayuu nolosha nooga dhex bilaabaya iyadoo aan markii hore u malaynaynay inaan degnay oo aan mar dambe wax kale ku dhaqaaqi doonin.** Yacquub kuma saaxanin kumana soo kicin in isagoo gaboobay oo intaasoo sana ku noolaa dhulka axdiga inuu haddana inta noloshiisa ka harsan uu ku dhamaysan doono Masar! Weligiis ma uusan aadin Masar.

Wuxuu xaqiiqdan safarkan ka helay Ilaah intuusan safrin. Inuu Kancaan ka tago oo uu aado Masar waa hawl dhabtii Ilaah uu ka dan leeyahay. Ibraahim markuu saa sameeyey dhibatooyin ayuu kala kulmay (eeg Bilawgii 12:10-20). Isxaaq mar baa laga mamnuucay inuu halkaas aado (eeg 26:2). Waxay isaga gelin doontaa nolol cusub oo mar dambe ma arki doono Kancaan.

Laakiin intuu Ilaah ku caabudayey Bersheba (46:1), Ilaah ayaa isaga u muuqday. Muuqaalkan wuxuu ahaa kan afraad uu noloshiisa kala kulmo Ilaah (46:2) wuxuuna u caddeeyey inuu Ilaah raali ka yahay inuu aado Masar. Waa inuusan waxba cabsi lahaanin (46:3). Balamadii hore ee laga balanqaaday Isxaaq iyo Ibraahim horey ayaa loo sii waday. ‘Israa’iil’ iyo farcankiisa oo dhan waxay quruunta Israa’iil ee ku tarmi doonta Masar. Israa’iil wuxuu la jiri doonaa Yuusuf inta noloshiisa ka harsan wuxuuna dib u soo laaban doonaa isoo ah quruunta Israa’iil sanada dambe (46:4).

Waxyaalihii la sii sheegay iyo qorshooyinka Ilaah way noqdeen sida la filanayey. Sanada badan hadda ka hore markuu Ilaah Ibraahim u sheegay inuu farcankiisa dhul qalaad marti ku ahaan doonaan (eeg Bilawgii 15:13-14). Ilaah wuxuu sheegay inay halkaas joogi doonaan mudda gaaraysa afar boqol oo sano dabadeedna quruunta iyaga cadaadinaysay ee ay la joojeen ayuu Ilaah edbin doonaa oo dadka Ilaahna waa la xorayn doonaa.

Hadda waa la gaadhay wakhtiga la filanayey. Yacquub danta Ilaah ayuu ku jiray Ilaah ayaana istecmaalaya isaga waxaana loo istecmaalaya inuu Ilaah ku fuliyo waxyaala uu hadda ka hore balanqaaday inay dhici doonaan sanada badan oo la soo dhaafay. Isagoo uu Ilaah dhiiri geliyey, Yacquub iyo wuxuu lahaa oo dhan iyo reerkiisa oo dhan way ka tageen Kancaan iyagoo haysta xaqiiqda ah inay maalin uun ku soo laaban doonaan Kancaan (46:5-7). Aayadaha Bilawgii waxay sheegayaan inay dadka Israa’iil oo dhan halkaas jogaan. Waxaa jiraan ilaa iyo soddon iyo saddex qoys oo laga sheegayo Bilawgii 46:8-14, iyagoo tiradaas ay ku jiraan lixda wiil ee ay dhashay Lee’ah (iyagoo Yahuudah reer fog lagu magacaabay). Lix iyo tobban reer oo kale oo ka dhasheen Silfah ayaa laga sheegaya Bilawgii 46:15-18, iyagoo ay tiradaasi ku jirto naag la yidhaahdo Seerah. Wiilasha Beerah waxaa loogu abtirinaya fac siyaado ah.

Waxaa jiraan afar iyo tobban qoys oo ka soo farcameen labada wiil ee Raxeel (46:19-22) iyo toddoba reer oo kale waxay ka soo farcameen Bilha (46:23-25). Iyadoo laga soo reebay laba horey u dhintay (46:12) iyo laba ku dhasheen Masar niman dhan lixdan iyo lix ayaa aadeen Masar iyagoo wata naagahooda iyo carruurtooda (46:26). Haddii ay labada reer ee Ceer iyo Onaam (46:12) ay tirada ku jiraan iyadoo aan laga

reebin reerka Yuusuf iyo Benyamiin tirada waxay isku dhantahay toddobaatan (46:27).

Yacquub waxaa la siiyey wuxuu qalbigiisa u riyaaqayey. Shir la yaab leh ayaa la qabtay. Yahuudah, oo hadda loo haysto inuu yahay wiilka ugu weyn, ayaa reerka ku soo dhaweyey Gosha (46:28). Yuusufna wuxuu aaday inuu aabbihiis soo dhaweyo (46:29). Allah maxay maalin la yaab leh ahay! Isma aanay arkin mudda garaysa labaatan sano. Yacquub ma uusan filanaynin inuu mar dambe intuu noolyahay arki doono Yuusuf. Yuusuf wuxuu u riyaaqayey in balamada Ilaah ee sanada badan hadda ka hore la balanqaaday la oofiyo. Haddii aan waxyaalaheena oo dhan Ilaah u xilsaarno balamadiisa waa laga oofinaya nolosheena wuuna na siinaya waxyaalaha uu qalbigiisa u riyaaqayo. Yacquub aad buu kal jacayl ugu jeclaa Raxeel ka bilaabato maalinta ugu horesay uu isha saaray intay gabadh ubug ah ahayd. Yuusuf wuxuu ahaa curudkeeda. Noloshiisa oo dhan wuxuu u riyaaqayey inuu Yuusuf ahaado qof sharaf leh oo qaas ah. Sanada la soo dhaafay markuu Yuusuf sheegay inuu ahaan doono nin sharaf leh oo ay qoyska oo dhan u sujuudi doonaan, Yacquub wuxuu qalbiga ku haysan jiray erayadaas (eeg 37:11). Haddaba waxyaalihii uu qalbigiisa ka damacsanaa waa loo yeelay, wax kastoo uu Ilaah nala rabo waanu dhaxli doonaa haddii aan ku dhaxalno dulqaad. Yacquub ugu dambaystii wuu helay wax alla wuxuu u baahnaa oo dhan. Wuxuu ahaaday nin qanacsan, madaama uu ugu dambaysti arkay wejiga Yuusuf (46:30). Waxaa la siiyey nabadgelyo sugan, iyo meel uu gurigiisa ugu yeedhi karo inta uu adduunka ku noolyahay (46:31-47:6).

Yacquub waxaa la siiyey hawl joogta ah uu Ilaah ugu adeegayo. Yacquub wuxuu ahaaday saaxibka Fircoon, ninka adduunka ugu awoodda badnaa waayahaas (47:7-10). Ma ahayn suurtagal inuu weligiis ku riyoodo inuu soo dhaweyntaas sharafta leh iyo saaxibtinimadaas la yeelan doono Fircoon. Waxay ahayd mar la gaadhay saacadda abaablugudka Yacquub. Ilaah wuxuu jacayl yahay inuu noo abaal gudo. Waa run nolosha Yacquub waxaa ku jireen dhibatooyin badan. Waxaa jireen marar uu khiyaana ku jiray iyo mar uu carruurnimo ku dhaqmayey. Waxaa jireen mar uu iisu naxariisanayey mar waxay ahayd uu ku dhaartay inuu noloshiisa oo dhan ku jiri doono murug iyo baroorasho. Laakiin hadda wax alla wuxuu qalbigiisa mudda dheer uga riyaaqayey waa la siiyey. Jarrabaadda iyo silica uu soo maray oo dhan waa loo abaal mariyey. In kastoo uu aad u silcay, Yacquub wuu guuleystay *'Dib ugama murugoon doono waxyaalaha uu hadda ka hore nolosha kala kulmay maxaa yeelay, Ilaah ayaa qalbigiisa ka buuxiyey farxado aan xaddad lahayn'* (Wacdiyaha 5:20). Ilaah wuu awoodaa inuu wanaag noogu bedelo wax alla wixii silec iyo xumaan ahaa oo aan hadda ka hore nolosha kala kulannay. Qof kastoo gurigiisa ka sabray (isla sida uu Yacquub uga sabray gurigiisa ku yaalay Kancaan)...qof kasta oo walaala lumiyey...ama carruur (isla sida uu Yuusuf walaalihiiis uga tegay sanada badan isla sida uu Yacquub u lumiyey Yuusuf)... waxaa loogu abaal gudi doonaa waxyaala badan oo lala barbardhigi karin wixii la lumiyey (eeg Matayos 19:29). Yacquub iyo Yuusuf waxay heleen 'waxay lumiyeen wax ka badan' oo ay Ilaah ugu adegeen waxayna fursad u heleen inay ahadaan kuwa ay Boqortooyada Ilaah horay uga sii socoto.

Cutubka 33aad

Hogaamiye sancoola ah

(Bilawgii 47:13-31)

Hadda waxaan fahmayna sida la yaabka leh uu Yuusuf awood midda ugu sareysa ku helay. Ilaah wuxuu isaga siiyey sanada badan oo tababar ah dhamaan xagga dabiicaddiisa iyo weliba xagga hawlihiisa maamulkaba. Hadda waxaa caddaatay kartidiisa la yaabka leh taa oo ku muuqatay markii laga dhigay maamulaha sare ee dhulka Masar.

1. Yuusuf wuu diiday inay sharafta tiisa ahaato. Wuxuu ahaa addoonka ugu heerka sareeyey uu Fircoon weligiis adeegsaday maxaa yeelay, wuxuu Fircoon gaarsiyey heer uu beecsharadiisa kaga helo faa' idada ugu sareysa ee uusan weligiis helin saa ay tahayna Yuusuf inaba ma rabin inuu sharaftaas iskiisa u qaato. Inta badan kuwa Ilaah u adeega waxay jacayl yihiin inay sharafta isa siyaan. Yuusuf sidaa buu ahaa maalmihiisa uu dhallin yarta ahaa. Laakiin hadda wuu ka soo tegay heerkaasi isla weynida ay ku jiri jirtay. Wax alla wuxuu sameeyey wuxuu u sameeyey Fircoon.

Baahida ay dadka qabeen awgeed (47:13), Yuusuf wuxuu noqday mid fursad u helay inuu ahaado qofka jagada ugu sareysa ee awoodda badnayd hayey. Wuxuu sharciyeyey in misingada maqsiinada lagu asturay ay ahaato mid ay dadka iibsadaan ee ma ahan in bilaash lagu bixiyo. Marka ugu horeysa dadka lacag ayey dhibeen (47:14); dabadeedna waxay bilabeen inay xoolaha ay lahayeen wax ku iibsadaan (47:15-17). Durbaba xoolihii dhulkaas joogay oo dhan waxay noqdeen maalka Fircoon. Dadkuna si kale ma lahayn oo aan ka ahayn inay dhulkooda iyo xornimadooda u bixiyaan Fircoon (47:18-19). Yuusuf wuxuu dadka dhulkooda uga bedelay cunto (47:20) dadka Masarna diyaar ayey u ahayeen inay adaan meel alla meeshuu Yuusuf iyaga u tilmaamo (47:21). Dadka xaaskiisa hab ka duwan ayaa lagula macaamiltamayey (47:22); Yuusuf wuxuu guursaday gabadh uu aabbahayd wadaad ahaa. Jagada awoodda noocas ah leh waa mid aad khatar u ah. Dad yar ayaa jagada noocaas ah oo awoodda badan waddan ku xukumi karaya iyagoo aanan wax faasuq ah ku dhaqmin sida ay Yuusuf u ahayd. Laakiin Yuusuf awoodda uu lahaa ayuu istecmaalay inuu ugu adeego qof kale. Aad buu u sharaf badnaa laakiin wuxuu ogolaaday inuu ahaado ninka labaad ee xagga awoodda Fircoon ku xiga. Wax alla wuxuu sameeyey wuxuu u sameeyey Fircoon wuuna ku faraxsanaa heer maamulkaas.

Waa inaan sidan xidhiidh ula lahaano Ciise. Sharafta naga soo gaaraysa waxyaalaha aan samayno yaanan iisu qaadanin. Wax alla waxaan Ilaah u samaynayno ma ahan wax aan iska leenahay. Waxaa sharaftaas iska leh Ciise. Waa inaan ku faraxno markaan arkayno magaca Ciise oo la sharfayo.

Ciise naftiisa noloshu uu ku noolyahay ayaa ceenkan ah. Wuxuu ku qanacsanaa inuu yeelo doonista Aabbaha soo diray Isaga. Marar badan ayuu sheegay inuu u yimid inuu sameeyo waxyaalaha uu Ilaah Isaga u soo diray inuu sameeyo. Wuxuu ku qanacsanaa inuu sharafta oo dhan siiyo Aabbaha. Markuu Ilaah Isaga sareysiyey oo siiyey magaca ka sareya magacda oo dhan, waxay ahayd mid ku ahaatay '*sharafta Ilaaha Aabbaha ah.*' Ilaah wuxuu noogu abaal mariya mudanaan sare. Laakiin waa waxa aan ugu yeedhayo 'mudanaanta heerka labaad'. Mudanaanta heerka kowaad waxaa iska leh Aabbaha; waxaan ku noolnahay butaaca mudanaanta uu Aabbaha helayo. Mudanaanteena waa inaan Isaga la qaybsano Mudanaantiisa.

2. Yuusuf wuxuu noqday nin lagaga deydo xagga istecmaalka awoodda iyo gacan furnaanshaha. Awood aad u sareysa ayaa isaga heshay. Saa ay tahayna awoodda uu helay wuxuu si buuxda ugu istecmaalay sida uu baahida dadka ku dherjin lahaa.

Wuxuu iyaga siiyey midh si ay u beertaan. Wuxuu xoogga saaray in midhta la beero bedelkii la sii gedi lahaa ama stoorka la gelin lahaa (47:23). Beerta waxyaalaha laga soo goynaya badanaa waa inay ku noqotaa Fircoon haddana. Wuxuuna haddana xoogga saaray in faa'idada ka soo bixi doonta si xigmad leh lagu istecmaalo (47:24).

Dadka way ku qanacsanayeen inay ku sii jiraan addoonsiga noocan ah! Noloshooda ayey badbaadisay aad ayeyna u mahad celinayeen (47:25). Wakhtiga uu Yuusuf hogaanka hayey waxay Fircoon u ahayd faa'ido weyn maxaa yeelay, wuxuu helay wax uu ku moodo sanado badan (47:26).

Ku dhawaan noocyada dawlada adduunka ka jira waxay u shaqaynaya inay faa'ideyaan dadka ay hogaaminayaan haddii si xigmad leh oo naxariis leh lagu maamulo. Nooca addoonsiga ee Fircoon oo lagaga dhaqmayey Masar xiligaas waa mid aan lagaga hadli karin inay tahay mid ku deyasho leh, saa ay tahayna Yuusuf wuu ka shaqaysiyey si ay dadka u faa'ideystaan. Dadka inta badan waxay jacayl yihiin inay bedelaan noocyada dawlada – xagga Kiniisadda iyo dawlada adduunka ka jiraba. Laakiin xataa nooc dawlad ee xumaan lagu sheegi karo hormar waa lagu gaari karaya hadduu qofka hogaanka haya yahay mid wanaagsan. Haddii dhinac kale laga geego nooca dawlada waxay u ekaan karta mid aad wanaag lagu sharaxi karo laakiin haddii ay naxariis darro iyo xigmad la'aan, waxay ahaanaysa mid aanan wax faa'ido ah lahayn. Dabiicadaha dadka ayaa ka muhimsan nooca dawlada ee xukunka haysa.

3. Shaqada Yuusuf waxay Israa'iil ka dhigtay mid sanado badan hormar ku gaadhay. Dadka Ilaah aad bay barwaaqo u heleen mudda badan intay Gosha joojeen. Hogaanimada wanaagsan waxay Kiniisadda iyo waddankuba u keenta barako. Way fool xuntahay markay dadka hogaan la'aan yihiin laakiin waxay wax kasta wanaagsanaanayaan markuu Ilaah dadka u doorto hogaanka uu iyaga la jacyal yahay. Dadka waxay u baahan yihiin hogaamiyaal. Dadka badanaa waxay la'yihiin wax mada u ahaado oo dariiqa ay mari lahayeen ku toosiya. Masar way baabi'I lahayd hadduu Ilaah ku badbaadin lahayn nin sida Yuusuf ah oo iyaga badbaadiyey. Sanadaha uu waaya aragnimada kaga helay guriga Botiifa iyo xabsiga Fircoon ayuu kaga faa'idey inuu waaya aragnimo u lahaado sida dadka loo maamulo oo weliba hawlaha loo maamulo. Intay ku hoos noolayeen hogaanka Yuusuf, dadka way tiro bateen isla sida uu Ilaah horey u sheegay inay ahaan doonaan (47:27; eeg 15:13-14). Yuusuf wuxuu ahaa sida Ciise. Ciise wuxuu lahaa is hooseysin heer sare ah wuxuuna is hooseysin ku hoos joogay Aabbaha. Wuxuu lahaa amar oo dhan iyo awoodba laakiin waxyaalahaas oo dhan wuxuu u istecmaalay faa'idada dadkiisa. Inta badan waxaan u noolnahay madaama aan Isaga hoos joogno oo aan dadkiisa nahay. Markay noqoto isku hoosaysinta hogaaminta adduunka waxyaala badan ayaa jiraan oo aan ka fiirsasho ku samaynayno. Waxaan addeceyna dadka bedelkii aan addeeci lahayn Ilaah. Laakiin habka aan Ciise isku dhiibeyno waa mid aan xadad ama sharuud toona lahayn. Saa ay tahayna ma ahan is hooseysin xanuun leh laakiin waa mid farxad leh. Addoonsiga uu Ciise na addoonsanayo waa mid aan xornimo ku heleyno.

Cutubka 34aad

Madaxtinimo nimceysan

(Bilawgii 47:28-48:22)

Yacquub wuxuu iimaan ku muujiyey inay danta Ilaah ay kotalagalkeeda gaari doonto xataa dhimashadiisa kaddib. Wuxuu gaaray duqnima tan ugu sareysa (47:28) oo markuu ogaaday inuu dhiman doono wuxuu caddeeyey inay doonista Ilaah kotalagalkeeda gaari doonto. Wuxuu xaqiiq u lahaa inay dadkiisa ku laaban doonaan Kancaan wuxuuna rabay inuu dadka hortooda ku caddeeyo inuu rumaysan yahay inay mustaqbalka dadka Ilaah uu yahay mid ku salaysan Kancaan. Wuxuu rabbay in lagu duugo Kancaan maxaa yeelay, wuxuu xaqiiq u lahaa in ugu dambaysta Kancaan ay ahaan doonto wuuna hubay inuu Ilaah adduunka oo dhan barakadiisa u soo marin doono Kancaan (47:29-31b). *'Israa'iil'* allabari ayuu u sujuuday *'madaxa sariirtiisa'* ama *'ushiisa'* (47:31b).

Masixiin yar ayaa xoogga saara waxyaalaha dhici doonaan kaddib markay dhintaan. Saa ay tahayna rag iyo dumarba waa inay ahadaan sida Haabbiil kan *'weli hadlaya in kastoo uu dhintay'* (Cibraaniyada 11:4). Sida uu Yacquub u weydistay in lagu aaso Kancaan waxay soo bara kicinaysa rajada jirta ee ah in mustaqbalka Ilaah uu yahay mid ku jira Kancaanta laga xiisa dhigay, ee ma ahan mid ku jirta Masartan istareexa badan leh. Annaguna waa inaan ka fikirnaa hababka aan dhallinyarta uga hami gelin lahayn waxyaalaha dhici doona.

Waa in haddana la fahmaa inuu Yacquub u riyaaqsana iuu Ilaah ugu adeego xataa markuu aad u gaboobo. Hadduu Ilaah noo ogolaado inaan duqowno, waxaan fahmayna inay jiraan habab badan oo aan Ilaah ugu adeegi karno xataa markaan gabawnay oo aan tabar lahayn.

Yacquub wuxuu ku tilaabo qaaday sida ay carruurtiisa iyo carruurta uu awaw u yahay ay ku dhaxli lahaayeen balamada Ilaah. Kaddib marku Yuusuf dhaarta galay (47:28-31), Yacquub wuu xanuunsaday oo Yuusufna wuxuu watay labadiisa wiil si uu u soo eego Yacquub (48:1). Yacquub wuxuu aad u rajaynayey inuu meel gaarsiyo balamada reerka. Markuu Yacquub dhinto masuuliyadda lagu tixgelinayo balamada Ilaah waxay u xilsaaran tahay Yuusuf iyo walaalihiisa. Yacquub wuxuu dib u eegaya balamada. Ilaah wuxuu reerka nebi Ibraahim ka balanqaaday inay midhtiisa dhaxli doonto kuna badan doonto dhulka Kancaan (48:2-4). Balantaas waxaa loo dhaafiyey Isxaaq iyo Yacquub. Haddana Yacquub wuxuu gaaray heer uu u sii dhaafinayo laba iyo tobankiisa wiil. Wuxuu haddana doonaya inuu si sbeeshel ah u xuso xaaskiisa uu ugu jeclaa ee la odhan jiray Raxeel. Yuusuf wuxuu ahaa wiilkeeda oo Efreem iyo Manasehna waxay ahayeen wiilal ay ayeyo ugu qumanayd in kastoo ay weligeed arkin. Yacquub wuxuu sameeyey abaabul qaas ah. Wuxuu korsaday labadiisa wiil uu awowga u ahaa (Efreem iyo Manaseh) si ay u ahadaan sida wiilashiisa dhabta ah (48:5-6). Aayadda todobaad ayaa sharaxad ka bixinaysa sababta uu saa u yeelay. Wuxuu ka fikiraya Raxeel oo wuxuu doonaya inuu xuso. Wiilasha waa la tilmaamay (48:8-10); Yuusuf ma khiyaani doono isaga sida uu isagu mar u khiyaanay Isxaaq! Aad ayuu Ilaah ugu mahadinaya sida uu ugu ogolaaday inuu arko ilmaha uu awowo ugu quman yahay (48:11). Yuusuf wuxuu ilmahiisa u xilsaaray Yacquub (48:12); wuxuu iyaga u gudbiyey dhaxalkiisa.

Yacquub wuxuu wiilasha u barakadeeyey hab muujinaya inuu Ilaah maraha qaarkood hawshiisa u doorto dad aanan laga filanaynin si ay u ahadaan kuwa dhaxla barakooyinkiisa. Waxay ahayd caadi inuu wiilka cururka ah ahaado kan helaya barakada ugu weyn, laakiin laba qarniba Ilaah hab ka duwan ayuu ku shaqaysanayey oo wuxuu dooranayey dad aanan maskaxda baniadmiga looga malayn karin. Ilaah wuxuu doortay Isxaaq ee ma ahan wiilka Ibraahim curudka u ahaa uu aad u jeclaa ee la odhan jiray Ismaciil. Ilaah wuxuu doortay Yacquub ee ma ahan wiilka curudka ahaa ee la odhan jiray Iisaw. Yacquub cashar buu bartay. Wuxuu og yahay inay suurtagal tahay inay isla sidaasi uu Ilaah barakadiisa siini karo qof aanan laga filanaynin. Waa arintan midda uu Yacquub soo bandhigayo markuu ka hadlayo, inuu Ilaah isaga hogaaminayey, oo isagoo og ayuu barakadiisa siiyey Efreem, isagoo gacmihiisa laabtay markuu saa yeelayey (48:13-14). Dabadeedna wuxuu u duceyey Yuusuf, isagoo si qaas ah ugu duceynaya labada wiil (48:15-16b). Wuxuu ugu duceyey inay iimaan u lahaadaan si ay u awoodaan inay isku tilmamaan Ibraahim, Isxaaq iyo Yacquub iyo balaanta iyaga laga soo balanqaadayey (48:16b).

Yuusuf ma jeclaysanin in barakada ugu weyn la siiyo wiilka labaad bedelkii la siin lahaa kan curudka ah wuxuuna isku deyey inuu ku dadaalo in barakada ugu weyn la siiyo Manaseh (48:17-18) laakiin Yacquub qasid ayuu saa u yeelaya maxaa yeelay wuxuu hubaa in curudka baniadmiga uusan ahayn curudka uu Ilaah dooranaya uu hawlihiisa ku fushanayo (48:19-20). Dhamaantood way lahaan doonaan dhul weyn laakiin Efreem ayaa lahaan doonaa barakada ugu weyn.

Cutubka oo dhan haddaba wuxuu ka hadlaya xaqa Ilaah iyo kan Yacquub! Si uu u doorto mid alla kan uu la rabo inuu hawshiisa ku fushanayo. Ilaah waa xor oo wuxuu dadka u istecmalaya sida uu doono. Laakiin Ilaah wuxuu xornimadiisa u istecmaalaya inuu ku nimceyo dadka! Markuu xushay Yuusuf, wuxuu ugula dan lahaa wanaag (eeg 50:20). Markuu daayey kan ugu weyna oo uu doortay kan ugu yar, kan ugu yarna wuxuu lahaa barakooyin dheraad ah maxaa yeelay, wuxuu hor u ahaa inuu istecmaalo kan ugu yar. Yuusuf wuxuu doortay Efreem laakiin wuu wada barakadeeyey labada wiilkba. Waa habkan sida ay xornimada Ilaah ku shaqayso. Wuxuu xor u yahay inuu qof doorto uusanna qof kale dooranin. Wuxuu xataa xor u yahay inuu doorto dadka qaarkiis uusanna dooranin dadka qaarkood, laakiin danta mudda dheer ka bacdi fuli doonta uu inoo leeyahay waa mid noogu imaanaysa nimcadiisa.

Yacquub naftiisa ayaa xoojinaya fikiraddan. Barakada uu bixiyey isagoo gacmahiisa laabtay waxay ishaara u tahay inuu Ilaah yahay Ilaah la yaab leh ayey nagu waaninaysa. Hadda isla arintaas ayuu hab kale noogu sheegaya. Ma jiro qof weligiis dareemay xornimada la yaabka leh ee Ilaah ka badan inta uu dareemay Yacquub. *'Yacquub waan jeclaaday!'* Yacquub wuxuu wiilkiisa Yuusuf siiyey qaybta dhulka uu walaalihiis kaga badan yahay hoobadka buuraha halkaasi Kancaan (48:21-22)! Bilawgii 48:22 waxay ka hadlaysa dhacdooyin ku saabsan sida Shekeem loola wareegay taa oo aan waxba ka ogayn anaga. Waxaan hubaa inuu Yacquub ku faraxsanaa sariirtiisa dhimashada! Xataa marka ugu dambaysay intuusan dhimanin Yacquub waa uun odaygii waayeelka ahaa. Mar kale ayuu Yuusuf cashar ka siinaya nolosha, isla sida uu sanada la soo dhaafay yeelay markuu kala hadlayey arinta shaarka gacmaha dheraa! Saa ay tahayna hadda waa eray waana ah. Ilaah qofkuu doono ayuu siin kara baraka siyaada ah! Isla sidaana Yacquub xor buu u yahay inuu qofkuu doono barakadeeyo! Mar hore ayuu saa sameeyey isagoo kala jacayl tusay. Haddase wuxuu saa u yeelaya dan guud. Waa hab uu ku caddeynayey inuu Ilaah yahay Ilaah ku dhaqmaya xornimo nimcaysan, waa Ilaah aan xornimadiisa la su'aali

karin ama la leexin karin. Hadda walaalaha waa inay taladan ku qaadan durbaba iyagoo aan waxba su'aal ka qabin. Waa inay ogoladaan xornimada nimcaysan.

Ka fiirso

1. Marka laga hadlaya 'ushiisa korkeeda' waa turjumaad maskaxgal ah haddii qoraalka Cibraaniga loo akhriyo *matteh* bedelkii loo akhrin lahaa mittah; Cibraaniga asliga ah wuu ka duwan yahay kan hadda la qoro. Cibraaniyada 11:21 ayaa saa u fasireysa. Turjumaanada kale waxay u fadirayaan 'madaxa sariirtiisa'.

Cutubka 35aad

Sadaalintii ambabbixinta uu Yacquub dhiibay

(Bilawgii 49:1-33)

Yacquub wuxuu huubaa inuu mar dhaw dhiman doono, wuxuuna diyaar u yahay inuu sadaalintii ambabbixintiisa dhiibto. Wuxuu u wada yeeray laba iyo tobbankiisa wiil (49:1-2) oo midkood walba ayuu siiyey farriin iyo sadaalin mid walba qaas u ah.

1. **Waxaa jiraan saddex wiil oo nooloshooda kharibay. Rubbeen** (49:3-4) wuxuu ahaa wiilka curudka ah ee Yacquub. Madaama uu curudka ahaa waxay ahayd inuu ahaado qofka reerka lagala dardaarmi lahaa laakiin tayo la'aantiisa iyo dembiga laga magacaabay Bilawgii 35:22 oo sababeen in laga wareejiyo dhaxalka uu heli lahaa.

Simoon iyo **Laawi** (49:5-7) iyaguna way burburiyeen noloshooda oo waxay ku burburiyeen xaqdarroda iyo dhacdooyinka kale ee ay ku sameyeen waxyaalaha laga sheegayo Bilawgii 34:25-26.

2. **Waxaa jira hal wiil oo mustaqbalkiisa nuurayo.** Hogaaminta reerka waxaa lagu wareejiyey **Yahuudah**. Waxaan xusuusanayna sida uu ula dhaqmay gabadha cidda ah sida aan uga akhrinayno Bilawgii 38. Yuudas wuu is sharaf tiray wuxuuna muujiyey inuu ahaa nin naxariis daran. Markay inanta uuraysatay go'aanka keliya uu soo jeediyey waxay ahayd in banaanka loo saaro oo lagubo (38:25). Saa ay tahayna waxaa la fahmay inay uurka ay wadday uu ahaa kiisa.

Arintan foosha xun aad bay sharaf darro ugu ridday nolosha Yahuudah. Marka dambe ee aan isaga la kulmi doonno (Bilawgii 43:8-9) wuxuu noqday nin aad u degan oo naxariis badan. Hadalka uu ka yidhi Bilawgii 44:18-34 wuxuu na tusinaya sida uu qalbi jilecsanaan iyo naxariis u lahaa. Toobadkeenidda uu toobad keenay ayaa isaga ka dhigtay nin sharaf ka leh reer Yacquub dhexdiisa. Saddexda walaalo ee ugu horeyeen, Rubbeen, Simoon iyo Laawi waxay dhaxalka ay reerka ku hogaamin lahayeen ku wayeen noolol xumadooda. Yahuudah naftiisa wuu dembaabay laakiin toobadkeeniddiisa ayaa ahayd mid aad u weyn oo daacad ah, oo waxay noqotay inuu ahaado kan loo dhiibay masuuliyadda uu ku noqday madaxa iyo hogaanka reerka.

'Yahuudahow, walaalaha waa ku ammaani doonaan. Gacantaadu waxay saarnaan doontaa cadaawayaashaada qoortooda, anigoo ah aabbahaana wiilashaydu way kuu sujuudi doonaan, Yahuudah waa libaax dhiashiis. Wiilkaygiyow, wixii aad ugaadhsatay waad ka tagtay. Wuu kadaloobsaday, oo wuxuu u jiifsaday sida aar, iyo sida gool, haddaba yaa kicin doonaa?(49:8, 9).

Yahuudah wuxuu ahaan doonaa reer boqoraad, oo ay dhamaan reeraha kale oo dhan sharfi doonaan, wuxuu ahaan doonaa 'libaaxa' qabiilka Israa'iil. Saa ay tahayna jagadiisa hogaaminta waxaa loogu abaal marin doonaa habka ugu weyn oo uusan weligiis ku fikirin.

'Usha boqortooyada kama tegi doonto Yahuudah, Usha taliyuhuna cagihiisa kama dhex bixi doonto; Ilaa Shiiloh yimaado; Dadkuna isagay addeeci doonaan' (49:10)

Yahuudah wuxuu hayn doonaa xornimadaas lagu maamulayo qabiilka boqorada ilaa uu qof qaas ah ka yimaado kaasi oo ah ‘Shiiloh’. Erayga aad buu u macna adag yahay. Wuxuu ahaan kara eray uu micna hiisa yahay ‘Kan uu xaqiisa yahay’. Ama sida aan jeclahay inaan ku fikiro – wuxuu ahaan kara magac. Asalka Cibraaniga ee ah *sh-lh* waxuu ku lifaaqan yahay nabad. Waxaa xataa lagu macnayn kara ‘kan nabadaysan’, saa ay tahayna reerka boqorada way haysan doontaa boqornimadeeda ilaa uu ka yimaado ‘kan nabadaysan’. Erayga sida uu u yaalo haddii kor laga eego waxaa lagu macnayn kara abaab. Waxaa jirta magaala isla magacaas qabta. ‘Shiiloh’ (magaalada nabadaysan) waxay ahayd meesha tambuuga lagu keedinayey sanada badan. Mar dambe ayaa taambuuga loo reray Yerusaleem (Eray uu isaguna macnihiisa yahay ‘magaalada nabadaysan’!) Ma ahan wax cusub inuu hal magac ahaado mid meel lagu magacaabi karo oo weliba qofna lagu magacaabi karo. Kancaan waxay ahayd qof magaciisa intaanay ahaanin meel-magaceeda.

Wax alla waxay macnaha guud ahaatuba, ‘Shiiloh’ wuxuu ahaan doonaa qof xukumaad sare haya: *‘addeecista quruumaha ayaa isaga u imaan doonaan.’* ‘Shiiloh’ wuxuu ahaan doonaa qof maal badan leh. Wuxuu ahaan doonaan mid qaylkiisa ku quudin doono canabka ugu qaalisan. Wuxuu dharkiisa ku dhaqi doonaa khamri! (49:11). Maalmaha ‘qodxaanta iyo geedaha dhibka badan’ way idlaan doonaan oo dhul dhereg ah oo ay ka baxayaan canabka lagu istareexo ayaa soo bixi doonaan bedelkooda! Aad buu khamri u cabay oo indhihiisa way guduudan yihiin, oo caana badanna wuu cabbayey oo ilkihiisa way caddaadeen (49:12).

Waxa la gaaray mar taariikhda adduunka looga malayey inuu reerkii boqorada ee Yahuudah uu lumiyeey xornimadiisi, oo waxay u ekaatay inuu guriga Daa’uud ahaaday mid aanan micna lahayn. Durbaba waxaa guriga reer Yahuudah iyo guriga Daa’uud ka soo baxay qof muujiyey in dhabtii uu guriga Yahuudah micne beeline, oo faca Daa’uudna aad buu u jiray una shaqaynayey. Ciise wuxuu ka dhashay faca Daa’uud.

Mudda yar markuu Ciise yimid kaddib, qabiilka Yahuudah wuu baaba’ay. Yerusaleem waxaa la burburiyey markuu sanadka ahaa 70 dhallashada Ciise kaddib. Qoraalada qabiilada way lumeen oo ilaa maantadan ma jiro Yahuudi garanaya qabiilka uu ka dhashay, mana jiro qof sheegi karo dadka lagu tiring karo faca Daa’uud. Shakiilaha kama bixin Yahuudah ilaa uu Ciise ka yimid – laakiin markaasi qumaati ayey wax kasta u lumeen.

3. Waxaa jiraan saddeed walaalaha ka mid ah oo mustaqbalkooda lagaranaynin, Sebulum waxaa la siiyey dhul ku ag yaalay badda (49:13). Qabiilka **Isaakaar** waxaa la siiyey dhul beerista aad ugu wanaagsan oo waxay noqdeen beeraley (49:14-15). **Daan** wuxuu ahaa qabiilka ugu yaraa laakiin awooddiisa way ka weynayd inta uu qabiilka dhamaa (49:16-17).

Aayadda 18aad waa mid si lama filaan ah u soo dhex gashay gabayga. *‘Waxaan sugaya badbaadadaada, Yaahweh.’* In kastoo ay dhibatooyin fara badan suganayeen qabiilka Israa’iil, badbaado ayaa imaan doonta.

Gaad wuxuu ahaa mid si joogta ah ula dagaaltamayey kuwa weerarka ku soo qaadayaan (49:19). **Naftaali** wuxuu ahaanaya mid waara oo tarma wuxuuna ku noolaan doonaa nolol nabad iyo xaasiloon leh ee lagaga noolyahay miyiga (49:21).

Yuusuf wuxuu helay digniin cusub. In kastoo uu u eg yahay geed midho dhala oo daafaca (49:22), aad ayuu ka hor imaad fara badan ula kulmay maalmihiisa ugu horeyey (49:23). Aad buu u adkaystay (49:24) awoodda Ilaah ayaana isaga

xoogeysisay (49:25). Dhawr magac oo Ilaah loogu bixiyey marxaladan ayaa halkan ku taxan si loo muujiyo awoodda iyo weynaanta Ilaah: Kan Yacquub u roonaa...arijir wanaagsan...Dhagaxa Israa'iil...Ilaaha kuwa liita garab istaaga. Barakooyin badan ayaa ku yimid sida uu Ilaah isaga u istecmaalay (49:25t-26). Yuusuf waxaa lagula macaamiltamay sharaf laakiin wax dheraad ah oo sbeeshel ah lagama sheegin mustaqbalkiisa. Mustaqbalka boqortooyada Ilaah waa laga dareemi doonaa qabiilka Yahuudah, ee ma ahan qabiilada Yuusuf ee Efreem iyo Manaseh.

Benyamiin ayaa ah kan loogu dambaysiyey magacawidda. Wuxuu u eg yahay sida dawaaca xaragga daysatay ((49:27). Gabayga wuu dhamaaday (49:28) oo kaddib markuu Yacquub codsaday in lagu ag xabaalo reerka Ibraahim (49:29-32), waxaa naloo sheegaya dhimashadiisa (49:33).

Ma jiro mid ka mid ah saddeedan qabiil oo soo saari kara waxa ay soo sareen qabiilka Yahuudah. Waxay ahaanayaan kuwa bad joog ah ama beeraley ah ama kuwa dagaaltama – laakiin boqortooyada Ilaah horay ugama soconayso dadka barakada hal meel ku eg kaga qancay nooloshooda. Waxay horey uga socon karaan halka ruux ee la doortay, kan uu Ilaah doortay, libaaxa qabiirka Yahuudah – Rabbigeena Ciise Masiix.

Cutubka 36aad

Waxyaalaha horaanba ku jireen kutalagalka Ilaah

(Bilawgii 50:1-26)

Yuusuf wuxuu noqday nin uu dareenkiisa aad u kacsan yahay. Sileca uu Yuusuf ku adkaystay ayaa isaga u bedeshay inuu ahaado nin jacayl iyo naxariis leh. Sileca wuxuu nagu riixi karaya hal ama laba dhinac oo kala duwan: Wuxuu nagu beeri kara nacayb iyo uqdad ama wuu na jilcin kara. Yuusuf wuxuu ahaa nin qalbi jilecsan oo dadka aad u jacayl. Wuxuu ahaa mid aad aabbihiis u jeclaa oo wuu ku kor ilimeyey markuu aabbihiis dhimanayey (50:1).

Yuusuf wuxuu noqday nin iimaan leh. Wuxuu muujiyey iimaankiisa iyo iimaanka aabbihiis markuu Yacquub ku aasayey Kancaan (50:2-7b). Balanta Ilaah inaba ma quseynin Masar; waxay kuwada saabsanayeen Kancaan. Waxay ahayd in Yacquub lagu aaso ‘dhulka balanta’. Reerka Ibraahim waxay siba ahaadeen kuwa Masar ku lug leh. Dadka Kancaan waxay iyaga ugu yedheen ‘Masriyiin’ (50:11) laakiin dhulkooda wuxuu ku dul dhisnaa balanta Ilaah ee ku saabsan Kancaan.

Yuusuf wuxuu noqday nin sharaf leh. Masriyiinta aad bay u sharfayeen dadkan ka yimid dhulka Kancaan. Masriyiin fara badan ayaa Yuusuf u raceen si ay ‘duug ay dawladda sharfeyso’ uga bixiyaan Kancaan (50:7t-11). Yuusuf sharafta ugu sareysa ayuu ka helay Masriyiinta. Ilaah waxyaalahaas ayuu noo samayn kara markuu nala rabo. Laakiin ma ahan wax mudda dheer jiri doona. Cutubka Baybalka ee xiga waxaan ka arkayna ‘*Boqor aan waxba ka garanaynin Yuusuf*’ (Baxniintii 1:8). Yaanan aad ugu farxin sharafta aan adduunka ka heleyno. Ma ahan kuwa weligood jiri doona. Dadka maalin ayey odhan doonaan, ‘*Waxaa barakaysan kan ku imaanaya magaca Rabbiga*’ laakiin mudda yar dabadeed waxay odhan doonaan ‘*Hala qodbo!*’ (Matayos 21:9; 27:23). Saa ay tahayna sharaf khiyaas ah ma huma haddii ay mudda sii jireyso!

Yuusuf wuxuu ahaa nin xajiyey hawlihiisa. Balamada Ilaah oo dhan waxay ku lifaaqsanayeen Kancaan laakiin Yuusuf marna ma uusan damcin inuu halkaa ku noolaado. Wuxuu hubay in hawsha uu Ilaah ugu yeedhay ay kusalaynayd Masar. Hal mar ayuu eegay ‘dhulka ballanta’ kaa uusan arkin markuu toddoba iyo tobban jir ahaa kaddib, dabadeedna wuxuu ku noqday meesha uu Ilaah ugu yeedhay inuu hawlihiisa ka qabto (50:1-14).

Yuusuf qumaati ayuu u fahmay xornimada Ilaah (50:15-21). Waxyaalaha ku salaysan qorsheynta uu Ilaah horey noogu qorsheeyey waa mid aad u adag oo aan la fahmi karon laakiin waa dhab jirta oo halkan ka muuqata. Waa wax la yaab leh. Waa wax aanan la macnayn karin. Waxay u yara egtahay waxyaalaha ku saabsan Ilaaha Aabbaha ah, Ilaaha Wiilka ah iyo kan Ruuxa Qoduska ah waana wax is wada wata oo ay ka fakanaynin kuwa baranaya ama barayaan wax baridda ku salaysan diinta Masiixiga oo xigmaddooda kaga shaqaynayaan. Ma ahan mid maskaxda baniaadmiga lagu fahmi karo.

Walaalaha Yuusuf aad ayey u cabsi qabaan. Way ilawbeen xaqiiqdii ay u lahayeen cafiska ay ka heleen Yuusuf (50:15) tanna waxay iyaga ku hogaamisay inay khiyaano sameyaan (50:16-17) iyo fikirad xabsiyeed (20:18). Laakiin Yuusuf wuxuu ku

noolyahay xornimada Ilaah. *‘Waxaad iigula talagasheen shar...Ilaah wuxuu iigu dan lahaa wanaag.’* Wuxuu ogolaaday dhabta ka jirta dembiga dadka iyo masuuliyadda ay dadka qaadayaan. *‘Waxaad iigula talagasheen...’* waxay ahayd dembigooda. Waxaa iyaga ku jirtay niyadda nacaybka iyo hinaaska. Waxay qorsheeyeen dhimashada Yuusuf oo waxay go’aansadeen inay isaga ku lacageystaan oo ay ka iibiyaan dadka isaga addoonsan lahaa. Masuul ayey ka ahaayeen: *‘Waxaad iigula talagasheen’*. Laakiin taasi ma ahan dhamaadka sheekada. *‘Ilaahna kutalagal buu lahaa’*. Yuusuf wuxuu ku faraxsan yahay inay labada ficiltamayaan erayadooda is garab socdaan. *‘Waxaad iigu dan lahaydeen...Ilaah wuxuu iigu dan lahaa.’* Tan waa waxaa la yaabka leh ee maraha qaarkood loogu yeedhi karo *‘Kutalagalka Ilaah ee horey u jiray ee doonista xornimada ku saabsan’*. Kutalagalka Ilaah baniadmiga ayaa ka masuul ah. Labada ficiltamay waa inay hadaladooda is garab socdaan (sida ay ka tahay Faalimaha Rasuullada 2:23). Xaqiiqda uu Yuusuf u lahaa xornimada uu Ilaah ku go’aansanayey waxyaalaha uu samaynayey ayaa caawisay isaga inuu walaalihiis u cafiyo, waxayna ku caawisay inuu iyaga u xaqiijiyo inay isaga ka cafisan yihiin. Wuxuu walaalihiis ku yidhi: *‘Dhib maleh. Waxba haka welwelina. Ilaah ayaa dhacdaa oo dhan ka dambeeyey e. Ilaah wuxuu istecmaalayey qalaadaadkiina si uu wax kheyr leh uga soo dhaliyo.’* Yuusuf wuu cafin kara iyaga maxaa yeelay, wuxuu fahmay in wax kastoo dhacay ay ahaayeen wax uu Ilaah ka dambeeyey.

Sida uu Yuusuf u aaminsanaa xornimada Ilaah ayaa ku caawisay inuu waxyaalihii la soo dhaafay dib u eego (*‘Ilaah ayaa kutalagalka lahaa’*) oo wuxuu arkayey Ilaah oo waxyaalahaas oo dhan raali ka ahaaday, wuxuuna eegay waxyaalaha hadda dhacayaan (*‘si uu u kaamilo waxyaalaha hadda dhacaya’*) si uu xoog u lahaado. Fikiradda uu Yuusuf ka qabay xornimada uu Ilaah ku shaqayo ayaa isaga dhiirigal siisay. *‘Ha’* cabsanina’ ayuu ku yidhi iyaga *‘Anigaa idin siin doona...’* Xaqiiq ayuu siiyey iyaga mar kale si deganna wuu ula hadlay iyaga. Imaankiisa ayey ahayd oo wuxuu aaminsanaa xornimada uu Ilaah ku shaqaynayo taasi oo isaga awood ku siisay inuu saa ku hadlo.

Yuusuf waxaa loogu abaalguday reer farxad leh isagoo da’daas weyn jira.

Wuxuu noqday awowaha qarnigiisa labaad jira aad ayuuna ugu faraxsanaa gacan qabadka uu ka helayey reerkiisa (50:22-23). Tani waxay ahayd qayb ka tirsan waxyaalaha uu Ilaah isaga ugu abaal marinayey. Mudda gaaraysa labataan sano ayuu la’aa reerkiisa taasoo sababtu ay ahayd inuu noloshiisa u dhiibay si uu Ilaah ugu adeego, laakiin hadda ayaa loogu abaal marinaya wax alla wuxuu lumiyey oo dhan.

Yuusuf wuxuu ahaa nin iimaan ku dhaqda ilaa daqiiqaddiisa ugu dambaysay (50:24-26). Noloshu Masixiinta waa nolol si joogta ah iimaan lagu noolyahay had iyo goorba. Yuusuf wuxuu isha ku hayey doonista Ilaah. Maalmihiisa ugu dambeyey reerkiisa ayuu qalbiga u dhisayey (*‘Ilaah ayaa macaawinadiina u iimaan doona’*). Wuxuu jeclaa in lafahiisa mar uun la geyn doono Kancaan.

Buugga Bilawgii wuxuu ku dhamaanaya meesha uu Yuusuf dhiibtay farriinta ku saabsan meesha uu jeclaan lahaa in lafahiisa lagu aaso. Baxniintii waxay noo sheegeysa in Muuse *‘uu qaatay lafaha Yuusuf’* (Baxniintii 13:19). Buugga Yaashuucana wuxuu noo sheegaya in lafaha Yuusuf lagu aasay Shekeem (Yooshuuca 24:32).

Yuusuf ma doonaynin in loo xusuusto sida nin Masriyi ah laakiin wuxuu rabbay inuu loo aqoonsado inuu ahaa nin balamada Ilaah xajinayey. Wuxuu rabbay inuu loo aqoonsado inuu ahaa nin isha ku hayey balamada Ilaah. Bilawgii wuxuu ku dhamaanaya erayada, *‘Waxaa la geliyey sanduuqa kuwa dhinteen ee Masar’* (50:20)

laakiin Yuusuf wuxuu durbaba xaqiijiyey inuusan rabbi lahayn in maydkiisa karfanta Masar lagu dhamaystiro. Markay Cibraaniyiinta ka hadlayaan iimaanka Yuusuf waxay macnaynaysa erayadiisa uu ku dardaaramayey markuu dhimanayey oo uu ka hadlayey in lafahiisa lagu aaso Kancaan (Cibraaniyada 11:22). Lafahan waxay ka macna ahaayeen hab kale uu ku lahaa wuxuu ku dheganaanayaa iimaankiisa uu balanta ka leeyahay ilaa maalinta ugu dambaysa. Yuusuf wuu tix geliyey balamada Ilaah oo dhan wuxuuna rabbay inay cid kasta sidaa ogaato.

Haddii aad ku faraxday akhriska buuggan oo aad jeclaan lahayd inaad na caawisid si aan u awooddno inaan buuggan iyo kuwa kale u dirno wadaaddada **waddamada koraya** jooga, fadlan wixii dheeraad ah noogu soo qor ama hadiyaddaada noogu soo dir ciwaankan:

Sovereign World Trust

PO Box 777, Tonbridge

Kent TN11 0ZS

United Kingdom

Ama waxaad u diri kartaa '**Sovereign World**' qaybta waddankaaga uga xilsaaran qaybinta buugagta.

Waxaad nagu booqan karta shabaqa Intarnetka ee ah **www.sovereign-world.org**

Mise **www.codkanabada.org** si aad buugag kale oo dheraad ah u heshid.